Warqadda Faafinta

XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBBALAND EE SOOMAALIYA

12th January 2022

Guddoomiyaha Baarlamaanka Dowlad-goboleedka

Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya, Kismaayo, Soomaaliya

Mudane Guddoomiye

Iyada oo la raacayo qeybta 32(3) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka (PFM) ee 2017 iyo qeybaha 30aad, 32aad iyo 33aad ee Xeerka Hantidhowrka/Baarista ee 2016 ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS), waxaan ku faraxsanahay in aan kuu soo gudbino warbixinteenaa ku saabsan xisaabaha Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ee sannad maaliyadeedkii dhammaaday 31-ka Disembar, 2019 si loo horgeeyo Baarlamaanka Dowlad-goboleedka.

Mahadsanid,

Bashir Mohamed Bahale
Hantidhowrka Guud,
Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya

Tusmada Buugga

1. Erayada La soo Gaabiyay 3

2. Gogoldhig 5

3. Nuxurka Warbixinta oo Kooban 6

3.1 Doorka OAG 6

3.2 Ra'yiga Hantidhowraha Guud 6

3.3 Waxyaabihii Lagu Ogaadey Hantidhowrka oo Kooban.. 7

3.4 Gebaggebo 10

4. Hordhac..10

4.1 Waajibaadkeenna iyo Madax-bannaanideenna 11

4.2 Horumarka Ilaa Hadda 11

4.3 Caqabadaha 11

4.4 Qaddarin.. 12

5. Waxyaabihii La Oggaaday oo Faahfaahsan – Hantidhowrka Sannad Maaliyadeedka (FY) 2019 13

5.1 Dakhliga 13

5.2 Lacag-bixinnada 13

5.3 Wax-soo-iibsiga.. 13

5.4 Kharashaadka oo si khalad ah loo kala-saarey 14

5.5 Liiska Mushaaraadka 14

5.6 Hantida aan muddo gaaban la caddeysan karin (Non-current assets) 15

5.7 Bankiga iyo Kaashka.. 15

5.8 Miisaaniyadda 15

5.9 IT-ga Guud iyo Kantaroollada Adeegsiga 16

5.10 La-socoshada Soo-jeedimada Hantidhowrkii Sannad Maaliyadeedka (FY) 2018.................................... 17

Lifaaqa 1aad – Bayaamada Maaliyadeed ee Iskudhafan ee La Baarey ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS) ee Sannadkii Dhammaadey 31ka Disembar 2019 iyo warbixinta hantidhowraha ee la socota 18

Lifaaqa 2aad– Warqadda Maamulka ee Kama-Dambeysta ah. Warbixinta Hantidhowrka Madaxa-Bannaan Ee Ku Saabsan Baaritaanka Dowlad-Goboleedka Jubbaland Ee Soomaaliya (JSS) ee Sannadkii Dhammaadey 31ka Dismebar 2019. 19

1. Erayada La soo Gaabiyay

Erayga La Isku Gaabiyay	**Ereyada oo Kaamil ah**
CPO	Ballanqaadka Amarka Lacag-bixinta
CSC	Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah
Agaasimaha Guud (DG)	Agaasimaha Guud
FCDO	(UK) Xafiiska Horumarinta, Arrimaha Dibadda iyo Barwaaqo-sooranka
FMIS	Nidaamka Macluumaadka Maareynta Maaliyadda
FY	Sannad Maaliyadeed
ICT	Tiknoolajiyadda War-isgaarsiinta iyo Macluumaadka
ID	Aqoonsi
IPSAS	Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda
ISSAI	Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hanti-dhowrka Sare
IT	Tiknoolajiyadda Macluumaadka
JSS	Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya
MOF	Wasaaradda Maaliyadda
NGO	Urur Aan Dowli Ahayn
OAG	Xafiiska Hantidhowrka Guud
PFM	Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha
PREMIS	Maareynta Kheyraadka Dadweynaha ee Soomaaliya
RMS	Nidaamka Maareynta Dakhliga
SAI	Hay'adda Hantidhowrka Sare
Agaasimaha Waaxda Khasnadda (TD)	Agaasimaha Waaxda Khasnadda

TSA	Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda
UNDP	Barnaamijka Horumarinta ee Qaramada Midoobay
USD	Doolarka Mareykanka

2. Gogoldhig

Sannadii la soo dhaafay, oo uu mas'uul ka ahaa Hantidhowrihii Guud ee geeriyoodey, iyadoo caawimaad laga helayo shirkadaha baarista sameeya ee waaxda gaarka loo leeyahay iyo la-hawlgalayaal deeq-bixiyeyaal ah, Xafiiska Hantidhowraha Guud (OAG) ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS) ayaa waxaa uu baaritaanno maaliyadeed iyo kuwa u hoggaansamidda shuruucda ku sameeyay xisaabaha dowaldda ee JSS. Meelaha u baahan in la sii wanaajiyo ayaa la sii aqoonsadey waxaanna la soo-jeediyay soo-jeedimo la-taaban karo oo ku saleysan waxyaabihii aan ku oggaaney baarista. Soo-jeedimadu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah warbixinnada baaritaankeenna/hantidhowrkeenna. In la dhaqangeliyo waa muhiim si loo sii wanaajiyo oo loo dardargeliyo bixinta barnaamijyada iyo adeegyada kharash ahaanta taabogalka ah ee loogu talagalay dadka ku nool Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS).

Iyadoo qeyb ka ah shaqadeenna, ayaa waxaan xaqiijineynaa in aan dabagal ku sameyno soo-jeedimada lagu soo-jeediyay baaristii hore si kuwa ka mas'uulka ah ay u qaadaan lagu dhaqangelinayo soo-jeedimadeenna.

Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG) ayaa si adag waxaa uga go'an in uu si fiican gacan uga geysto sidii looga gudbi lahaa caqabadaha hor yaalla hannaanka xakameynta iyo maareynta maaliyadaha ee aad iyo aadka looga taxaddaro. Waxaannu sii wadi doonnaa in aan sii joogteeyno oo aan sii bixinno aragtiyo ku saabsan sababaha asalka ah ee keena nidaamyada kontaroolka gudaha oo daciif ah.

Waxaan sidoo kale dooneynaa in aan u mahadnaqno la-hawlgalayaasha horumarinta, gaar ahaan kooxda PREMIS, oo sii wadey in ay xiiso u muujiso adkeynta kartida hawlgalka gudaha Xafiisyada Hantidhowrka Guud (OAGs) ee Dowlaha Xubnaha Ka ah Dowladda Federaalka (FMS).

Waxaan si kal iyo laab ah ugu mahad-celinayaa dhammaan hawlwadeennada Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS-OAG) oo si joogto ah ugu heelanaa waalijaabkooda iyo mas'uuliyadooda iyagoo ku jira duruufo adag.

3. Nuxurka Warbixinta oo Kooban

Nuxurkan warbixinta ee kooban wuxuu bixinayaa guudmarka waxyaabahii ugu muhiimsanaa ee lagu oggaaday warbixintan.

3.1 Doorka OAG

Annaga oo ah Hay'adda Hantidhowrka Sare (SAI) ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS), waajibaadkeenna dastuuriga ah waa xaqiijinta in maaliyadaha dowladda si sharci ah oo taabogal ah loogu isticmaalo adeeg bixinta. Taa macnaheedu waa in aannu nahay hay'ad u madax-bannaan ilaalinta maaliyadaha dowladda iyo amniga dhaqaalaha ee Dowlad-goboleedka Jubbaland sida lagu sheegay Qodobbada 88aad iyo 89aad ee Dastuurka Jubbaland iyo Qeybta 7aad ee Xeerka Hantidhowrka ee 2016.

Waxaannu baarnaa oo aan ka warbixinnaa mas'uuliyada ay Dowladdu inoo igmatey ee naga saaran ilaalinta lacagaha la helay, ha ahaato mid laga helay canshuur-bixiyeyaasha, deeq-bixiyeyaasha ama meel kale, iyo kharashaadka la xiriira ee laga bixiyay maaliyadahan oo ah hab daahfuran, anshax iyo xirfadlenimo ku dheehan. Sidoo kale, waxaannu ka salgaarnaa xaqiiqda heerka hubaalka macquulka ah ee in lacagaha dadweynaha ay Dowladda u adeegsato, habka uu ansixiyey Baarlamaanka, iyadoo loo marayo baaritaanno xirfadeed oo madax-bannaan. Waxaannu daraaseynaa sida iyo haddii maaliyadahan ay si cad oo sax ah ay uga soo warbixisay Dowladda iyo sida loo adeegsado marka loo eego dhaqaalaha, hufnaanta iyo taabogalnimada. Waxaannu ku faafinaa warbixinta hantidhowrka/baaritaanka Faafinta Rasmiga ah waxaanna marka hore u geynaa Baarlamaanka ka-dibna muwaadiniinta u dhashey Dowlad-goboleedka Jubbaland iyo daneeyayaasha kale annaga oo xaqiijinayna in ay hal bil gudaheeda ku helaan marka la dhammeeyo warbixinta hantidhowrka sida ku cad qeybta 32(3 iyo 4) ee Xeerka PFM ee 2017. Dhammaan warbixinnadeenna ayaa waxaa si guud loogu soo bandhigi doonnaa mareegtada OAG.

Gaar ahaan, Qeybta 30(6) ee Xeerka Hantidhowrka ee 2016 ayaa uga baahan hantidhowraha Guud (AG) in uu warbixintiisa ku soo daro:

- ra'yigiisa dhabta ah ee miisaaman ee xisaabaadka dowladda ee isku-dhafan iyo kuwa kala-soocan;
- waxyaabihii la ogaaday ee mugga lahaa iyo soo-jeedimada;
- nusqaamaha lagu tilmaamay nidaamka kantaroolka gudaha;
- faahfaahinnada diiwaannada aasaasiga ah ee aan la joogteyn; iyo
- lacago kastoo la bixiyay iyada oo aan la eegin dhaqaalaha ama waxtarkooda.

3.2 Ra'yiga Hantidhowraha Guud

Waxaan baarey bayaannada maaliyadda isku-dhafan ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ee sanadkii dhammaadey 31kii Disembar 2019. Bayaannadan Maaliyadeed ayaa ka kooban Bayaanka Qabashada iyo Lacag-bixinta, Bayaanka Isbarbardhiga Qaddarka Miisaaniyadda La Sii Dejiyay iyo Tan Rumoowday, iyo qoraallada bayaannada maaliyadeed oo ay ku jiraan siyaasadaha xisaabaadka mugga leh ee

kooban iyo macluumaadka kale ee sharraxaadda ah. Sannadkan, waxaan soosaarey ra'yi hantidhowr qeexaya in bayaannada maaliyadeed loo soo bandhigay si caddaalad ah, marka laga reebo arrimo cayiman. Bayaamada Maaliyadeed waxaa loo arkey in ay intooda badani ay waafaqsan yihiin qodobbada Xeerka PFM ee 2017 iyo Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda ee (IPSAS) - Warbixinta Maaliyadeed ee Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan. Ra'yiga Hantidhowrka oo dhammeystiran (ee la socda Bayaamada Maaliyadeed) waxaa lagu soo bandhigey Lifaaqa 1aad.

Waa suuragal Bayaamada Maaliyadeed ee 2019, sida loo soo bandhigey, in aysan si caddaalad ku dhisan u bixinaynin hawlaha maaliyadeed ee dowladda ee saddax, meelood, oo muhiim ah.

(a) waxaan ogaaney liidashooyin ka jira hannaannada liiska mushaaraadka oo sabab u aha dokumentiyo taageero aan dad ku filneyn oo guud ahaan dhan US$ 872,500; oo u dhiganta 7% ee wadarta guud ee lacag-bixinnada liiska mushaaraadka ee 2019;

(b) baaristeenna ayaa lagu aqoonsaday kharashaadyo guud ahaan dhan US$ 1,362,330 oo u dhiganta 38% ee wadarta guud ee kharashaadka marka laga reebo liiska mushaaraadka, ee lagu soo sheegay Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Lacag-bixinta taas oo aan lahayn caddeymo ku filan oo lagu caddeynayo in macaamulaadkan uu dhab ahaantii dhacey; iyo

(c) rasiidyo/qabasho dhan US$ 5,185,936 oo u dhigmar 33% ee wadarta guud ee rasiidyada/qabashada lagu diiwaangeliyay Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Lacag-bixinta in aan lagu taageerin dokumentiyada taageerada ee ku habboon. Annaga, sidaa daraadeed, waxaan hubin weynay in dhammaan rasiidyadan/qabashooyinka in lagu soocey madaxa xisaabta saxda ah ee sida lagu soo bandhigay Bayaamada Maaliyadeed.

3.3 Waxyaabihii Lagu Ogaadey Hantidhowrka oo Kooban

Kaash iyo banki

Waxaa jira Buugga Habraaca Xisaabta Bankiga. Haseyeeshee, lama raacin waxaanna jirta halis ah in is-waafajinnada bankiga in aanan si habboon loo diyaarin iyadoo ay ka maqan yihiin faahfaahinnada sida diyaariyaha, dib-u-eegaha iyo ansixiyaha bayaannada is-waafajinta bankiga ee dhammaan xisaabaha bankiga ee dowladda laga soo bilaabo bisha Jannaayo 2019 ilaa Oktobar 2019. Caddeynta diyaarinta, dib-u-eegista iyo ansaxinta ee is-waafajinnada bankiga waa in gacanta ku hayo maamulka.

Waxaa kaloo la oggaadey in ay jiraan 46 xisaabo banki oo aan dhaqdhaqaaq lahayn oo ka furan Dahabshil iyo Bankiga Salaam oo aan wax lacag ah ku harsaneyn taas oo aan shaqeyn muddo dheer kana socon wax hawlgal ah. Xisaabo banki ee aan dhaqdhaqaaqa lahayn waxay u nugul yihiin khiyaanno iyo ku-takrifal oo waa in xisaabahan qadiimiga ah la xiro.

Qabashooyinka

Nusqaamaha aasaasiga ah ee uruurinta iyo diiwaangelinta dakhliyada ayaa la aqoonsadey. Nusqaamahan aasaasiga ah ayaa guud ahaan sabab u ah nidaamyada kantaroolka gudaha oo daciif ah oo saameeya dhammeystirnaanta, baadi-sooca iyo saxnaanta dakhliyada la uruuriyay laguna sheegay Bayaamada Maaliyadeed.

Si kor loogu qaado ku kalsoonaanta macluumaadka lagu soo bandhigay bayaanka maaliyadeed ee ku saabsan qaddarada laga helay ilaha dakhliga ee kala duwan, nidaamka kantaroolka gudaha ah adag oo xoogan waa in la diyaariyaa oo la hirgeliyaa. Kantarooladan ayaa sidoo kale gacan ka geysanaya hubinta in dowladdu ay qaado dhammaan lacagaha la filayo iyo in dhammaan lacagaha la uruuriyey loo adeegsadey dan guud.

Lacag-bixinnada

Marka lacago la bixinayo, si kasta oo ay u yar tahay amaba u badan tahay, waxaa muhiim ah in la raaco hannaanka ku habboon ee ku xusan sharciyada iyo xeernidaamiyeyaasha khuseeya. Marka lacago la bixinayo, aad iyo aad ayay muhiim u tahay in caddeymo laga hayo tusaale ahaan dokumentiyada taageeraya sida: qaansheegyo, ogeysiisyada xawilaadaha bankiga, waraaqaha guddoonka alaabta, iyo qandaraasyada. Nasiib-darrose, qaar badan oo ka mid ah lacag-bixinnada dowladda ayaa la sii bixiyaa iyadoo aan jirin dokumentiyada noocaas ah ee taageeraya. Sida lagu bayaamiyey aasaaska lagu saleeyay faqrqadda ra'yiga hantidhowrka, 38% ee kharashaadka liiska mushaaraadka in ay ahaayeen midkood kuwo aan la taageerin ama loo arkayey in qeyb ahaan la taageeray. JSS waa in ay ka haysaa dokumentiyo taageeraya dhammaan macaamulaadka maaliyadeed, waa in aan wax lacag-bixinno ah la sameyn iyadoo aan si habboon loo eegin caddeymaha taageeraya qaddarka iyo dabciga macaamulaadka sababaya.

Wax-soo-iibsiga

Baaritaanadii ugu dambeeyay ma lahayn wax horumar ah oo muuqda oo laga sameeyay hannaanka wax-soo-iibsiga ee dowlad-goboleedka. Gaar ahaan, waxaa guud ahaan lagu guuldareystay in la raaco tilmaamaha wax-soo-iibsiga. Tusaalooyinka xeer-jebinta waxaa ka mid ah balse aan ku xaddidnayn:

- la'aanta tartan lagu xulanayo kuwa laga soo iibsado alaabooyinka iyo adeegyada; iyo
- in si xad-dhaaf ah loogu tiirsan yahay hal-meel oo laga helo keliya iyada oo aan loo yeelin sabab.

JSS waa in ay raacdaa tilmaamaha wax-soo-iibsiga si ay uga fogaato u hoggaansamid la'aanta Xeerka PFM ee 2017 iyo si loo yareeyo halisaha mugga leh ee khiyaannada iyo xatooyada iyadoo la hubinayo in qiimaha ugu badan ee lacagta lagu gaaro kheyraadyada iyo dhaqaalaha dowlad-goboleedka ee xaddidan.

Hantida

Aad iyo aad ayay muhiim u tahay in la ilaaliyo hantida dowladda iyo in la raaco habraacyada iyo siyaasadda hantida. Haseyeeshee, inta badan hantida dowladda laguma diiwaangelin nidaamka maareynta hantida' iyo, iyadoo sabab u ah diiwaankan aan dhammeystirnayn, waxaa jirey kala duwanaansho u dhaxeeyay diiwaanka hantida ma guurtada (FAR) iyo ku-darista kharashaadka raasumaal ah sida lagu sheegay bayaamada maaliyadeed. Tani ayaa sidoo kale ka dhigeysa mid aan suuragal ahayn in la sameeyo hawl xaqiijin joogto ah oo itus oo itaabsii ah. La'aanta kantaroollada aasaasiga ah ee noocaas ah ee ku saabsan maareynta hantida dowladda, waxaa jirta halis aad u badan oo ah in hantida dowladda lagu takrifalo ama in si khaldan loo adeegsado.

Shaqo-qorista

Intii lagu guda jirey dib-u-eegisteenna, waxaan oggaaney in kharashaadka mushaaraadka ee la xiriira gunnooyinka la siiyo ciidamada ammaanka in aan si habboon loo taageerin. Waxaan kaloo oggaaney in aanu jirin habraacyo lagula soconaya laguna maareynayo maalmaha fasaxa shaqaalaha. Shaqo-qoris dhowr ah oo la sameeyay ma lahayn caddeymo muujinaya in la sameeyay baaritaannada raadraaca shaqaalaha.

Dokumentiyada habboon ee taageeraya dhammaan kharashaadyada mushaaraadka iyo raacidda dhammaan tilmaamaha shaqo-qorista, xulashada, shaqo ku meelaynta iyo maareynta shaqaalaha ayaa xaqiijinaya hawsha shaqaalaha oo caafimaadqab leh.

Miisaaniyad

Miisaaniyaddu waa laf-dhabarta dhammaan hawlaha dowlad-goboleedda. Miisaaniyadda dowladda waa in loo diyaariyaa hab aad macquul u ah. Haddii aanan la gaari karin bartilmaameedyada dakhliga miisaaniyad dheeraad ah waa in la diyaariyaa. Bixinta 5% ee ku-talagalka waa in laga dhabeeyaa.

Tiknoolajiyadda macluumaadka

Liidashooyin ayaa la oggaadey in ay ka jiraan kantaroollada guud ee kombiyuutarka, kala-soocidda waajibaadka, kala noqoshada gelidda, qaabeynta ereyga-sirta ah(password), dib-u-eegista hawlaha maamulaha oo aan dad ku filneyn, amniga muuqda ee Wasaaradda Maaliyadda, xisaabaha adeegsadaha guud iyo liidashooyin kale oo la xiriirra IT-ga. Dowladdu waa in ay hubisaa in kaabayaasha IT in si wanaagsan loo maareeyo oo loo ilaaliyo si loogu adeegsado ujeeddada loogu talagalay.

La-socoshada Soo-jeedimadii Hantidhowrkii Sannadkii Hore

Intii lagu guda jiray hantidhowrka waxaannu dabagal ku sameynay dhammaan soo-jeedimadii hantidhowrka ee la soo-jeediyay sannadadii hore. Xaaladda hadda ee soo-jeedimadan oo kooban ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Xaaladda	Tirada Soo-jeedimada
La Hirgeliyay	0
Qayb Ahaan La Hirgeliyay	3
Aan La Hirgelin	17
WADARTA GUUD	20

Sidii sannadahii hore, horumarka laga gaarey hirgelinta soo-jeedimada hantidhowrka ayaa ahaa mid aad u yar. Waa muhiim in horumarkan uu horey u sii socdo. Si ujeedkan loo gaaro, Wasaaradda Maaliyadda (MoF) waa in ay hirgelisaa hab rasmi ah oo lagu qaadayo tallaabooyin lagu saxayo oo habboon.

3.4 Gebaggebo

Kantaroollada ka jira JSS si weyn uma sii hagaagin sannadihii la soo dhaafay. Meelaha ugu waaweyn ee uu walaaca ka taagan yahay waa dhammeystirnaanta dakhliga, ku takrifalka maaliyadaha, lacag-bixinnada kaashka ah ee badan iyo diiwaanka hantida oo aan buuxsanayn. Inta badan meelahan dowladdu waxay leedahay qaab guud ee sharci oo faahfaahsan; haseyeeshee, inta badan shuruudahan ee sharciga ah lama raaco. Waxaa loo baahan yahay in si joogto ah loo korjoogteeyo u hoggaansamidda habraacyadan kantaroolka ee aasaasiga ah ee leh cawaaqib-xumo ka dhallan karta sharci-jebinta soo noqnoqota. Kantaroollada gudaha ee ku saabsan qaadista iyo diiwaangelinta dakhliga lama hirgelin, lacag-bixinnada iyo lacag-qabashada si buuxda looma taageerin isla mar ahaantaana si khalad ah ayaa loo kala soocey deeqaha laga helay deeq-bixiyeyaashanna la isma-waafajin. Arrimahan waxaa ay keenaan in shaki weyn laga muujiyo waxyaabaha lagu sheegay bayaamada maaliyadeed ee qabyo-qoraalka ah. Sidaa daraadeed, Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG) ayaa wuxuu bixiyey ra'yi hantidhowr qeexaya in bayaannada maaliyadeed loo soo bandhigay si caddaalad ah, marka laga reebo arrimo cayiman.

4. Hordhac

Kalsoonida ay muwaadiniinta ku qabaan hay'adaha dowliga ah ayaa dib loo soo celin karaa iyadoo loo adeegsanayo kheyraadka aan badneyn siyaabo lagu kordhinayo qiimaha-lacagta iyo bixinta natiijooyin tayo leh. Si loo fuliyo doorkan, muwaadiniinta ayaa sidoo kale u baahan caddeymo la isku halleyn karo oo ku saabsan sharciyada iyo barnaamijyada shaqeeya iyo kuwa aan shaqeyn. Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG) oo ah hantidhowraha dibedda ee waaxaha dowladda, ayaa wuxuu qabtaa shaqo muhiim ah oo lagu taageerayo doorarka kuwa loo igmaday maamulka hay'adaha waaxda dowladda iyo daneeyeyaasha kale marka loo eego la-socodka, fahamka iyo aragtida dheer.

4.1 Waajibaadkeenna iyo Madax-bannaanideenna

Qaybta 28(1) ee Sharciga Hantidhowrka ee 2016 ayaa wuxuu koobayaa mas'uuliyadda xafiiska hantidhowrka guud (OAG) uu ka saaran yahay in uu baaritaan ku sameeyo xisaabaadka dhammaan hay'adaha guud ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS). Iyada oo la raacayo qodobbada Qaybta 32(3) ee Xeerka PFM ee 2017 iyo qaybta 30(4) ee Sharciga Hantidhowrka ee 2016, Hantidhowraha Guud waa in uu u soo gudbiyaa warbixinta Baarista Sanadlaha ah Baarlamaanka afar bilood gudahooda ka-dib marka uu Bayaannada Maaliyadeed ka helo Wasiirka Maaliyadda. Guddoomiyaha Barlamaanka waa in uu ku horgeeyo dhammaan warbixinnada hantidhowrka Golaha Shacabka Dowlad-goboleedka shan maalmood oo kuwa shaqada ah gudahooda ka-dib marka uu helo warbixinta sida ku cad qaybta 33(1) ee Sharciga Hantidhowrka ee 2016.

Madax-bannaanida Hantidhowraha Guud waa sifada aasaasiga ah ee ay leedahay Hay'adda Hantidhowrka Sare (SAI) oo si fiican u shaqeynaysa oo u hawlgaleysa si waafaqsan Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hanti-dhowrka Sare (International Standards of Supreme Audit Institutions (ISSAIs). Qaybaha 88aad iyo 89aad ee Dastuurka Jubbaland wuxuu dhigayaa in OAG uu yahay hay'ad madax-bannaan shaqadiisa ugu weynna ay tahay in uu noqdo hantidhowraha dibedda ee Dowlad-goboleedda. Intaa waxaa dheer, Qaybta 7(1) ee Sharciga Hantidhowrka ee 2016 ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya in ay si gaar ah ula xiriirto Hantidhowraha-Guud in uu u madax-bannaan yahay gudashada mas'uuliyadiiisa.

4.2 Horumarka Ilaa Hadda

Hawlwadeennada Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jubbaland (JSS AOG) weli ma lahan waayo-aragnimada loo baahan yahay si ay keligooda baaritaan buuxda ugu sameeyaan bayaanka maaliyadeed. Tani ayaa waxaa ay lagama maarmaan ka dhigtey in xafiiska uu qorto shirkado hantidhowr gaar loo leeyahay sannadahii la soo dhaafey. Si kastaba ha ahaatee, hawlwadeennada JSS OAG ay qaadanayeen mas'uuliyado dheeraad ah intii lagu guda jirey baaritaannada maadaama ay waayo-aragnimo badan ay ka helayeen madax-bannaanida farsamo.

4.3 Caqabadaha

JSS OAG ayaa isku-dayaya in uu helo hawlwadeenno hantidhowrka u sameeyo oo xirfadoodu aad u sarreyso kuwaas oo gudan kara waajibaadka sharci ee xafiiska iyagoo haysta taageero yar. Si shuruudan loo buuxiyo, kheyraadyada ku habboon waa in la bixiyaa si loo haqabtiro baahiyada tababarka iyo hawlgalka ee xafiiska. Cudurka COVID-19 ee caalamka ka dillaacey ayaa saameyn xun ku yeeshay dhammaan hawlaha dalka oo dhan. Waxaa uu abuurey cawaaqib-xumo sida: xaddidaado, kala-fogaanshaha bulshada, xiridda xuduudaha, isbeddelo carqaladeynaya oo lagu sameeyay ganacsiyada gaarka loo leeyahay iyo cabsi saameysay reeraha iyo hawlaha dhaqaale. Cudurka safmarka ah ee COVID-19, ganacsiyada oo keliya saameyn xun kuma yeellan, wuxuu sidoo kale si weyn u curyaamiyay shaqadii xafiiska hantidhowrka guud (OAG). Sannad maaliyadeedkan 2020, tiro badan oo ka mid ah aqoon-kororsiyadii iyo hawlihii inoo qorsheysnaa ayaa dib u dhacay.

Waxaannu aaminsannahay in aqoonsashada arrimaha hantidhowrka ee jira iyo dowladda in la siiyo soo-jeedimo in ay tahay tallaabada ugu horreysa oo keliya. Shaqada dhabta ahi ayaa bilaabata marka kuwa mas'uuliyaha haya, ay qaadaan tallaabo lagu dhaqangelinayo talooyinkii aynu soo-jeedinay. Sababtan daraadeed ayaa waxaa jira qayb muhiim ah oo ka mid ah shaqadeenna oo ah in aannu dabagalno ama la-soconno soo-jeedimadii lagu sameeyay hantidhowradii/baaritaannadii hore, si loo qiimeeyo horumarka laga gaarey tallaabooyinkii aynu horey u soo-jeedinay. Markaa ka-dib waxaa Baarlamaanka, iyo daneeyayaasha kale looga fadhiyaa in ay gacan ka geystaan hubinta in dowladdu ay qaaddo tallaabo ku filan oo wax looga qabanayo arrimaha hantidhowrka ee la tilmaamay.

4.4 Qaddarin

Xafiiska OAG wuxuu fursaddan ugu faa'iideysanayaa in uu ugu mahadnaqo shaqaalaheenna sida ay ugu heellanaayeen shaqadooda, la-hawlgalayaasha iyo shaqaalaha Risk bridge, la-taliyeyaasheenna hantidhowrka dibedda ee ka socday PREMIS, kuwaas oo waxyaabihii ay ku biirriyeen u suurageliyay in xafiiska OAG uu sii wado joogteynta xirfadlenimadiisa.

Ugu dambeyn, waxaan u mahad-celineynaa Baarlamaanka, Wasaaradda Maaliyadda iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah, kuwaas oo si uun gacan uga geystay shaqada xafiiska hantidhowrka guud (OAG). Waxaa sharaf weyn inoo ah in aan soo bandhigno Warbixinta Sannadlaha ah ee Hantidhowrka-Guud ee 2019.

5. Waxyaabihii La Oggaaday oo Faahfaahsan – Hantidhowrka Sannad Maaliyadeedka (FY) 2019

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan dhammaan waxyaabihii la oggaadey ayaa laga heli karaa Lifaaqa 2aad ee warbixintan

5.1 Dakhliga

Liidashooyinkan soo socda iyo kuwo kale oo aan la sheegin ayaa la oggaadey oo ku saabsan dakhliga; macluumaadka dokumentiyada canshuurta oo aan dhammeystirnayn oo la xiriira canshuur-bixiyeyaasha iyo canshuuraha, canshuuraha oo si qalad ah loo kala-soocdey, in hal-meel laga helo shirkadaha gaarka loo leeyahay canshuuraha dowladda u qaadaya, kala duwanaanta macluumaadka canshuuraha la ururiyey oo u dhaxeeya diiwaannada dowladda iyo kuwa shirkadaha gaarka loo leeyahay, kala-duwanaanshaha iyo isbeddeladaha canshuuraha la ururiyey min bil ilaa bil, kala duwanaansho u dhaxeeya nidaamka maareynta dakhliga iyo Nidaamka Macluumaadka Maareynta Maaliyadda, la'aanta dokumentiyo ku habboon dakhliyada laga qaadey dekedda, diiwaangelinta dakhliyada saafiga ah gaar ahaan loogu talagalay dakhliga laga heli dekedda iyo kala-duwanaanshaha u dhaxeeya deeqaha la diiwaangeliyay iyo xaqiijinta laga helay deeq-bixiyeyaasha.

Dhammaan faahfaahinnada habboon ee canshuur-bixiyeyaasha iyo saldhigyada canshuurta waa in lagu muujiyaa dokumentiyada canshuur uruurinta, canshuuraa waa in lagu diiwaangeliyaa xisaabta diiwaanka guud ee saxda ah, wakiillada canshuurta ee gaarka ah waa in si lagu tartamo loo helaa si loo sii wanaajiyo qiimaha lacagta, is-waafajin habboon waa in la sameeyaa oo ku saabsan lacagta-deeq-bixiyaha, oo u dhaxeeya nidaamiyada iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay ee lacagaha ururinaya iyagoo ka wakiil ah dowladda.

5.2 Lacag-bixinnada

Marka la eego guud ahaan $ 3,588,984 oo kharashaad ah oo la tijaabeyey, lacag dhan $1,185, 290 oo u dhiganta 33% ayaa loo arkey in qayb ahaan ama gebi ahaanba la taageerin. $208,809 oo ka mid ah qaddarkan ma lahayn dokumentiyada taageeraya ee aasaasiga ah sida qaan-sheegyo, fawjarro la ansaxiyey waxaanna badankooda lagu taageeray keliya warqad gudaha ka soo baxdey kana timid Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda. Kharashaadyadan ma lahayn dokumentiyada alaabooyin la keenay ama adeegyo la bixiyay sida warqadda guddoonka alaabta, xaashida diiwaanga gaadiidka, xaashida waqtiga ama warqadaha lagu caddeeyo shaqo la dhammeeyay.

Si kor loogu qaado u hoggaansamidda xeerka PFM iyo xeer-nidaamiyeyaasha waaxda khasnadda, dokumentiyo taageeraya oo ku habboon waa in laga hayaa dhammaan lacag-bixinnada. Waa in aan wax lacag ah la bixin iyadoon lahayn dokumentiyo ku filan oo taageeraya.

5.3 Wax-soo-iibsiga

Intii lagu guda jiray dib-u-eegistii wax-soo-iibsiga, waxaannu oggaaney in ay jireen liidashooyinkan soo socda.

- Xaalado kuwa laga soo iibsado alaabooyinka iyo adeegyada la shaqaaleeyay iyadoon la soo marsiin hannaanka wax-soo-iibsiga ee lagu tartamo oo ka hor-imaanaysa sharciyada iyo xeer-hoosaadyada jira iyadoon la qiimeyn qiimaha lacagta.
- Xaalado aan jirin sababo loogu baahanayo wax-soo-iibisga halka meel laga helo sida ku cad Qeybta 4.25.4 ee Buugga Wax-soo-iibsiga waxaanna ku baxay kharashaad dhan $131,220.

Hubso in hannaanka wax-soo-iibsiga lagu tartamo in si buuxda loo dhaqangeliyay si qiimaha lacagta loo gaarsiiyo heerka ugu sarreeya oo loogu talagalay kharashaadka dowladda. Sababta keenta in hal meel laga helo waa in ay ahaataa mid yar oo keliya loo adeegsado iibsiga xaaladaha degdegga ah ee halka mar la sameeyo.

5.4 Kharashaadka oo si khalad ah loo kala-saarey

Dib-u-eegistii aan ku sameyney diiwaanka guud, ayaa waxaan ku oggaaney xaalado kharashaad dhan $45,820 oo si khalad ah oo kala-soocey oo ay ku jiraan xaalado kharashaadka safarka lagu hoos daabacay ujuurooyinka adeeg-bixiyeyaasha/la-talinta, qaan-sheega war-isgaarta oo lagu hoos daabacey telefishanka iyo wargeysyada, alaabooyinka xafiiska oo lagu hoos daabacey macluumaadka iyo kombiyuutarada, lacag-bixinno kaash ah oo lagu hoos qorey shirarka maxalliga ah.

Qoondeynta iyo diiwaangelinta kharashaadyada waa in ay raacaan shaxda xisaabaadka iyo ujeeddada iyo sharaxaadda kharashaadyada baxaya. Kharashaadyada aan la xiriirin waa in aanan lagu qorin summadaha xisaabta ee khaldan.

5.5 Liiska Mushaaraadka

Dib-u-eegistii lagu sameeyay galalka hawlwadeennada ee laga helay Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah (CSC) iyo kharashaadka liiska mushaaraadka ee laga helay nidaamka, waxaan ku oggaaney in liidashooyinkan soo socda ay ka jiraan hannaanka shaqaalaha iyo liiska mushaaraadka.

- xaaladaha kharashaad mushaar-bixin aan la taageerin oo la xiriira Ciidamada Ammaanka, Booliska, Nabadsugidda iyo Ciidamada Asluubta iyo sidoo kale kharashaadka raashiinka joogtada ah oo dhan $872,500. Jadwalka lacag-bixinta lama gunaanadin.
- Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah (CSC) ama waaxaha shaqaalaha ee Wasaaradda ay khuseyso midkoodna ma joogteeyo ama ma korjoogteeyo diiwaanka maalmaha fasaxa ee shaqaalaha.
- Marka la eego dib-u-eegistii lagu sameeyay galalka hawlwadeennada; ma jirin wax caddeymo ah oo muujinaya in baaritaanno lagu sameeyay asalka shaqaalaha qaarkood ka hor inta aanan laga shaqaaleyn Wasaaradaha kala duwan

Nidaamka la socoshada fasaxa waa in la sameeyaa iyadoo la adeegsanayo Nidaamka Macluumaadka Maareynta Shaqaalaha (HRMIS) ee dhowaan loo keenay Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah.

Baaritaannada raadraaca ama asalka waa in la buuxiyaa had iyo jeer ka hor inta aan la bixin warqadda shaqo soo-jeedinta.

5.6 Hantida aan muddo gaaban la caddeysan karin (Non-current assets)

Waxaannu oggaaney nusqaamahan soo socda in ay ka jiraan maareynta hantida dowladda:

- Diiwaanka hantida ma guurtada ah laguma sheegin liiska waxyaabaha ama hantida lagu soo darey sannadkan. Waxaa jira kala duwaansho dhan $325,494 oo u dhaxeeya diiwaanka iyo kharashaadka raasumaalka dheeraadka ah ee lagu shaaciyey Bayaamada Maaliyadeed.
- Diiwaanka hantida ma guurtada ah ma shaacin qaar ka mid ah hantida ay Dowladdu iska leedahay sida dhulka, dhismeyaasha iyo gaadiidka; t.a Dowladda Hoose, Dhismeyaasha Garoonka Diyaaradaha iyo Dekedda, Waddooyinka, Kaabayaasha Dhaqaalaha.
- Waxaa intaa dheer, in aan oggaaney in hantida qaar ee taalla Xafiiska Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Maaliyadda, Wasaaradda Waxbarashada iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah in aanan la calaamadin.

Diiwaanka hantida waa in la cusboonaysiiyaa si loogu daro dhammaan hantida dowladda hantida ma guurtada ah iyo tan guurtada ah.

5.7 Bankiga iyo Kaashka

Waxaan oggaaney in faahfaahinnada diyaariyaha, dib-u-eegaha iyo ansaxiyabaha in ay ka maqan yihiin bayaamada is-waafajinta bankiga ee loogu talagalay dhammaan xisaabaha bankiga dowladda laga bilaabo bisha Jannaayo 2019 ilaa Oktobar 2019. Waxaa la oggaadey in Wasaaradda Maaliyadda ay bilowdey fulinta soo-jeedimadii baaritaankii hore ee ku saabsan diyaarinta habboon ee is-waafajinnada bankiga laga soo bilaabo Nofembar 2019 iyo wixii ka dambeeyay.

Waxaa kaloo oggaaney in ay jiraan 46 xisaabo banki oo ka furan Dahabshiil iyo Bankiga Salaam kuwaas oo aan wax lacag ah ku harsaneyn isla-markaanna shaqeyn muddo dheer kana socon wax hawlgal ah.

Caddeymaha diyaarinta, dib-u-eegista iyo ansaxinta ee is-waafajinnada bankiga waa in uu gacanta ku hayaa maamulka.

Dhammaan xisaabaha bankiga ee aan dhaqdhaqaaq lahayn waa in dib-u-eegis lagu sameeyaa oo la xiraa haddii aanan la adeegsaneyn.

5.8 Miisaaniyadda

Si ka hor-imaaneysa qaybaha 10aad iyo 12aad ee Xeerka PFM, qiyaasaha miisaaniyadda Sannad Maaliyadeedka 2019 ee loogu talagalay dakhliga iyo kharashaadkaba waxaa la baal-marey 48%. Tani waxay shaki gelinaysaa ku-tiirsanaanta iyo macquulnimada xaddidaadaha lagu adeegsadey hannaanka miisaaniyad diyaarinta.

Waxaa intee dheer, in aan oggaaney in sanduuqa ku-talagalka ah 5% sida lagu qeexay Qeybta 14aad ee PFM in aanan laga dhabbeyn waxaanan lagu dejiyay saadaasha miisaaniyadda.

Miisaaniyad sannadeedda waa in lagu sameeyo dib-u-eegis, wax kastoo ka badan ama ka hooseeya saadaasha waxqabadka maaliyadeedna waa in wax looga beddelaa dib-u-eegista dheeraadka ah ee bisha Luulyo.

5% ee miisaaniyadda waa in ku-talagal ahaan loo dejiyaa, hawlo kasta oo ku-talagal ahna waa in laga maalgeliyaa keydkan. Ku-talagalladana waa in aanan laga bixin qeybaha kale ee la ansaxiyey ee miisaaniyadda.

5.9 IT-ga Guud iyo Kantaroollada Adeegsiga

Liidashooyinkan la xiriirta IT-ga ee soo socda ayaa la aqoonsadey:

- Dib-u-eegistii aan ku sameynay hannaanka lacag-bixinta iyo dokumentiyada lacag-bixinta ee muunadda ah, ayaa waxaan ku oggaaney lacag-bixinno dhan US$60,425 kuwaas oo lagu bixiyay jeegagga FMIS oo ka kooban laba nuqul oo isku eg, oo lid ku ah kantaroollada hannaanka ee isticmaalka jeeg gaar ah oo loogu talagalay lacag-bixin kasta.
- la'aanta weji-nasasho oo u dhaxeeya nidaamyada miisaaniyadda, dakhliga iyo ka-warbixinta;
- adeegsadeyaasha qaarkood ee lagu abuurey nidaamka ayaa laga raadraaci waayey diiwaannada shaqaalaha rasmiga ah ee ay bixisay waaxda shaqada iyo shaqaalaha (HR);
- magacyada shaqaalaha qaarkood ee lagu abuurey nidaamka si sax ah uma waafaqsanna magacyada ugu jira diiwaannada rasmiga ah ee HR;
- Waxaa jira Aqoonsiga Adeegsadaha oo ka kooban laba nuqul oo isku eg ayaa ku jira Nidaamka Maareynta Hantida;
- kala-soocidda waajibaadyada oo liita ayaa ka jira nidaamka FMIS; waxaan aragney adeegsadaha xog-gelinta oo maareeyay in uu meelmariyo macaamulaad iyo in uu ansaxiyo isaga oo adeegsanaya magaca adeegsadahaya ansaxiyaya maadaama uu hayey xogaha lagu galayo akoonnada labada adeegsadeyaal;
- nusqaamo ka jira in shaqaalaha ka tagaya Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya laga la noqdo xogaha lagu gelayo nidaamka FMIS; waxaan oggaaney in uu jiro adeegsade gaar ah, kaas oo maalintii ugu dambeysay ay ahayd 14 Febraayo 2019 sidaas oo ay tahay weli ka hawlgalaya nidaamka FMIS muddo 10 maalmood ah ilaa 24-ka Febraayo 2019. Adeegsadaha wuxuu awoodey in uu meel-mariyo 307 macaamilo oo lagu qiimeeyay USD 911,266;
- kantaroollada qaabeynta eray-sireedka(password-ka) FMIS, RMS, AMS iyo BPM oo liita;
- dib-u-eegista hawlaha maamulaha ee nidaamka FMIS oo aan dad ku filnayn;
- liidashooyin ka jira amniga gudaha dhismeyaasha Wasaaradda Maaliyadda;
- xisaabaha adeegsadaha guud t.a. Admin (RMS, BPM, FMIS iyo AMS), Premis, Crystal, mamba iyo root (AMS);
- Siyaasadaha Amniga Macluumaadka oo loo diiwaangeliyay si aan dad ku filnayn;
- la'aanta tababarka Wacyigelinta Amniga IT-ga;

- la'aanta siyaasadda maareynta isbeddelka oo rasmi ah;
- qaadasho la'aanta siyaasadda soo-iibsashada/helidda iyo horumarinta nidaamka;
- la'aanta Qorshaha Ka-soo-kabashada Masiibooyinka IT-ga iyo Qorshaha Sii Shaqeynta Hay'adda; iyo
- hirgelin la'aanta istiraatiijiyadda gurmadka rasmiga ah.

Dowladdu waa in ay hubisaa kaabayaasha IT in si wanaagsan loo maareeyo oo loo ilaaliyo si loogu adeegsado ujeeddada loogu talagalay.

5.10 La-socoshada Soo-jeedimada Hantidhowrkii Sannad Maaliyadeedka (FY) 2018

Intii lagu guda jiray baarista hantidhowrka waxaannu dabagal ku sameynay dhammaan soo-jeedimadii hantidhowrka ee la soo-jeediyay sannadadii hore waxaanna oggaaney in marka la eego 20kii soo-jeedimo ee uu soo-jeediyay Xafiiska Hantidhowrka Guud (AOG), keliya 3 soojeedimo in qayb ahaan la fuliyay.

Nidaam rasmi ah waa in la dhaqangeliyaa si loo xaqiijiyo in uu jiro qorshe habboon oo lagu hubinayo in soo-jeedimadan loo hirgeliyo sidii la qorsheeyay iyo in horumarku uu la socdo Maamulka Sare ee Wasaaradda Maaliyadda (MoF).

Lifaaqa 1aad – Bayaamada Maaliyadeed ee Iskudhafan ee La Baarey ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS) ee Sannadkii Dhammaadey 31ka Disembar 2019 iyo warbixinta hantidhowraha ee la socota

riskbridge
Audit - Tax - Consulting

DOWLAD GOBOLEEDKA
JUBBALAND EE SOOMAALIYEED
Xafiiska Hanti-dhowrka Guud

JUBALAND STATE OF SOMALIA
Office of the Auditor General

دولة أقليم جوبالاند الصومالية
مكتب المراجع العام

DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBBALAND EE SOOMAALIYA (JSS)

WARBIXINTA HANTIDHOWRKA MADAX-BANNAAN EE KU SAABSAN

BAYAAMADA MAALIYADEED EE ISKU-DHAFAN EE

31KA DISEMBAR EE SANNADKII DHAMMAADEY 2019

EREY-BIXIN

FGS	Dowladda Federaalka ee Soomaaliya
FY	Sannad Maaliyadeed
IPSAS	Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda (IPSAS)
ISSAI	Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hanti-dhowrka Sare
JSS	Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya
MoF	Wasaaradda Maaliyadda
US$	Doolarka Mareykanka

TUSMADA

1.0 BAYAANMA MAS'UULIYADDA EE WASAARADDA MAALIYADDA 3

2.0 WARBIXINTA HANTIDHOWRKA MADAX-BANNAAN EE KU SAABSAN BAYAAMADA MAALIYEED EE ISKU-DHAFAN EE SANNADKII DHAMMAADEY 31KA DISEMBAR EE SANNADKII DHAMMAADEY 2019 4

2.1 Ra'yiga Hantidhowraha Madax-bannaan 4

2.0 Warbixinta Hantidhowraha Madax-bannaan (Sii-socota) 5

Lifaaqa 1aad: Bayaamada Maaliyadeed ee Wasaaradaha iyo Tan Isku-dhafan ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ee sanadkii dhammaadey 31kii Disembar 2019 11

1.0 BAYAANKA MAS'UULIYADDA EE WASAARADDA MAALIYADDA

Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha (PFM) ee 2017 ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ayaa wuxuu Wasaaradda Maaliyadda (Wasaaradda) uga baahan yahay in ay diyaariso Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Bixinta Lacagaha ee sannad maaliyadeed kasta oo aqoonsan dhammaan lacag-bixinta iyo qabashada kaashka ah iyo kaashka harsan ee ay Dowladdu maamusho. Dowladda waxaa laga doonayaa in ay joogteyso diiwaannada xisaabaadka habboon oo ku filan in ay muujiyaan oo ay sharxaan macaamulaadka Dowladda iyo in ay si sax ah oo macquul ah, u shaaciso xaaladda maaliyadeed ee Dowladda. Dowladda ayaa sidoo kale ka mas'uul ah ilaalinta hantida Dowladda iyo in ay qaado tallaabooyin macquul ah oo loogaga hortagayo laguna oggaanayo khiyaannada iyo wax isdabamarinnada kale.
Wasaaraddu waxay oggoshahay mas'uuliyadda diyaarinta iyo in ay u soo bandhigto Bayaamadan Maaliyadeed si waafaqsan Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda ee loo yaqaanno International Public Sector Accounting Standard (IPSAS)-Warbixin Maaliyadeedka Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan ee 2017 iyo habka uu u baahan yahay Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha, 2017 ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya. Wasaaradda ayaa sidoo kale oggol mas'uuliyadda:

i) Nakh-shadeynta, hirgelinta iyo joogteynta kantaroolka gudaha ee ku habboon diyaarinta iyo in si wanaagsan loo soo bandhigo Bayaamadan Maaliyadeed ee Mideysan;
ii) Xulashada iyo adeegsiga siyaasadaha xisaabaha ee habboon; iyo
iii) Sameynta qiyaasaha xisaabaadka iyo go'aamada macquulka ah ee ku saleysan xaaladaha.

Marka uu qiimeeyo awoodda ay Dowladda u leedahay in ay sii jirto/sii hawlgasho, Maamulka kama warqabo wax hubsasho la'aan ah oo la taaban karo oo la xiriira dhacdooyinka ama xaaladaha shakiga gelin kara awoodda ay Dowladda u leedahay in ay sii jirto/hawlaheeda sii wadato.

Maamulka wuxuu qirayaa baarista madax-bannaan ee Bayaamada Maaliyadeed ee Iskudhafan in aysan ka xayuubinaynin mas'uuliyadahooda.

Waxaa ansaxiyey Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS) markii ay taariikhdu ahayd waxaanna u saxiixay;

....

Wasiirka Maaliyadda Saxiixa

Xisaabiyeyaal Guud oo Haysta Shahaadooyin/Certified Public Accountants of Kenya (CPAK)

13th Floor, Landmark Plaza, Arwings Kodhek Road
Upper Hill, Nairobi
P.O Box 856-006006, Nairobi, Kenya.
Tel: +254723608079
Email: info@riskbridgcpa.com
www.riskbridgeglobal.com

2.0 WARBIXINTA HANTIDHOWRKA MADAX-BANNAAN EE KU SAABSAN BAYAAMADA MAALIYEED EE ISKU-DHAFAN EE SANNADKII DHAMMAADEY 31KA DISEMBAR EE SANNADKII DHAMMAADEY 2019

2.1 Ra'yiga Hantidhowraha Madax-bannaan

Ra'yiga Wax-laga-beddelay

Waxaannu baarney Bayaamada Maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya oo ay ku jiraan Warqadda Maaliyadda Isku-dhafan ee Qabashada iyo Lacag-bixinta, Warqadda Maaliyadda Isku-dhafan ee Isbarbardhiga Qaddarka Miisaaniyadda La Sii Dejiyay iyo Tan Rumoowday, iyo Bayaanka Halwgalka Istaatiistika Maaliyadda Dowladda (GFS) ee sannadkii dhammaadey 31ka Disembar 2019 iyo Qoraallada Bayaamada Maaliyadeed ee uu ku jiro nuxurka kooban ee siyaasadaha xisaabaadka muhiimka ah.

Ra'yi ahaan, marka laga reebo saameynta ay leeyihiin arrimaha lagu sharxay qaybta Waxyaabaha Lagu Saleeyey Ra'yiga Wax-laga-beddelay ee warbixinteenna, bayaamada maaliyadeed waxay si caddaalad ah u soo bandhigayaan, marka la eego dhammaan waxyaabaha la taaban karo, halka ay dhaqaale ahaan taagneyd Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya sannadkii dhammaaday 31-a Disembar 2019 iyo waxqabadkeeda maaliyadeed muddadii dhammaatey iyadoo la raacayo Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha, 2017 iyo Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda ee loo yaqaanno International Public Sector Accounting Standard (IPSAS) - Warbixin Maaliyadeedka Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan, 2017.

Waxyaabaha Lagu Saleeyey Ra'yiga Wax-laga-beddelay

Waxaan aqoonsaney khaladaadkan la taaban karo ee soo socda intii ay socotey baarista loo sameeyay si waafaqsan jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hanti-dhowrka Sare (ISSAI):

- Waxaan oggaaney liidashooyin ka jira hannaannada liiska mushaaraadka oo sabab u ah dokumentiyo taageero aan dad ku filneyn oo guud ahaan dhan US$ 872,500; oo u dhigma 7% ee wadarta guud ee lacag-bixinnada liiska mushaaraadka ee 2019;

- Baaristeenna ayaa lagu aqoonsaday kharashaadyo guud ahaan dhan US$ 1,362,330 oo u dhigma 38% ee wadarta guud ee kharashaadka marka laga reebo liiska mushaaraadka ee lagu soo sheegay Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Lacag-bixinta

taas oo aan lahayn caddeymo ku filan oo lagu caddeynayo in macaamulaadkan uu dhab ahaantii dhacey; iyo

- Dakhli/qabashooyin dhan US$ 5,185,936 oo u dhigma 33% ee wadarta guud ee rasiidyada/qabashada lagu diiwaangeliyay Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Lacag-bixinta laguma taageerin dokumentiyada taageerada ee ku habboon sida xaddiga alaabada ganacsiga ee dalka la keeno ama laga dhoofiyo, warbixinta dakhliga guud, wadarta guud lacagta ka soo harta kharashaadka marka loo eego dakhliga la caddeeyay, iyo sidoo kale isbedbedelka/qalooca qoto-dheer ee

Waxaan baaristeenna u sameynay si waafaqsan Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay’adaha Hanti-dhowrka Sare ee loo yaqaano International Standards of Supreme Audit Institutions (ISSAIs). Mas'uuliyadaheenna ee waafaqsan jaangooyooyinkaasi waxaa lagu sii qeexayaa qeybta warbixinteenna ee Mas'uuliyadaha Hantidhowraha ee Baarista warbixinta maaliyadeed.

Waxaannu ka madax-bannaanahey Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya iyadoo la raacaya shuruudaha anshaxa ee ku habboon baaristeenna ee warbixinta maaliyadeed waxaanna u fuliney mas'uuliyadaheenna kale ee anshaxa si waafaqsan shuruudahan. Waxaan aaminsanahay caddeymaha aan baarista ku helnay in ay ku filan yihiin kuna habboon yihiin bixinta waxyaabaha lagu saleeyey ra’yigeenna wax-laga-beddelay.

Awoodda sii jiridda/sii hawlgalidda

Bayaannada maaliyadeed ee isku-dhafan ayaa waxaa la diyaariyey iyadoo la adeegsanayo habka sii jiridda xisaabaadka ku saleysan. Iyadoo lagu saleynayo caddeymaha baarista ee aan helnay, ma jiraan wax hubaal la'aan ah oo la taaban karo oo la xiriirra dhacdooyinka ama xaaladaha shakiga weyn gelin kara awoodda ay JSS u leedahay in ay sii wadato hawlgalladeeda.

Macluumaad kale

Wasaaradda Maaliyadda ayaa ka mas'uul ah macluumaadka kale. Macluumaadka kale ayaa ka kooban macluumaadka ku jira Warbixin Sannadeeda laakinse kuma jirto Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Lacag-bixinta iyo warbixinteenna hantidhowraha ee raacsan.
Ra'yigeenna ku saabsan Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Lacag-bixinta kama hadlayo macluumaad kale mana muujinayno nooc kasta oo gunaanad la hubo ah oo raacsan.

Iyadoo lala xiriirinayo baaristeenna Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Lacag-bixinta, mas'uuliyadeenna waa in aan akhrino macluumaadka kale, marka aan sidaa sameynayno, in aan tixgelinno haddii macluumaadka kale uu yahay mid la taaban karo oo aan waafaqsanayn Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Lacag-bixinta ama aqoonta aan ka helnay baarista, ama si kale u muuqda in uu yahay khalad la taaban karo. Haddii, lagu saleeyo shaqada aan qabaney ee ku saabsan macluumaadka kale, waxaan ku soo gunaanadaynaa in uu khalad la taaban karo ku jiro macluumaadkan kale, waxaa na looga baahan yahay in aan soo sheegno xaqiiqdaas. Ma hayno wax aan ka warbixinno oo arrintan ku saabsan.

2.0 Warbixinta Hantidhowraha Madax-bannaan (Sii-socota)

Arrimaha Muhiimka ah ee Baarista/Hantidhowrka

Arrimaha muhiimka ah ee hantidhowrka/baarista waa arrimaha, marka aan ku saleyno ra'yigeenna, fikirkeenna xirfadlenimo, ugu muhiimsannaa baaristeenna Bayaamada Maaliyadeed ee muddada. Arrimahan. Waxaa looga hadley guud ahaan nuxurka qoraallada Baaristeenna ee Bayaamada Maaliyadeed, iyo in aan bixinno ra'yigeenna ee la socda, mana bixinayno ra'yi gaar ah oo arrimahan ku saabsan. Ka sokow arrimaha aan ku qeexnay qaybta Waxyaabaha Lagu Saleeyey Ra'yiga Wax-laga-beddelay, waxaan go'aaminay arrimaha hoos lagu qeexay in ay noqdaan arrimaha muhiimka ah ee hantidhowrka ee ay tahay in aan ugu hadalno warbixinteenna:-

Liidashooyin ka jira dakhli ururinta iyo diiwaangelinta

Habraacyada dakhli ururinta ay sameysey Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya kuma filna ka hortagga halista khaladaadka la taaban karo ee ka dhallanaya dabciga gacan ku sameyska ah ee dakhli ururinta taas oo u nugul khasaare iyo wax isdabamarin. Kuwan waxaa loo aaneyn karaa hannaanadan dakhliga ee soo socda:-

- Karraaniyada Dakhliga ayaa waxay subaxii qaataan buugaagta rasiidka canshuuraha waxayna fiidkii ku soo celiyaan Xarunta Dakhli Ururinta (RCC) si ay ugu wareejiyaan canshuuraha maxalliga ah ee maalintii la ururiyay. Canshuuraha ay qaadeen Karraaniyada Dakhliga ee kala duwan ayaa lagu ururiyaa qaabka kaashka fawjarka elektarooniga ah (EVC) ama kaash ahaan. Tani waxay u nugushahay khasaare marka la eego in hannaanku aan aheyn mid otomaatik ah iyadoo dhammeystirnaanta dakhliga la ururiyeyna uu ku saleysan yaahy caddeynta Saraakiisha Dakhli Ururinta
- Warqadaha lagu dhejiyo jidadka ee ay bixiso shirkadda Smart Technology, oo ah shirkad gaar loo leeyahay oo lala xiriirinayo dakhli ururinta iyo bixinta warqadaha lagu dhejiyo gaadiidka iyagoo ka wakiil ah Wasaaradda Maaliyadda (MoF), ma muujinayaan muddada/ansaxnimada iyo lambarta taarikada baabuurta. Tani waxay horseedi kartaa in isla hal warqad oo baabuurta lagu dhejiyo in loo adeegsado baabuur kala duwan ama muddooyin dhaadheer in ay ka qaadeyso Dowladda canshuuraha ku habboon warqadaha lagu dhejiyo baabuurta.
- Dib-u-eegistii lagu sameeyay dakhliga dhulka, waxaa lagu oggaadey in Maamulka Dhulalka ee Jabbaland (JLA) in aysan qaadin dakhliyo iyaga u gaar ah oo sabab u ah in aysan jirin sharciyo maamulaya canshuuraha dhulka ee laga qaado Jubbaland. Si tani loo gaaro, shirkad gaar loo leeyahay oo lagu magacaabo Milestone Company ayaa keligeeda loo xushey in ay dakhliga ururiso iyadoo ka wakiil ah maamulka JLA. Shirkadda ayaa keligeeda la xushey oo ma jirin sahanka suuqa lagu tartamo oo la sameeyay intii lagu guda jiray wax-soo-iibsiga si loo xaqiijiyo Dowlad-goboleedka Jubbaland in ay hesho qiimaha lacagta ee soo-iibsiga. Intaa waxaa dheer, in aan oggaaney in kala duwanaansho dhan US$ 295,204 oo u dhaxeeya dakhliga dhulka in lagu qorey hoosta canshuuraha alaabooyinka iyo adeegyada iyo dakhliga dhulka ee hoos imaanaya warbixinta Maamulka Dhulka taas oo muujineysa khaladka dakhliga.
- Qiimaha sarifka lacagaha qalaad ee loo adeegsaday in lacag Soomaaliga loogu beddelo doolarka mareykanka (US$) ee ay adeegsatey Wasaaradda Maaliyadda (MoF) si cad looma diiwaangelin mana waafaqsanna sida qaddaran looga warbixiyey taas oo horseedi karta khaladaad ka tarjumaya dakhliga ka soo xarooda canshuuraha.
- Marka la eego canshuuraha ka soo xarooda iibka alaabada iyo adeegyada, isbeddelo mug leh ayaa lagu arkey canshuuraha la ururiyey bilaha kala duwan. Bilaha Maajo (US$ 222,393), Juun (US$ 202,398), Sibtembar (US$ 131,298), Oktobar (US$ 196,046) iyo Nofembar (US$ 114,605) ayaa la soo sheegay canshuur ururin hooseysa taas oo 50% ka hooseysa celcelisha sannadka oo dhan.
- Waxaan oggaaney in isdhexgalin iyo isku-xirid la'aanta u dhaxeysa Nidaamka Maareynta Dakhliga (RMS) iyo Nidaamka Macluumaadka Maareynta Maaliyadda (FMIS), ay keentay kala duwanaansho u dhaxeeya dakhliga lagu diiwaangeliyay labada nidaamyo oo dhan US$ 7,386,051. Kala duwanaanshaha

qaddarada la diiwaangeliyay ee u dhaxeeya labada nidaam ayaa tilmaami kara saxnaan la'aan iyo khaladaad ku yimaada diiwaangelinta dakhliga la ururiyey.

- Dakhliga la diiwaangeliyay ee MoF ee ka soo xaroodey Dekedda Kismaayo oo dhan US$ 2,788,600 laguma taageerin dokumentiyada taageerada ee ku habboon oo ay ku jiraan warbixinta alaabada laga soo dejiyey iyo kuwa laga dhoofiyey dekadda, tirada maraakiibta/doomaha waaweyn ee ku soo xirtey dekedda, inta tan ee laga soo dejiyay/dhoofiyey, tirada doomaha yaryar ee imaada. Tani waxaa sabab u ah liidasho ka jirta kantaroollada gudaha Dekedda Kismaayo. Waxaa intaa dheer, kharashaadka hawlgallada furdada oo ay ku jiraan kharashaadka maamulka iyo mushaaraadka shaqaalaha in laga jarey dakhliga la ururiyey. Si kastaba ha ahaatee, Maamulka Dekedda Kismaayo gacanta kuma hayo fawjarrada qabashada iyo buugga kaashka si loo taageero kharashaadka laga jarey.

  Kharashka shaqaalaha ee laga jarey dakhliga uu ururiyey Maamulka ayaa la xiriira 11 shaqaalah oo ka shaqeynaya Waaxda Furdada.

- Waxaan oggaaney kala duwanaansho dhan US$ 128,282: oo u dhaxeeya dakhliga ay Wasaaradda Maaliyadda u diiwaangelisay Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ah ee Kismaayo iyo dakhliga ay Dowladda Jubbaland u soo wareejisay Safari Aviation, oo ah shirkad gaar loo leeyahay oo qandaraas lagula galey in ay dakhliga ka ururiso Garoonka Diyaaradaha, sida ku cad diiwaannadooda gudaha ee muujinaya khaladaadka ka jira dakhliga.

Liidashooyinka ka jira kharashaadka

- Kharashaadka Dowladda si dad ku filan looma taageerin si looga hortaggo kharashaadka aan u qalmin iyo khaladaadka bayaamada maaliyadeed. Kharashaadka ma lahayn dokumentiyo habboon oo lagu taageerayo oo ay ku jiraan caddeymaha alaabooyinka la keenay ama adeegyada la qabtey sida Warqadda Guddoonka Alaabta (DN), Warqadda Alaabooyinka La Keenay (GRN), xaanshiyada diiwaanka baabuurta, xaashiyada lagu qoro saacadaha la shaqeeyay iyo shahaaddada shaqo dhammeynta.
- Kharashaadyada sida kharashaadyada xallinta khilaafaadka iyo kuwa ku-talagalka si habboon looma taageerin; ma alahn codsiyada waaxda adeegsaneysa iyo kala-dhigdhigista waxa loo adeegsadey, qorshaha lacageynta iyo dib ugu soo warbixinta Wasaaradda Maaliyadda ee ku xigta. Kharashaadyada noocan ah ayaa waxaa taageera warqad ka timid Wasaaradda Maaliyadda, Agaasimaha Guud. Si kastaba ha ahaatee, maadaama ay tahay cidda gacanta ku haysa maaliyadaha dowladda, Wasaaradda Maaliyadda (MoF) waxay ahayd in aysan sameyn codsiga gudaha ah halkii ay waaxda adeegsaneysa ay la soo gudbin lahayd miisaaniyadda loo baahan yahay iyo bixinta ku xigta ee Wasaaradda Maaliyadda (MoF).

Mas'uuliyadaha Maamulka iyo Kuwa Loo Igmaday Maamulka Bayaamada Maaliyadeed

Maamulka ayaa ka mas'uul ah diyaarinta iyo si wanaagsan u soo bandhigidda Bayaamadan Maaliyadeed oo waafaqsan Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha ee 2017 iyo Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda ee loo yaqaanno International Public Sector Accounting Standard (IPSAS) - Ka-warbixinta Maaliyadaha ee Habka Kaashka Ku Saleysan ee Xisaabaadka iyo kantaroolka gudaha ee kale ee Guddiga Maamulku u arko in ay lagamamaarmaan u yihiin diyaarinta Bayaamada Maaliyadeed oo aan lahayn khalad la taaban karo, khayaamo ama ilduul mid uu ku yimaadaba.

Marka la diyaarinayo bayaamada maaliyadeed, Maamulka ayaa ka mas'uul ah qiimeynta awoodda ay JSS u leedahay in ay sii jiro/sii hawlgasho, iyadoo si ku habboon loo shaacinayo, arrimaha la xiriira sii jiridda/sii hawlgelidda lana adeegsanayo habka sii jiridda ee xisaabaadka ku saleysan haddii Maamulka uu doonayo in uu lacageeyo ama iibiyo

hantida JSS ama uu joojiyo hawlgallada mooyaane, ama uusan lahayn xal kale oo macquul ah oo aan ka ahayn in sidaa la sameeyo.

Kuwa loo igmaday maamulka ayaa ka mas'uul ah kor-ka-ilaalinta hannaanka ka-warbixinta maaliyadaha hay'adda ee Dowladda.

Mas'uuliyadaha Hantidhowraha ka Saaran hantidhowr-ku-sameynta/baarista bayaamada maaliyadeed

Ujeeddooyinkeenna waa in aan helno ballanqaad caqligal ah oo ku saabsan in bayaamada maaliyadeed ee dowlad-goobleedka in aaney lahayn khalad la taaban karo, khayaanno iyo ilduuf mid uu ku yimaadaba , iyo in aan soo saarno warbixinta hantidhowraha oo aan ku sheegeyno ra'yigeenna. Ballanqaad caqligal ah waa ballanqaad heerkiisu sarreeyo, laakiin ma ahan damaanadqaad sheegaya in hantidhowrka ama baarista loo sameeyey si waafaqsan ISSAIs iyo in uu mar walba soo helayo khaladaad marka uu jiroba.

Khaladaadka ayaa waxay ka dhalan karaan khayaamo ama ilduuf waxaana loo qaadanayaa in ay yihiin kuwo la taaban karo haddii, mid ahaan ama wadar ahaanba, si caqligal ah loo fili karo in ay saameyn ku yeeshaan go'aannada dhaqaale ee ay qaateen adeegsadayaasha marka lagu saleynayo warbixintan maaliyadeed.

Iyadoo qayb ka ah hantidhowrka/baarista qaabilsan ISSAIs, ayaa waxaannu adeegsanaa go'aan xirfadeed annaga oo joogteyn doonnaa shaki xirfadeed inta ay baaristu socota. Waxaan kaloo:

- Aqooonsanaa oo aan u-kuurgalnaa halisaha khaladka la taaban karo uu ugu jiri karo bayaamada maaliyadeed, khayaano ama ilduuf midka uu doonaba ha ku yimaadee, in aan nakh-shadeyno oo aan sameyno habraacyo hantidhowr oo wax ka qabanaya halisahan, iyo si aan u helo caddeyn dad ku filan oo u habboon si aan ugu saleyno ra'yigeenna. Halista ah in aan la soo oggaan khaladka la taaban karo ee ku yimid khayaano ayaa ka badan tan midka ku yimaada ilduufka, maaddaama khayaannadu ay ku lug lahaan karto mu'aamarad, been-abuur, si ku-talogal ah in wax looga tago, maldahaad, ama in laga dul-boodo kantaroolka gudaha.

- Helnaa faham ku aaddan kantarool gudaha oo u habboon hantidhowrka si aan u nakh-shadeyno habraacyo hantidhowr oo ku habboon xaaladaha jira, laakiinse aanu ahayn in la bixiyo ra'yi ku aaddan taabogalnimada kantaroolka gudaha ee dowladda.

- Qiimeynaa sida guud ahaan loo soo bandhigey, loo diyaariyey iyo waxa ku jira Bayaamadaha Maaliyadeed, ee ay ka mid yihiin shaac-ka-qaadista, iyo in Bayaamada Maaliyadeed ee dowlad-goboleedka ay tacaamulaadka iyo dhacdooyinka aasaaska u ah ay u muujinayaan si ka bixineysa sawir dhab ah oo caddaalad ku dhisan.

- Ku soo gunaanadeynaa habboonaanshaha in maamulku uu adeegsado sii jiridda xisaabaadka ku saleysan iyo, iyadoo lagu saleynayo caddeynta hantidhowkra, la helay haddii hubaal la'aan la taaban karo ay jirta oo la xiriirta dhacdooyinka ama xaaladaha shaki weyn u keeni kara

awoodda ay JSS u leedahay in ay sii jirto ama sii hawlgasho. Haddii aan ku soo gunaanadno in hubaal la'aan la taaban karo ay jirto, waxaa nalaga doonayaa in aan dadka ku dareensiinno warbixintayada hantidhowraha shaac-ka-qaadista la xiriirta ee ku xusan bayaamada maaliyadeed, ama, haddii shaac-ka-qaadista noocaasi ahi aysan dad ku filnayn, in aannu wax ka beddelno ra'yigeenna. Gunaanadkeenna wuxuu ku saleysan yahay caddeynta hantidhowrka/baarista ee la helay ilaa iyo taariikhda warbixinteenna hantidhowraha. Si kastaba ha ahaatee, dhacdooyinka ama xaaladaha mustaqbalka ayaa keeni kara JSS in aysan sii hawlgelin.

- Qiimeynaa sida guud ahaan loo soo bandhigey, qaab-dhismeedka iyo waxa ku jira bayaamadaha maaliyadeed, ee ay ka mid yihiin shaac-ka-qaadista, iyo in bayaamada maaliyadeed ee dowlad-goboleedka ay u metalaan tacaamulaadka iyo dhacdooyinka aasaaska u ah qaab ka bixinaya sawir dhab ah oo caddaalad ku dhisan.

Waxaan kuwa ka mas'uulka ah arrimaha maamulka la xiriira kala xiriirney, oo ay ka mid yihiin, baaxadda iyo waqtiga loo qorsheeyey hantidhowrka iyo waxyaabihii muhiimka ahaa ee hantidhowrka lagu soo oggaadey, oo ay ka mid yihiin haddiiba ay jiraan nusqaamo mug leh oo la xiriira kantaroolka gudaha ee aan soo ogaaney inta uu socday hantidhowrkeenna.

Xisaabiye Guud oo Shahaado Haysta (Kenya)

Nayroobi 2 Juun 2021

CPA Bulle Ahmed - Lr. Aqoonsiga Xirfadeed 2055
La-hawlgallaha saxiixaya ee ka mas'uulka ah hantidhowrka madax-bannaan.

Xafiiska Hantidhowrka Guud (Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya)

Kismaayo **2021**

Soomaaliya

The Office of the Auditor General (Jubbaland State of Somalia)

Kismayu 2021

Somalia

Adam Ali Mohamed. Audit Manager – Acting AG

Signature……

09-06-2021

Lifaaqa 1aad: Bayaamada Maaliyadeed ee Wasaaradaha iyo Tan Isku-dhafan ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ee sanadkii dhammaadey 31kii Disembar 2019

BAYAAMADA MAALIYADEED EE WASAARADAHA & TAN ISKUDHAFAN EE DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBBALAND EE SOOMAALIYA

31ka Disembar ee Sannadkii Dhammaadey 2019

Waxaa loo diyaariyay si waafaqsan Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda (IPSAS) – Warbixin Maaliyadeedka Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan 2017

Waxaa Diyaariyey Wasaaradda Maaliyadda
Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya

Bayaanka Caddaynta – Bayaamada Maaliyadeed ee 2019

Bayaamada maaliyadeed ee 2019, iyo qoraallada la socda, ayaa waxaa loo diyaariyey si waafaqsan Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda, Warbixin Maaliyadeedka Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan ee 2017 iyo habka uu u baahan yahay Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha (PFM).

Marka la eego ra'yiga Wasiirka Maaliyadda, bayaamada maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS) sida loogu gudbiyay hantidhowrka ee waafaqsan Qaybta 32aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha ee 2017, waa kuwo sax ah oo sawir dhab ah oo miisaaman ka bixinaya halka ay dhaqaale ahaan taagan tahay Dowlad-goboleedka JSS 31ka Disembar ee sannadkii dhammaadey 2019. Wasiirka wuxuu sii xaqiijinayaa dhammeystirnaanta diiwaannada xisaabaadka gacanta lagu hayo ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya, kuwaas oo lagu tiirsanaa markii la diyaarinayey bayaamada maaliyadeed ee Jubbaland iyo sidoo kale dad ku filnaanshaha nidaamka kantaroolka maaliyadaha gudaha.

Aniga oo ka wakiil ah Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya

Minister for Finance

APR. 27-2020
Date

	Qoraalka	2019 Waxaa Kantaroola TSA USD	2018 Waxaa Kantaroola TSA USD
Lacag-qabashada (Receipts / Inflows)			
Canshuuraha			
Canshuuraha dakhliga, faa'iidooyinka, iyo faa'ii(	**2**	186,338	174,721
Canshuuraha mushaaraadka iyo shaqaalaha	**3**	453,339	426,428
Canshuuraha alaabada iyo adeegyada	**4**	3,758,135	3,571,648
Canshuuraha ganacsiga iyo macaamulaadka caa	**5**	3,903,962	6,077,527
Canshuuraha kale	**6**	32,994	264,244
Canshuuraha		**8,334,768**	**10,514,568**
Deeqaha			
Ka yimid ururrada caalamiga ah	**7**	4,880,811	5,598,949
Ka yimid qaybaha kale ee dowladda guud	**8**	2,404,985	870,000
Deeqaha		**7,285,796**	**6,468,949**
Dakhi Kale			
Iibka alaabada iyo adeegyada	**9**	146,697	522,188
Dakhi Kale		**146,697**	**522,188**
Lacag-qabashada (Receipts / Inflows)		**15,767,262**	**17,505,705**
Lacag-bixinnada (Payments / Outflows)			
Gunnooyinka La Siiyo Shaqaalaha			
Mushaaraadka iyo Ujuurooyinka	**10**	12,394,511	12,066,277
Gunnooyinka La Siiyo Shaqaalaha		**12,394,511**	**12,066,277**
Adeegsiga Alaabada iyo Adeegyada			
Safarrada & Shirarka	**11**	1,000,663	1,025,247
Kharashaadka Hawlgallada	**12**	1,466,620	1,709,317
Kiro	**13**	52,936	95,315
Kharashaadka Kale ee Hawlgallada La Xiriira	**14**	515,141	701,156
Adeegsiga Alaabada iyo Adeegyada		**3,035,360**	**3,531,035**
Deeqaha			
Deeqaha Qaybaha Kale ee Dowladda Guud	**15**	58,206	74,970
Deeqaha		**58,206**	**74,970**
Dheefaha/Faa'iidooyinka Bulshada			
Dheefaha/Faa'iidooyinka bulshada ee shaqo-sii	**16**	165,971	236,804
Dheefaha/Faa'iidooyinka Bulshada		**165,971**	**236,804**
Kharashaadka Kale			
Xawilaadaha aan meel kale lagu soocin	**17**	2,033	746,490
Kharashaadka Kale		**2,033**	**746,490**
Hantida aan maaliyadda ahayn			
Hantida Ma Guurtada ah	**18**	327,414	431,265
Hantida aan maaliyadda ahayn		**327,414**	**431,265**
Lacag-bixinnada (Payments / Outflows)		**15,983,494**	**17,086,842**
Kororka Hoos-u-dhaca Kaashka		**(216,233)**	**418,863**
Kaashka Bilowga Sannadka		**474,117**	**55,254**
Kaashka Dhammaadka Sannadka	**1.4**	**257,884**	**474,117**

Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya
Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Isbarbardhigga Qaddarka Miisaaniyadda La Sii Dejiyey iyo Ta Rumoowday
Sannadkii Dhammaadey 31ka Disembar, 2019
Miisaaniyadda Qoondeynta ee Loo Ansaxiyey Habka Kaashka Ku Saleysan
Kala-sooca Lacag-bixinnada Heerka Dhaqaale

		2019				2018
		Qiyaasta Asalka ah ee Qoondeynta	Qiyaasta Kama Dambeysta ah ee Qoondeynta	Waxaa Kantaroola TSA	Farqiga u Dhaxeeya Miisaaniyadda Kama Dambeysta ah iyo Ta Rumoowday	Waxaa Kantaroola TSA
	Qoraalka	A USD	B USD	C USD	C-B USD	USD
Lacag-qabashada (Receipts / Inflows)						
Canshuuraha						
Canshuuraha dakhliga, faa'iidooyinka, iyo faa'iidooyinka ra		250,000	250,000	186,338	(63,662)	174,721
Canshuuraha mushaaraadka iyo shaqaalaha		287,025	287,025	453,339	166,313	426,428
Canshuuraha alaabada iyo adeegyada		5,499,048	5,499,048	3,758,135	(1,740,913)	3,571,648
Canshuuraha ganacsiga iyo macaamulaadka caalamiga ah		9,500,000	9,500,000	3,903,962	(5,596,038)	6,077,527
Canshuuraha kale		372,901	372,901	32,994	(339,907)	264,244
Canshuuraha	**19**	**15,908,974**	**15,908,974**	**8,334,768**	**(7,574,206)**	**10,514,568**
Deeqaha						
Ka yimid ururrada caalamiga ah		7,246,849	7,246,849	4,880,811	(2,366,038)	5,598,949
Ka yimid qaybaha kale ee dowladda guud		5,699,503	5,699,503	2,404,985	(3,294,517)	870,000
Deeqaha	**20**	**12,946,352**	**12,946,352**	**7,285,796**	**(5,660,555)**	**6,468,949**
Dakhi Kale						
Dakhliga guryaha		280,000	280,000		(280,000)	
Iibka alaabada iyo adeegyada		853,371	853,371	146,697	(706,674)	522,188
Qanaaxyada iyo ciqaabaha		200,000	200,000		(200,000)	
Dakhi Kale	**21**	**1,333,371**	**1,333,371**	**146,697**	**(1,186,674)**	**522,188**
Lacag-qabashada (Receipts / Inflows)		**30,188,697**	**30,188,697**	**15,767,262**	**(14,421,435)**	**17,505,705**

Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya
Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Isbarbardhigga Qaddarka Miisaaniyadda La Sii Dejiyey iyo Ta Rumoowday
Sannadkii Dhammaadey 31ka Disembar, 2019
Miisaaniyadda Qoondeynta ee Loo Ansaxiyey Habka Kaashka Ku Saleysan
Kala-sooca Lacag-bixinnada Heerka Dhaqaale

		2019				2018
		Qiyaasta Asalka ah ee Qoondeynta	Qiyaasta Kama Dambeysta ah ee Qoondeynta	Waxaa Kantaroola TSA	Farqiga u Dhaxeeya Miisaaniyadda Kama Dambeysta ah iyo Ta Rumoowday	Waxaa Kantaroola TSA
	Qoraalka	A USD	B USD	C USD	C-B USD	USD
Lacag-bixinnada (Payments / Outflows)						
Gunnooyinka La Siiyo Shaqaalaha						
Mushaaraadka iyo Ujuurooyinka		17,287,779	17,287,779	12,394,511	(4,893,268)	12,066,277
Gunnooyinka La Siiyo Shaqaalaha	**22**	**17,287,779**	**17,287,779**	**12,394,511**	**(4,893,268)**	**12,066,277**
Adeegsiga Alaabada iyo Adeegyada						
Safarrada & Shirarka		2,182,794	2,182,794	1,000,663	(1,182,131)	1,025,247
Kharashaadka Hawlgallada		4,248,010	4,248,010	1,466,620	(2,781,390)	1,709,317
Kiro		181,951	181,951	52,936	(129,015)	95,315
Kharashaadka Kale ee Hawlgallada La Xiriira		1,561,918	1,561,918	515,141	(1,046,777)	701,156
Kharashaadka Xallinta Khilaafaadka						
Kharashka Soo Noqnoqda ee Aan Mushaarka Ahayn ee R(		118,872	118,872		(118,872)	
Ku-talagal		573,017	573,017		(573,017)	
Adeegsiga Alaabada iyo Adeegyada	**23**	**8,866,562**	**8,866,562**	**3,035,360**	**(5,831,202)**	**3,531,035**
Deeqaha						
Deeqaha Qaybaha Kale ee Dowladda Guud		202,824	202,824	58,206	(144,618)	74,970
Deeqaha	**24**	**202,824**	**202,824**	**58,206**	**(144,618)**	**74,970**
Dheefaha/Faa'iidooyinka Bulshada						
Dheefaha/Faa'iidooyinka bulshada ee shaqo-siiyaha		738,948	738,948	165,971	(572,977)	236,804
Dheefaha/Faa'iidooyinka Bulshada	**25**	**738,948**	**738,948**	**165,971**	**(572,977)**	**236,804**
Kharashaadka Kale						
Xawilaadaha aan meel kale lagu soocin		152,073	152,073	2,033	(150,040)	746,490
Kharashaadka Kale	**26**	**152,073**	**152,073**	**2,033**	**(150,040)**	**746,490**
Hantida aan maaliyadda ahayn						
Hantida Ma Guurtada ah		2,886,301	2,886,301	327,414	(2,558,887)	431,265
Alaabooyinka		54,210	54,210		(54,210)	
Hantida aan maaliyadda ahayn	**27**	**2,940,511**	**2,940,511**	**327,414**	**(2,613,097)**	**431,265**
Lacag-bixinnada (Payments / Outflows)		**30,188,697**	**30,188,697**	**15,983,494**	**(14,205,202)**	**17,086,842**

Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya
Bayaanka Hawlgallada Dowladda
Ee Sannadkii Dhammaadey 31ka Disembar, 2019

Macaamulaadka Saameynaya Qiimaha Su	2019 USD	2018 USD
Dakhli	**15,767,262**	**17,505,705**
Canshuuro	**8,334,768**	**10,514,568**
Canshuuraha dakhliga, faa'iidooyinka, iyo faa'	186,338	174,721
Canshuuraha mushaaraadka iyo shaqaalaha	453,339	426,428
Canshuuraha alaabada iyo adeegyada	3,758,135	3,571,648
Canshuuraha ganacsiga iyo macaamulaadka c	3,903,962	6,077,527
Canshuuraha kale	32,994	264,244
Deeqo Deeqo	**7,285,796**	**6,468,949**
Ka yimid ururrada caalamiga ah	4,880,811	5,598,949
Ka yimid qaybaha kale ee dowladda guud	2,404,985	870,000
Dakhli Kale	**146,697**	**522,188**
Iibka alaabada iyo adeegyada	146,697	522,188
Kharash	**15,656,080**	**16,655,576**
Gunnooyinka La Siiyo Shaqaalaha	**12,394,511**	**12,066,277**
Mushaaraadka iyo Ujuurooyinka	12,394,511	12,066,277
Adeegsiga Alaabada iyo Adeegyada	**3,035,360**	**3,531,035**
Safarrada & Shirarka	1,000,663	1,025,247
Kharashaadka Hawlgallada	1,466,620	1,709,317
Kiro	52,936	95,315
Kharashaadka Kale ee Hawlgallada La Xiriira	515,141	701,156
Kharashaadka Xallinta Khilaafaadka	-	-
Ku-talagal	-	-
Deeqo	**58,206**	**74,970**
Deeqaha Qaybaha Kale ee Dowladda Guud	58,206	74,970
Dheefaha/Faa'iidooyinka Bulshada	**165,971**	**236,804**
Dheefaha/Faa'iidooyinka bulshada ee shaqo-s	165,971	236,804
Kharashaadka Kale	**2,033**	**746,490**
Xawilaadaha aan meel kale lagu soocin	2,033	746,490
Haraaga Guud ee Hawlaha La Xiriira	**111,181**	**850,128**
Macaamulaadka Hantida Aan Maaliyadda Ahayn		
Qiimaha Sugan iyo Isbeddeladiisa	327,414	431,265
Hantida Aan Maaliyadda Ahayn	**327,414**	**431,265**
Hantida Ma Guurtada ah	327,414	431,265
Alaabooyin	-	-
Macaamulaadka Hantida Maaliyadeed iyo Deymaha		
Isbeddelka Qiimaha Sugan. Macaamulaadka (Han	**(216,233)**	**418,863**
Hantida Maaliyadeed	**(216,233)**	**418,863**
Gudaha	**(216,233)**	**418,863**
Deymaha	**-**	**-**
Deymaha	**-**	**-**
Deymaha	**-**	**-**
Guud Ahaan Kala-badnaanshaha Istaatistik	**-**	**-**

Qoraallada Bayaamada Maaliyadeed
Qoraalka 1aad Siyaasadaha Xisaabaadka

1.1 Aasaaska Diyaarinta Lagu Saleeyay

Bayaamada maaliyadeed ee iskudhafan ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS) waxaa loo diyaariyey si waafaqsan *Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha 2017* iyo Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda ee loo yaqaanno International Public Sector Accounting Standard (IPSAS) - *Warbixinta Maaliyadeed ee Waafaqsan Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan ee 2017*. Qoraalladan ku qoran bayaamada maaliyadeed waxay noqdaan qayb aan ka go'in fahamka bayaamada oo waa in lala akhriyaa bayaamada.

Waxaa si joogto ah muddada oo dhan loo adeegsanayay siyaasadaha xisaabaadka.

Bayaamada maaliyadeed waxaa loogu talogaley Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.
Bayaamada maaliyadeed waxaa ku jira hay'adaha ka warbixinaya sida ku xusan *Xeerka Qoondeynta JSS ee Lr. 1aad ee 2019* waxayna ka kooban yihiin:

1. Wasaaradda Beeraha
2. Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare
3. Wasaaradda Biyaha, Macdanta iyo Tamarta
4. Wasaaradda Maaliyadda
5. Wasaaradda Caafimaadka
6. Wasaaradda Warfaafinta iyo Isgaarsiinta
7. Wasaaradda Amniga
8. Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta
9. Wasaaradda Qorsheynta & Iskaashiga Caalamiga
10. Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha
11. Wasaaradda Arrimaha Haweenka
12. Wasaaradda Madaxtooyada
13. Maamulka Garoonka Diyaaradaha ee Kismaayo
14. Maamulka Dekadda Kismaayo
15. Xafiiska Hantidhowrka Guud
16. Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah
17. Baarlamaanka Jubbaland
18. Wasaaradda Arrimaha Gudaha
19. Wasaaradda Xannaanada Xoolaha
20. Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda
21. Wasaaradda Dhallinyarada & Isboortiga
22. Wasaaradda Gaadiidka
23. Wasaaradda Degaanka iyo Dalxiiska
24. Wasaaradda Hawlaha Guud & Guryeynta
25. Guddiga Adeegga Garsoorka.
26. Wasaaradda Dastuurka iyo Arrimaha Federaalka
27. Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha

Wasaaradaha oo dhan waxaa lagu dhisey 2014 ***Wareegtada Madaxeyne ee XM/J/772014*** oo cinwaankeedu uu ahaan *Wareegto Lagu Dhisayo Wasaaradaha Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya oo*

lagu Qeexay Doorarka iyo Shaqooyinka Wasaaradaha kuna taariikheysan 25ka Disembar 2014. Iyada oo sabab u ah dib-u-habeyn lagu sameeyay wasaaradaha, afar (4) wasaaradood oo cusub ayaa waxaa lagu dhisey ***Wareegtada Madaxweyne ee XM/DGS/112/2018*** oo soo baxday 27[ka] Nofembar, 2018. Xeerka Dhisidda Wasaaradda Maaliyadda iyo Maamulka Dakhli Ururinta ee 2017 ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ayaa loo abuuray ujeeddooyin lagu dhisayo Wasaaradda Maaliyadda iyo Maamulka Dakhli Ururinta si loo xaqiijiyo in Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ay leedahay Wasaarad Maaliyadeed oo ka mas'uul ah guud ahaan maamulka maaliyadda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya iyo sidoo kale xaqiijinta in Wasaaradda Maaliyadda gudaheeda in uu ka jiro Maamulka Dakhli Ururinta kaas oo si buuxda u haysta shaqaale, u abaabulan, loo maamulo oo awood buuxda loo siiyay in uu ururiyo oo dhigo xisaabta mideysan ee waaxda khasnadda (TSA) dhammaan canshuuraha sharciga ah iyo dakhliyada kale ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya. Xafiiska Hantidhawrka guud ayaa lagu dhisay Xeerka Hanti-dhowrka ee 2016; haseyeeshee, Xafiiska ayaa keliya si rasmi ah loo dhisay intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedkii 2018. Maamullada Garoonka Diyaaradaha iyo Dekadda Kismaayo ayaa si gaar ah loo sharciyeeyay.

Wareegto ku xigtey oo ku saabsan dhisidda Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah (CSC) iyo ujeeddadiisa oo cinwaankeedu uu ahaa *Xeer lagu dhisayo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya oo ku taariikheysan 23ka Abriil, 2018* ayaa lagu dhisey xafiiska Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah. Xeer la socda ayaa sidoo kale lagu dhisey Shaqaalaha Rayidka ah iyo qaab-dhismeedka Mushaaraadka Shaqaalaha Rayidka ah. Dastuurka Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS) ayaa si otomaatik ah u dhisey Baarlamaanka Jubbaland. Bayaamada kala duwan ee dhammaan hay'adaha liiska taxan ayaa waxay noqdaan qayb ka mid ah bayaamada maaliyadeed ee iskudhafan maadaama hay'adahan ay qayb ka ahaayeen *Xeerka Qoondeynta JSS Lr. 1aad ee 2019*.

Bayaamada maaliyadeed ee isku-dhafka ah waxaa ka mid ah dhammaan hay'adaha la kantaroolay intii lagu guda jirray sannadka. Hay'daha midkoodna iskama laha hay'ad kale haseyeeshee Dowladda Hoose ee Kismaayo ee ah dowladda hoose ee magaalada Kismaayo, ayaa waxaa kantaroola Wasaaradda Arrimaha Gudaha

1.2 Kaalmada Dibedda

1.2.1 Lacag-bixinnada Dhinacyada Saddexaad

JSS waxay sidoo kale ka faa'iiday alaabo iyo adeegyo loo soo iibiyay iyadoo sabab u ah lacag-bixinno kaash ah oo ay bixiyeen dhinacyo saddexaad inta muddadan lagu guda jiray. Joog-u-taaxyada lagu shaacinayo Dhinaca-Saddexaad ee dhinaca soo-jeedka Bayaanka Lacag-Qabashada iyo Lacag-bixinnada iyo Isbarbardhigga Miisaaniyadda iyo Qaddarka Rumooway ayaa meesha laga saarey iyadoo la raacayo adeegsiga jaangooyada Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan (2017) ee cusub. Soo-jeedinta kaalmada dhinaca 3rd waxaa loo wareejiyay qaybta lagu sheego qoraalka iskaaga ah ee bayaamada maaliyadeed (eeg qoraalka 28aad si aad u aragto soo-bandhigidda isbarbardhiga u dhaxeeya sannadada).

1.2.2 Kaalmada Dibedda

Kaalmada dibedda laga helo ayaa waxaa loo helay qaab ah deeqo ka yimid hay'ado deeq-bixiyeyaal laba-geesood ah iyo kuwo dhinacyo badan oo hoos imaanaya heshiisyo qeexaya ujeeddada kaalmada loo adeegsan doono. Kaalmada kale ayaa waxaa ujeeddooyin gaar ah u bixiyay NGO-yada iyo deeq-

bixiyeyaasha kale (eeg qoraalka 28.2 si aad u aragto soo-bandhigidda isbarbardhiga u dhaxeeya sannadada).

1.3 Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda & Xisaabaadka Mashruuca

Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ayaa isticmaasha dhowr xisaabo banki oo ka fursan bankiyada Dahabshiil iyo Salaam ee sannadkii dhammaadey 31ka Disembar, 2019. Kala-dhigdhigista xisaabaha, oo la socda haraaga ku harsan, ayaa lagu bixiyay 1.3.1 iyo 1.3.2 ee hoose.

1.3.1 Xisaabaha Bankiga Dahabshil

Sannadkii 2019, hal xisaab oo cusub ayaa lagu furay oggolaansho qoraal ah oo laga helay Wasiirka Maaliyadda, iyada oo la raacayo Qaybta 27aad, farqadda 2aad ee Xeerka PFM ee 2017. Xisaabtu waxay la xiriirtaa mashruuca taageerada Wasaaradda Caafimaadka ee ay maalgeliso GIZ. Gaar ahaan, dhammaan xisaabo-hoosaadyada ayaa waxay la xiriiraan mashruucyada deeq-bixiyaha waxaanna loo furay in loo hoggaansamo shuruudaha deeq-bixiyaha. Dhammaadkii sannad-maaliyadeedka 2019, lacagaha ku harsanaa xisaabaha TSA iyo mashruuca waxay ahaayeen sidan soo socota:

Magaca Xisaabaha Bankiga Dahabshil	**2019 USD**	**2018 USD**
Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda ee JSS	1	1
Xisaabta Taageerada Wasaaradda Arrimaha Haweenka	-	8,430
Xisaabta Taageerada Wasaaradda Qorsheynta iyo Iskaashiga Caalamiga ah	-	858
Xisaabta GIZ ee Arrimaha Jria & Idps	-	1
Xisaabta GIZ ee Sanduuqa Xaaladaha Degdegga ah ee Arrimaha JRIA & IDPS	0	18,987
Xisaabta UNHCF ee Taageerada Jria	13,967	1
Xisaabta Taageerada Wasaaradda Beeraha	-	4
Xisaabta Xafiiska Guddoomiyaha Gobolka Jubbada Hoose	-	13,758
Xisaabta Taageerada Wasaaradda Xannaanada Xoolaha	835	-
Xisaabra Mashruuca Taageerada Wasaaradda Caafimaadka	0	0
	14,803	**42,039**

1.3.2 Xisaabaha Bankiga Salaam Somali Bank

Sannadkii 2019, JSS waxay bilowday hawlgallada Bankiga Salaam Bank. Toban xisaab/akoonno ayaa lagu furay oggolaansho qoraal ah oo laga helay Wasiirka Maaliyadda, iyada oo la raacayo Qaybta 27aad, farqadda 2aad ee Xeerka PFM ee 2017. Dhammaan xisaabo-hoosaadyada waxay gaar ahaan la xiriiraan mashruucyada deeq-bixiyaha waxaanna loo furay si loogu hoggaansamo shuruudaha deeq-bixiyaha. Dhammaadkii sannad-maaliyadeedka 2019, lacagaha ku harsanaa xisaabta TSA iyo tan mashruuca waxay ahaayeen sidan soo socota:

Xisaabaha Bankiga Salaam Somali Bank	2019 USD	2018 USD
Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda Jubbaland	5,516	60,911
Xisaabta Taageerada Waxaasarra Haweenta iyo Xuquuqul Insaanka	40	53,622
Xisaabta Taageerada Wasaaradda Beeraha	15	-
Wasaaradda Qorsheynta iyo Iskaashiga Caalamiga ah	5,276	-
Mashruuca RCFR II ee WB	134,250	32,460
Wasaaradda Biyaha, Macdanta iyo Tamarta	28,983	-
Taageerada FAO ee Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda	202	4,289
Xisaabta Mashruuca Taageerada Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare	17,252	2,788
Xisaabta Wada-xaajoodka Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Jubbaland	10	2,043
Barnaamijka Dib-ugu-biiridda Bulshada ee Soomaaliya ee MOPW	1	20,853
Xoojinta MOH HMIS ee Degmooyinka Baardheere iyo Ceelwaaq	70	25,130
Mashruuca GoleKaab ee Golaha Shacabka Jubbaland	0	-
Dowladda Hoose ee Kismaayo SUPP_AF	35,097	-
Taageerada Soo-jiidashada Maalgashiga - MOT	1	
Taageerada Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta	-	30
Xisaab-Hoosaadka Mashruuca Dib-ugu-biiridda Bulshada ee JRIA	-	23,408
Rugta Caafimaadka Guurguurta ee Kismaayo ee Cusub ee MOH JSS	-	96,930
Mashruua Taageerada Dib-u-eegista Dastuurka ee MOCFA (CRSP II)	-	40
Qaybaha Caafimaadka Dhimirka ee Degmada Kismaayo ee MoH	-	22,750
Wacyigelinta Caafimaadka Bulshada Kismaayo ee MOH	-	24,000
Sameynta Xeerka Xirfadda Caafimaadka Jubbaland ee MoH	-	14,750
Hindisaha Wacyigelinta Kobcinta Kartida ee MoH	-	22,900
Xoojinta Degmooyinka Afmadow iyo Badhaadhe ee MoH	-	25,175
XISAABTA TAAGEERADA EE MOPWH JSS JPLG	16,370	
	243,081	**432,078**

1.4 Kaash & La Mid Ah Kaash

Kaash iyo La Mid ah Kaash waxaa loola jeedaa lacagaha waraaqda ah iyo qadaadiicda ee la hayo iyo dhigaal kasta ee lagu hayo xisaabaha bankiyada ama hay'adaha maaliyadeed. Kaashka waxaa loo aqoonsan yahay qaddarkiisa qiimaha lacageed. Bankiyada Soomaaliya ma bixiyaan wax dulsaar ah.

Kaashka ku jira bayaanka qabashada kaashka iyo lacag-bixinta ayaa ka kooban qaddaradan soo socda:

	2019 USD	2018 USD
Kaashka la hayo iyo lacagaha ku harsan bankiyada	**257,884**	**474,117**

Waxaa ku jira tirada lacagta $257,884 ee kor ku xusan $5,517 oo lagu hayo Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda, iyada oo kaashka lacagaha harsan oo dhan $252,367 lagu hayo xisaabo-hoosaadyada TSA ee loo xaddiday ujeeddooyinka mashruuc gaar ah

1.5 Nooca Lacagta Looga Warbixinayo

Nooca lacagta looga warbixinayo waa Doolarka Mareykanka (USD), oo la duubay lagana dhigay doolarka ugu dhow.

1.6 Miisaaniyadda Asalka ama Kama Dambeysta ah ee La Ansaxiyay iyo Isbarbardhigga Qaddarka Miisaaniyadda iyo Ta Rumoowday

Miisaaniyadda la ansaxiyey waxaa la diyaariyey iyadoo lagu saleynayo isla xisaabaadka (Kaash ku saleysan), isla aasaaska kala-soocidda iyo muddada (Laga bilaabo 1da Jannaayo 2019 ilaa 31ka Disembar 2019) ee bayaamada maaliyadeed. Waxaa ku jira isla hay'adaha ku jira bayaanka maaliyadeed ee iskudhafan (Kuwani waxaa lagu muujiyay Qoraalka 1.1)

Miisaaniyadda asalka waxaa ansaxiyey Baarlamaanka Jubbaland 23-ka Jannaayo, 2019. Waxaana miisaaniyadda dheeriga ah ansaxiyey Baarlamaanka Jubbaland.

1.7 Taariikhda Oggolaanshaha

Bayaamada maaliyadeed ayaa waxaa markii ay taariikhdu ahayd 30-ka Abriil 2020 ansaxiyay in la bixiyo Mudane Cabdirashiid Jire Khalinle, Wasiirka Maaliyadda.

Qoraalka 2aad Canshuuraha Dakhliga, Faa'iidooyinka iyo Faa'iidooyinka Raasumaalka

Intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka 2019, JSS ayaa ururisay Canshuuraha dakhliga, faa'iidooyinka, iyo faa'iidooyinka raasumaalka oo gaaraya $186,338 ($174,721 sannad-maaliyadeedkii 2019). Canshuurta waxaa bixiyay shaqaalaha Rayidka ah iyo shaqaalaha kale ee ganacsiga taas oo lagu soo rogay Mushaarkooda guud ee ay bixiso Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya iyada oo la adeegsanayo nisbo jaango'an oo gaaraysa 5%.

Qoraalka 3aad Canshuuraha Mushaaraadka iyo Shaqaalaha

Canshuurta waxaa bixiyay kuwa loo shaqeeyo iyada oo nisbo jaango'an oo 5% lagu saleynayo mushaarka guud (mushaarka/ujuurada) ee la siiyo dhammaan shaqaalaha. Sannad maaliyadeedkii 2019 lacag dhan $453,339 ($426,428 sannad-maaliyadeedkii 2019) ayaa laga helay ururro caalami ah iyo shirkado ganacsi oo ka hawlgalla Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya

Qoraalka 4aad Canshuuraha Alaabada iyo Adeegyada

Kuwani waa canshuuro iskujir ah oo la saaro isticmaalka adeegyada ay bixiso JSS. Shaxdan soo socota waxay muujinaysaa kala-dhigdhigista, iyo meelaha laga helo canshuuraha la saaro alaabada iyo adeegyada lagu bixiyay gudaha degaamada ay ka taliso JSS.

	2019	Wasaaradda Dhalinyarada	Wasaaradda Maaliyadda	Wasaaradda Xannaanada Xoolaha	Wasaaradda Qorsheynta iyo Iskaashiga Caalamiga ah	Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha	Maamulka Garoonka Diyaaradaha ee Kismaayo	Maamulka Dekedda Kismaayo	Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka	Wasaaradda Gaadiidka	Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guryeynta	2018
Canshuurta Macaashka Ganacsiga	745,422		745,422									743,489
Canshuurta Guryaha	1,801,699		1,801,699									88,323
Shatiyada Baabuurta iyo Darawalada	600									600		140,977
Shatiyada Ganacsiga iyo Xirfadaha	21,790					21,790						49,780
Shatiyada Telefishanka iyo Raadiyaha	-											570
Canshuurta Wado-marista	551,483		551,483									-
Ujuurrooyinka Kalluumeysiga	71,000								71,000			1,000
Ujuurrooyinka Ku Soo-xirashada Dekedda	10,000							10,000				530,930
Ujuurrooyinka Soo Degidda Diyaaradaha	381,794						381,794					344,577
Canshuurta Bixidda Caalamiga ah	-											200,161
Canshuurta Marista Waddooyinka Magaalada	110,930									110,930		1,374,024
Diiwaangelinta NGO-yada Caalamiga ah	20,000				20,000							22,200
Diiwaangelinta NGO-yadada Maxaliga ah	12,400				12,400							22,000
Diiwaangelinta Shirkadaha Maxaliga ah	1,400										1,400	11,100
Ujuurrooyinka Meelaha Baabuurta La Dhigto	6,600						6,600					40,943
Ujuurrooyinka Xoolaha	3,360			3,360								1,575
Ururka Dhallinyarada Aan Dowliga Ahayn	600	600										
Ujuurrooyinka rakaabka gudaha	19,057						19,057					
Wadarta Guud	**3,758,135**	**600**	**3,098,604**	**3,360**	**32,400**	**21,790**	**407,451**	**10,000**	**71,000**	**111,530**	**1,400**	**3,571,648**

Nisbooyinka lagu dabakhi karo adeegyada way kala duwan yihiin intooda bandanna waxay ku xiran yihiin waaxda ganacsiga iyo nooca adeegga waxaanna la oggolaaday iyada oo la adeegsanayo Xeerka Dakhliga.

Qoraalka 5aad Canshuuraha Ganacsiga iyo Macaamulaadka Caalamiga ah

Canshuuraha Ganacsiga Caalamiga ah waxay mideynayaan dhammaan canshuuraha lagu soo rogo alaabada iyo adeegyada loo soo dhoofiyo, ama laga dhoofiyo Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya. Intii lagu guda jirey sannad maaliyadeedkan, canshuuraha Kastamka/Furdada ee lagu soo rogo waxyaabaha dalka loo soo dhoofiyo waa canshuurta keliya ee lagu qaado dabakhadan. Maamulka Dekadda Kismaayo iyo Maamulka Garoonka Diyaaradaha Kismaayo waa ilaha ugu weyn ee canshuuraha lagu soo rogo ganacsiga caalamiga ah.

Intii lagu guda jiray sannadkii dhammaadey 31ka Disembar 2019, Wasaaradda Maaliyadda ayaa qaadey lacag dhan $3,903962 taas oo $962,626 ay tahay canshuuraha Jaadka (1,693,248 sannadkii 2018) iyo canshuuraha furdadda alaabooyinka la soo dhoofiyey $2,941,336 ($4,384,279 sannadkii 2018) hoos u dhaca dakhliga ayaa sabab u ahaa doorashadii 2019. Shaxda soo socota waa kala dhigdhigista faahfaahsan ee canshuuraha kastamka ee la qaaday iyo meelaha ay ka soo xaroodeen.

	2019				2,018
	Wadarta	Wasaaradda Maaliyadda	Maamulka Dekedda Kismaayo	Maamulka Garoonka Diyaaradaha ee Kismaayo	
	USD	USD	USD	USD	USD
Canshuuraha kastamka - Alaabooyinka la soo	2,941,336		22,736	2,918,600	4,384,279
Canshuuraha kastamka - JAADKA	962,626	962,626			1,693,248
	3,903,962	**962,626**	**22,736**	**2,918,600**	**6,077,527**

Qoraalka 6aad Canshuuraha kale

Canshuuraha kale waxaa ku jira dakhliga ay soo ururiyaan dowladaha hoose. . Intii lagu guda jiray sannadka Wasaaradda Maaliyadda waxay qabatey dakhli iyada oo ka wakiil ah Dowladda Hoose ee Kismaayo oo guud ahaan gaaraya $32,994 ($264,244 sannadkii 2018). Dowladda Hoose ee Kismaayo waa dowladda hoose ee keliya ka dhisan gobolka ee ka qaada dakhli ilaha sida canshuuridda dukaamada telefoonnada lagu iibiyo iyo gaadiidka dadweynaha ee degaanka. Iyadoo la adeegsanayo heshiis ay qorteen Wasaaradda Maaliyadda iyo Dowladda Hoose ee Kismaayo, dhammaan dakhliga ay qaado Dowladda Hoose ee Kismaayo waa in lagu shubaa Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda (TSA) lacag-bixinnada xiggana waa in la bixiyaa iyadoo la raacayo habraacyada jaango’an ee u degsan Wasaaradda Maaliyadda.

Qoraaka 7aad Deeqaha ka yimid Ururrada Caalamiga ah

Sannad maaliyadeedkii 2019, deeqo ayaa waxaa laga helay ururro caalami ah oo dhan $4,863,651 ($5,598,948 sannadka 2018). Qaddarka laga helay ururrada caalamiga ah ayaa lagu faahfaahiyay kala-dhigdhigista hoos ku xusan.

Deeq-bixiyaha	2019 USD	2018 USD
Danish Refugee Committee (DRC)	-	668,738
GIZ	1,081,512	1,320,508
ADRA	25,190	6,760
Norwegian Church Aid	44,955	24,993
Norwegian Refugee Council	13,440	18,640
Save The Children	11,497	12,752
CARE INTERNATIONAL IN SOMALIA	68,484	33,831
American Refugee Committee (ARC)	-	3,782
Food and Agricuture Organization	180,974	198,620
United Nation Developmental Programme	106,370	66,696
UNHCR	591,560	994,412
UNHABITAT	16,370	31,410
UN-WOMEN	50,660	16,960
International Organization for Migration	424,916	195,830
RCRF11	2,089,844	1,864,151
Adam Smith International	45,099	140,866
UNICEF	51,987	-
Lutheran World Federation (LWF) Education	2,513	-
Mercy Corps	1,330	-
Somali Stability Fund	74,110	-
	4,880,811	**5,598,949**

Qoraalka 8aad Deeqaha ka yimid Qaybaha Kale ee Dowladda Guud

Sannadkii 2019 Dowladda Federaalka ee Soomaaliya waxay ku deeqday lacag guud ahaan gaareysa $2,404,985 ($870,000 sannad maaliyadeedkii 2019) Dowlad-goboleedka Jubbaland. Maaliyadda, oo la helay sannadka oo dhan waxaa ka mid ahaa $35,000 oo loo adeegsaday isdiiwaangelinta iyo imtxiaanka Wasaaradda Waxbarashada (in kasta oo loo qoondeeyay taageerada miisaaniyadda guud), $1,000,000 oo ah taageerada miisaaniyadda ee uu bixiyo Midowga Yurub (EU) ayaa waxaa laga helay Dowladda Federaalka ee Soomaaliya iyadoo la soo marsiiyay Wasaaradda Maaliyadda iyo deeq aan shuruud ku xirneyn oo dhan $635,200 ayaa la helay iyo sidoo kale $500,000 oo loogu talagalay dhismaha Wasaaradda Maaliyadda iyo Wasaaradda Biyaha ayaa laga helay barnaamijka taageerada SURGE, iyada inta harsanna ay ahayd $ 20,000 oo loogu talagaley in lagu taageero baarlamaanka, $ 37,000 oo loogu talagalay xasillin iyo $ 172,071 oo loogu talagalay mashruuca qorsheynta maalgelinta magaalooyinka Soomaaliya. (Sidoo kale tixraac ama u noqo Qoraalka 20aad)

	2019 USD	2018 USD
Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare	35,547	-
Wasaaradda Biyaha, Macdanka iyo Tamarta	169,124	-
Wasaaradda Maaliyadda	1,971,243	400,000
Wasaaradda Amniga	-	400,000
Baarlamaanka Jubbaland	20,000	40,000
Wasaaradda Arrimaha Gudaha	209,071	30,000
	2,404,985	**870,000**

Qoraalka 9aad Iibka Alaabada iyo Adeegyada

Iibka alaabada iyo adeegyada wuxuu ka kooban yahay dakhliga ka soo xarooda dokumeentiga sharciga ah ee ay JSS siiso muwaadiniinteeda kuwaas oo lagama maarmaan ah. Sannad maaliyadeedkii 2019, Wasaaradaha iyo Hay'adaha waxay ururiyeen guud ahaan dakhli gaaraya $146,697 ($522,188 sannadkii 2018) oo ka soo xaarooday iibka alaabada iyo adeegyada. Hoos u dhaca ujuurrada dal-ku-galka/fiisaha ee laga qaadayay garoonka diyaaradaha ayaa sabab u ah hirgelinta siyaasad ah in Dowladda Federaalka ee Soomaaliya ay si sax ah mas'uul uga tahay bixinta dal-ku-galka/fiisaha iyo qaadista dhammaan ujuurrooyinka la xiriira. Hoos u dhaca lacagaha laga qaadayey lambarka taarikada iyo diiwaangelinta buugga gaadiidka ayaa loo aaneynayaa hoos u dhaca ka ganacsiga iyo soo-dejinta gaadiidka ee dekedda oo sabab u ahaa muddada doorashada. Shaxda soo socota waxay sharxaysaa kala dhigdhigista faahfaahsan ee waxyaabaha uu dakhliga ka soo xarooday.

	2019 USD	2018 USD
Ujuurrooyinka Dal-ku-galka	32,392	3,400
Diiwaangelinta Taarikada Gaadiidka	69,708	327,381
Diiwaangelinta Buugga Gaadiidka (logbook)	44,597	191,407
	146,697	**522,188**

Qoraalka 10aad Mushaaraadka iyo Ujuurooyinka

Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda

Mushaaraadka iyo ujuurooyinka waa isku jirka dhammaan mushaaraadka, gunnooyinka iyo lacag-bixinnada nooc kale ah ee la siiyo shaqaalaha. Shaqaalaha waxaa ka mid ah shaqaalaha rayidka ah iyo

kuwa haya xilalka siyaasadeed. Kala-dhigdhigista mushaaraadka iyo ujuurooyinka la soo koobay oo dhammeystiran ayaa hoos lagu muujiyay:

	2019 USD	2018 USD
Shaqaalaha joogtada ah	2,019,016	1,828,755
Shaqaalaha qandaraaska	1,206,251	822,840
Shaqaalaha ujrada ku shaqeeya	277,134	407,776
Lacagaha yar ee sida joogtada ah shaqaalaha loo siiyo	2,850	95,800
Ciidamada Ammaanka (Booliska, Nabadsugidda iyo As	4,845,895	4,061,451
Mushaaraadka la siiyo Wasiirada iyo Madaxda Kale ee I	58,312	173,202
Mushaaraadka la siiyo Siyaasiyiinta	537,684	701,500
Gunnada Hoyga	1,307,598	1,548,029
Gunnada xirfadda	103,169	41,670
Gunnada gaadiidka	48,030	12,400
Gunnooyinka kale	6,096	20,450
Gunnooyinka Hawlgallada Amniga	134,961	144,457
Bixinta Raashiinka Joogtada ah	1,240,752	1,244,934
Raashiinka Maalinlaha ah	606,763	963,013
	12,394,511	**12,066,277**

Mushaaraadka Siyaasiyiinta waxay la xiriiraan mushaaraadka la siiyo xildhibaannada baarlamaanka. Mushaaraadka la siiyo Wasiirada iyo magacaabista qaanuuniga ah ee ay ka mid yihiin mushaaraadka la siiyo Wasiirada iyo guddoomiyeyaasha madaxa ka ah hay'adaha qaanuuniga ah sida Guddiga shaqaalaha rayidka ah.

Gunnada hoyga ee la xiriira gunnooyinka sida gunnooyinka guriga iyo diyaafadinta hoteelka ee la siiyo Wasiirrada, xildhibaannada baarlamaanka, guddoomiyeyaasha iyo shaqaalaha rayidka ah ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS).
Bixinta raashiinka joogtada ah ee lacag-bixinta nooc kale ahaanta loo siiyo Ciidamada Militeriga Jubbaland ee loo bixiyo qaab cunto iyo sahayda kale ee la xiriirta cuntada, halka raashiinka maalinlaha uu la xiriira raashiinka loo diyaariyo shaqaalaha ka shaqeeya Wasaaradda Madaxtooyada iyo waaxaha kala duwan ee Ciidamada ammaanka ee waajibaadkoodu uu yahay sugidda amniga Hay'adaha dowladda.

Qoraalka 11aad Safarrada iyo Shirarka iyo Xallinta Khilaafaadka

Kharashaadka safarrada iyo shirarka oo isku noqonaya ilaa $1,000,663 ayaa waxay ka kooban yihiin kharashaadka safarrada, kharashaadka shirarka iyo xallinta khilaafaadka ee lagu qabtay dibedda iyo gudaha dalka. Shaxdan soo socota waxay bixinaysaa kala-dhigdhigidda kharashaadka guud

	2019 USD	2018 USD
Safarrada Gudaha	352,706	249,203
Safarrada Dibedda	228,389	319,722
Shirarka Gudaha	108,848	40,758
Shirarka Dibedaha	10,000	
Kharashaadka Xallinta Khilaafaadka	300,720	415,564
	1,000,663	**1,025,247**

Qoraalka 12aad Kharashaadka Hawlaha La Xiriira

Kharashaadka Hawlaha La Xiriira waa isku jirka kharashaadka loo adeegsado fududeynta socodsiinta hawlaha xafiisyada Wasaaradda. Shaxda soo socota waxay bixinaysaa kala-dhigdhigidda kharashaadka hawlaha la xiriira ee ay bixisay JSS intii sannadka lagu guda jiray

	2019 USD	2018 USD
Biyo	32,008	131,422
Koronto	104,113	115,833
Shidaalka Matoorada	14,872	15,500
Ujuurrooyinka Telefoonka	6,681	20,109
Kharashaadka Telefoonnada Gacanta	6,324	8,114
Internet-ka	137,165	137,531
Baasiin	49,516	42,844
Nafto	102,072	112,698
Ooliyo (mashiinnada)	1,925	3,955
Qalabka qoraalka	104,390	94,730
Buugaag	450	2,220
Ujuurrooyinka Daabacaadda	1,092	1,999
Sahayda Shirarka	306,385	210,831
Cuntooyinka Fudud ee Xafiisyada	62,901	101,936
Daabacaadda	79,773	53,166
Sahayda Nadaafadda	41,930	10,130
Waxyaabaha uu Kombiyuutarka Adeegsado	11,027	2,400
Dayactirka qalabka	9,735	8,550
Dayactirka alaabada xafiiska iyo waxyaalaba lagu rakibo	19,526	16,116
Dayactirka Gaadiidka	22,370	26,877
Dayactirka Makiinadada Waaweyn	2,375	-
Dayactirka iyo Gacan-ku-haynta dhismayaasha	56,796	251,506
Sahayda iyo qalabka dayactirka	8,583	12,842
Adeegyada Nadaafadda	15,085	3,430
Adeegyada Amniga	42,350	53,752
Kireynta baabuurta/gaadiidka kale	227,177	270,828
	1,466,620	**1,709,317**

Qoraalka 13aad Kiro

Kharashaad kiro xafiiseed gaaraysa $52,936 ayaa baxay 2019 ($95,315 sannadkii 2018). Kharashka ayaa la xiriira $19,200 oo lagu bixiyay kirada xafiisyo ku yaalla degmooyinka Luuq, Dhoobley, Beled-Xaawo iyo Afmadow ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo loogu talagalay *Hay'adda Qaxootiga iyo Dadka Gudaha Ku Barakacay ee Jubbaland* (JRIA) iyo $13,500 oo lagu bixiyay mashruuca Sarreynta Sharciga iyo asluubta ee Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Diinta oo ay taabogelisay UNDP.

Kiro kale oo la xiriirta hoteel, kirada hool iyo kiro kale oo isku noqonaya $20,236.

	2019 USD	**2018 USD**
Kirada Xafiis	32,700	24,640
Kiro Kale	20,236	70,675
	52,936	**95,315**

Qoraalka 14aad Kharashaadka Kale ee Hawlaha La Xiriira

Ujuurooyinka la-talinta, Tababarka iyo Kobcinta shaqaalaha, ujuurooyinka adeegyada la bixiyay iyo kharashaadka Telefisyoonka iyo Wargeyska waa qaybaha ugu muhiimsan ee kharashaadka kale ee hawlaha la xiriira. Ujuurooyinka la-talinta waxaa ay ka kooban yihiin adeegyada la-talinta ee loo qortay maareynta mashruuca RCRF, mashruuca qorsheynta maalgashiga magaalooyinka Soomaaliyeed ee loo marayo Dowladda Federaalka ee Soomaaliya, mashruuca GIZ ee loogu talagalay barnaamijka Caafimaadka iyo Kalluumeysiga ee Wasaaradaha Caafimaadka, kharashaadka tababarka shaqaalaha ee la xiriira tababarka farsamo ee gaarka ah ee ay bixiyeen mashaariic ay hirgeliyeen hay'adaha GIZ, Norwegian Refugee Council (NRC) iyo Save the Children.

Ujuurooyinka adeegyada la bixiyay waa lacag-bixinnada la siiyay SEMLEX, oo ah shirkad ay qandaraas kula gashey Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya in ay bixiso adeegyada diiwaangelinta taarikada gaadiidka iyo buugga diiwaanka (logbook) iyo lambar u yeelidda guryaha; tani waxaa ugu horreyn lagu guuleystay iyada oo JSS bixinayso kharashaadka ka baxay SEMLEX marka ay bixinayso adeegyada kor ku xusan. Iyada oo kharashaadka telefisyoonka loogu talogalay kharashaadka ku baxa xayaysiinnada telefisyoonka iyo rukumashada joornaal ee ay bixiso JSS iyo khidmadaha Bankiga ee ku baa xisaabata TSA ee JSS sannadka oo dhan. Shaxdan soo socota waa kala-dhigdhigista kharashaadka kale ee hawlaha la xiriira.

	2019 USD	2018 USD
Ujuurrooyinka La-talinta	287,149	147,037
Tababarka iyo Kobcinta Shaqaalaha	116,579	64,210
Ujuurrada adeegga la bixiyay(Adeeg aan la-talin ahayn)	46,959	331,995
Khidmadaha bankiga	27,524	57,017
Xayaysiinta Telefishanka iyo Wargeysyada	36,030	-
Rukumashada Wargeysyada iyo Majaladaha	900	35,898
Suuq-geynt iyo Xayaysiin	-	65,000
	515,141	**701,156**

Qoraalka 15aad Deeqaha la siiyo qaybaha kale ee Dowladda Guud

Kuwan waa wareejinnada loo sameeyo heerka hoose ee dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS). Muddada ka warbixinta ee sannad maaliyadeedka 2019 lacag gaareysa of $58,206 ($74,970 sannadkii 2018) ayaa loo wareejiyay Dowladda Hoose ee Kismaayo si loo fududeeyo hawlgalladooda iyo sidoo kale si loo siiyo adeegyada muhiimka ah magaalada Kismaayo. Xafiisyada dowladda hoose waxay hawlgaliyaan habraacyo jaango'an oo iyaga u gaar ah oo ay ku maareeyaan maaliyaddan sida uu dhigayo heshiis ay la galeen Wasaaradda Maaliyadda (MoF).

Qoraalka 16aad Dheefaha/Faa'iidooyinka Bulshada

Kharashaadka dheefaha/faa'iidooyinka bulshada waxay ka kooban yihiin Daaweyn caafimaad oo ku kacaysa $165,971 ($236,804 sannadkii 2018) oo la bixiyay si loogu daaweeyo shaqaalaha Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya (JSS) ee dalka gudahiisa iyo dibeddiisa. Daaweynta caafimaad waxaa caadi ahaan la siiyaa hawlwadeennada amniga ee ku dhaawacmay gudashada waajibaadkooda shaqada qaran iyo siyaasiyiinta Dowladda.

Qoraalka 17aad Xawilaadaha aan meel kale lagu soocin

Xawilaadaha aan meel kale lagu soocin oo guud ahaan dhan ilaa $2,033 ayaa loo kala-dhig-dhigey sida soo socota

	2019 USD	2018 USD
Deymahda JSS	-	106,590
Mashaariicda Horumarineed ee ay Bulshadu Wado	2,033	639,900
	2,033	**746,490**

Waajibaadka JSS waxaa loola jeedaa deymaha hore iyo lacagihii aan weli la bixin ee lagu leeyahay JSS tan iyo markii la aasaasay iyada oo Mashruuc Horumarineed oo ay Bulshadu Hormuud ka tahay ay maalgeliyaan SSF/DRC oo ay tahayna in laga hirgeliyo dhammaan degmooyinka la gaari karo ee Gobolka Gedo ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya. Mashruuca Horumarineed ee ay Bulshadu Hormuudka ka tahay ayaa wuxuu hiigsanayaa in lagu dhiso kalsoonida u dhaxeysa bulshada gobolka Gedo iyo maamullada dowladda iyada oo loo marayo abaabulka kheyraadka.

Sannadkii 2013 JSS waxay ganacsiyada degaanka ka heshay amaah dulsaar la'aan ah oo guud ahaan dhan $1,262,769. Maaliyadaha waxaa loo adeegsadey in lagu dhiso maamulka JSS. Sidoo kale 2019 intii lagu guda jirey muddadii doorashada ka-dib markii Dowladda Federaalka ee Soomaaliya ay xannibaad safar ku soo rogtey ayaa JSS waxay qaadatey deyn dulsaar la'aan ah oo guud ahaan dhan $4,500,000 iyadoo sabab u ah caqabado xagga miinaasiyadda ah ayaa waxaa la isku afgartey in JSS ay dib-u-bixiso lacagaha deynta ah iyadoo u bixinaysa qaab lacag qawiman oo joogto ah (instalments) oo ku xiran helitaanka maaliyadaha. Shaxda hoose waxaa ku xusan jadwalka dhaqdhaqaaqa deyn bixinta.

Wadarta Guud ee La Helay		**6,403,390**
Dib-u-bixinnada		
FY2014	70,000	
FY2015	483,108	
FY2016	353,141	
FY2017	152,521	
FY2018	106,590	
FY2019	-	
Wadarta Dib-u-bixinnada		**1,165,360**
Baaqiga harsan		**5,238,030**

JSS ma bixin wax deyn ah intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedkii 2019 oo wax deymo ah kuma laha bankiyada, iyo hay’adaha kale ee ganacsi.

Qoraalka 18aad Hantida Aan Maaliyadda Ahayn

Wadarta guud ee Hantida Aan Maaliyadda Ahayn oo ah $327,414 oo ka kooban kharashaadka ku baxay iibsashada Dhismayaasha, Dhismaha Waddo, qalabka ICT, Saabaannada (qalab xafiiseed), Qalab iyo Mashiinno oo aan meel kale lagu soocin iyo Alaabada xafiiska iyo Rakibaadaha iyo qalabka iyo adeegyada xirfadda gaarka ah.

Kala-dhigdhigista dhammeystiran ee kharashaadka Hantida Aan Maaliyadda Ahayn ee JSS waxaa loo faahfaahiyay sida soo socota.

	2019 USD	2018 USD
Dhismeyaasha Aan Degaanka Ahayn	63,315	191,715
Dhismaha Wadooyin	-	62,597
Baabuur	21,150	13,170
Qalabka macluumaadka, kombiyuutar, iyo isgaarsiinta (ICT)	35,600	44,512
Qalabka iyo Makiinadaha aan meel kale lagu soocin	178,483	75,230
Alaabada Xafiiska iyo Rakibaadaha	26,616	43,801
Agabja iyo adeegyada xirfadeed ee gaarka ah	-	150
Barnaamijyada kombiyuutarka iyo kayd-xogeedyada	2,250	90
	327,414	**431,265**

Qoraalka 19aad Canshuuraha

Lacag wadarteeda guud gaaraysa $15,908,974 oo canshuur ururin ah ayaa la qiyaasay in la soo ururiyo sannad maaliyadeedkii 2019, si kastaba ah ahaatee ururin rumoowday oo ah $8,334,768 ayaa lagu guulaystey in la soo ururiyo. Tirada la ururiyey waxay u dhigantaa 52% ee dakhliga canshuurta guud ee sannad maaliyadeedkii 2019.

Hoos u dhaca canshuuraha dakhliga ee la ururiyey intii lagu guda jiray sannadkii dhammaadey 31ka Disembar 2019 ayaa sabab u ahaa xilli roobaadka sannadkii 2019 oo horseeday dhaqdhaqaaq la'aanta gaadiidka iyo alaabooyinka/adeegyada. Sidoo kale hoos u dhaca dakhli ururinta Maamulka Dekedda Kismaayo iyada oo sabab u ah hoos u dhaca muuqda ee alaabooyinka la soo dhoofiyay, qiimo iyo mug ahaabna intii lagu guda jirey muddada doorashada 2019.

	2019			2018
	Qiyaasta Kama-dambeysta ah	Ururinta Rumoowdey	Farqiga u dhaxeeya Qiyaasta Kama-dambeysta ah iyo Tan Rumoowdey	Ururinta Rumoowdey
Canshuurta Dakhliga Shakhsiyeed	250,000	186,338	(63,662)	174,721.00
Canshuurta Mushaaraadka - Aan Dowladda Ahayn	287,025	453,339	166,313	426,427.99
Canshuurta Macaashka Ganacsiga	1,135,941	745,422	(390,519)	743,489
Canshuurta Guryaha	600,000	1,801,699	1,201,699	88,323
Shatiyada Baabuurta iyo Darawalada	20,000	600	(19,400)	140,977
Shatiyada Ganacsiga iyo Xirfadaha	80,000	21,790	(58,210)	49,780
Shatiyada Telefishanka iyo Raadiyaha	1,140	-	(1,140)	570
Ujuurrooyinka Kalluumeysiga	150,000	71,000	(79,000)	1,000
Ujuurrooyinka Ku Soo-xirashada Dekedda	1,047,880	10,000	(1,037,880)	530,930
Ujuurrooyinka Soo Degidda Diyaaradaha	254,984	381,794	126,810	344,577
Canshuurta Bixidda Caalamiga ah	141,784	19,057	(122,727)	200,161
Canshuurta Wado-marista	1,643,299	551,483	(1,091,816)	1,374,024
Canshuurta Marista Waddooyinka Magaalada		110,930	110,930	
Diiwaangelinta NGO-yada Caalamiga ah	30,000	20,000	(10,000)	22,200
Diiwaangelinta NGO-yadada Maxaliga ah	22,000	12,400	(9,600)	22,000
Diiwaangelinta Shirkadaha Maxaliga ah	14,200	1,400	(12,800)	11,100
Diiwaangelinta Shirkadaha Caalamiga ah	200,000			
Ujuurrooyinka Meelaha Baabuurta La Dhigto	60,020	6,600	(53,420)	40,943
Ujuurrooyinka Beeraha	750	-	(750)	1,575
Ujuurrooyinka Bixidda Caalamiga ah	97,050			
Ujuurrooyinka Xoolaha	-	3,360	3,360	
Ururka Dhallinyarada Aan Dowliga Ahayn	-	600	600	
Canshuuraha kastamka - Alaabooyinka la soo dhoofiyey	7,500,000	2,941,336	(4,558,664)	4,384,279
Canshuuraha kastamka - JAADKA	2,000,000	962,626	(1,037,374)	1,693,248
Dakhli Ururinta laga helo Dowladda hoose	372,901	32,994	(339,907)	264,244
	15,908,974	**8,334,768**	**(7,277,156)**	**10,514,568**

Qoraalka 20aad Deeqaha

Guud ahaan deeqo gaaraya $7,285,796 ayaa la helay marka loo eego tirada miisaaniyadda loo dejiyay oo gaaraysa $12,946,352. Deeqaha ka imaanaya Dowladaha shisheeye iyo Ururrada Caalamiga ah looma helin sida lagu qiyaasay miisaaniyadda. Farqiga ayaa inta badan sabab u ah dib ugu noqoshada qiyaasta iyada oo rajo wanaagsan laga qabay in la helo intii lagu guda jiray sannadka iyada oo qiyaastii asalka ah ay ahayd $5,660,555. Shaxda soo socota ayaa waxay soo bandhigaysaa kala-dhigdhigista faahfaahsan ee deeqaha kala duwan.

	2019			2018
	Qiyaasta Kama-dambeysta ah	Ururinta Rumoowdey	Farqiga u dhaxeeya Qiyaasta Kama-dambeysta ah iyo Tan Rumoowdey	Ururinta Rumoowdey
Nooca Canshuurta				
Deeqaha Ka Yimid Ururrada Caalamiga ah	7,246,849	4,880,811	2,366,038	5,598,949
Deeqaha Ka Yimid Dowladda Federaalka ee Soomaaliya	5,699,503	2,404,985	3,294,517	870,000
Wadarta Guud	**12,946,352**	**7,285,796**	**5,660,555**	**6,468,949**

Farqiga u dhaxeeya inta ugu badan waxaa sabab u ah dib ugu noqoshada qiyaasta iyada oo rajo wanaagsan laga qabey in maaliyado laga helo mashruuca RCRF II iyo DFS. Mashruuca RCRF II inta ugu badan wuxuu maalgeliyaa mushaaraadka shaqaalaha rayidka ah ee la shaqaaleeyay ka-dib markii la marsiiyay geeddi-socod aad u adag oo wakhti badan qaatay, JSS uma qorin shaqaale xawaarihii markii hore la qorsheeyay taas oo horseeday maaliyado dhan $450,000 in aanan la adeegsan. Intii lagu guda jiray sannadkii dhammaadey 31ka Disembar 2019 waxaa jirtey hawsha kormeer iskuul oo ku kaceysa $50,000 taas oo fulinteeda loo wareejiyay 2020. Dakhliyada ilaha iyada u gaarka ah ee 2019 waxay ahaayeen kuwo ciriiri ah sidaa daraadeedna khayraad kaash dheeraad ah kasta waxaa mudnaantooda koowaad la siinayay in lagu bixiyo kharashaadyada kale. Sidoo kale intii lagu guda jiray sannadkii dhammaadey 31ka Disembar 2019 waxaa jirey mashaariic loo soo wareejiyay fulintooda 2020.

Shaxda soo socota ayaa waxay caddeynaysaa farqiga u dhaxeeya isbarbardhiga Miisaaniyadda iyo dakhli ururinta rumooway.

Deeqaha ka yimid Ururrada Caalamiga ah

Deeqaha	Miisaaniyadda La Deji	La Bixiyay	Harsan
Danish Refugee Committee (DRC)	2,033		2,033
GIZ	1,641,072	1,081,512	559,560
ADRA	69,490	25,190	44,300
Norwegian Church Aid	53,430	44,955	8,475
Norwegian Refugee Council	13,440	13,440	-
Save The Children	12,750	11,497	1,253
CARE INTERNATIONAL IN SOMALIA	91,172	68,484	22,688
Lutheran World Federation (LWF) Education	3,600	2,513	1,087
Mercy Corps	1,330	1,330	-
Food and Agricuture organization	491,580	180,974	310,606
United Nation Developmental Programme	126,870	106,370	20,500
UNICEF	52,030	51,987	43
UNHCR	631,060	591,560	39,500
UNHABITAT	6,790	16,370	(9,580)
UN-WOMEN	50,660	50,660	-
International Organization for Migration	650,375	424,916	225,459
Somalia Stability Fund	496,076	74,110	421,966
RCRF11	2,598,432	2,089,844	508,588
PREMIS	254,658	45,099	209,560
	7,246,849	**4,880,811**	**2,366,038**

Deeqaha ka yimid Dowladda Federaalka ee Soomaaliya

Deeqda guud ahaan gaareysa $5,699,503 oo ka timid Dowladda Federaalka ee Soomaaliya ayaa la qiyaasayay in la helo sannadka 2018; haseyeeshee deeqda rumoowday ee la helay waxay ahayd $2,404,985, iyadoo sabab u ah in Dowladda Federaalka ee Soomaaliya ay xiriirka wada-shaqeyn u jartey Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya kuna soo rogtey xiyiraado safar iyo cunaqabateyn dhaqaale. `

Qoraalka 21aad Dakhliga Kale

Dakhliga kale ee la ururiyay waxaa uu ka kooban yahay iibka alaabada iyo adeegyada oo dhan $146,697 marka loo eego bartilmaameedka oo dhan $1,333,371. Hoos u dhaca ku yimid bartilmaameedka ayaa sabab u ahaa sadaal xad-dhaaf ah oo la sameeyay intii sannadka lagu guda jiray. Hoos u dhaca kiradii laga qaaday garoonka diyaaradaha ayaa inta badan sabab u ah in ganacsiyadu ay xirmeen, waxaanna macluumaadka degganaha soo xaqiijiyay waaxda dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda. Ururin la'aanta lacagaha fiisaha dal-ku-galka iyo aqoonsiga shakhsiga waxaa sabab u ahaa isbeddelka hirgelin siyaasadeed. Hoos u dhaca lacagaha laga qaadayey lambarka taarikada iyo diiwaangelinta buugga gaadiidka ayaa loo aaneynayaa hoos u dhaca ka ganacsiga iyo soo-dejinta

gaadiidka ee dekedda oo sabab u ahaa muddada doorashada. Lacag ururinnada sannadka ayaa waxay ahaayeen:

	2019			2018
	Qiyaasta Kama-dambeysta ah	Ururinta Rumoowdey	Farqiga u dhaxeeya Qiyaasta Kama-dambeysta ah iyo Tan Rumoowdey	Ururinta Rumoowdey
Nooca Canshuurta				
Dakhliga kirada ee ka soo xaroodo garoonka diyaaradaha	280,000	-	280,000	-
Ujuurrooyinka Dal-ku-galka	102,500	32,392	70,108	3,400
Diiwaangelinta Taarikada Gaadiidka	481,761	69,708	412,053	327,381
Diiwaangelinta Buugga Diiwaanka Gawaarida	269,110	44,597	224,513	191,407
Ganaaxyada/Ciqaabaha	150,000	-	150,000	-
Ujuurrooyinka Qabashada Dacwadaha Maxkamadda	50,000	-	50,000	-
Wadarta Guud	**1,333,371**	**146,697**	**1,186,674**	**522,188**

Qoraalka 22aad Gunnooyinka La Siiyo Shaqaalaha

Guud ahaan lacag gaareysa $ 12,066,277 ayaa lagu bixiyay gunnooyinka la siiyo shaqaalaha marka loo eego miisaaniyadda kama dambeyska ah oo dhan $16,134,726. Hoos u dhaca kharashka aan la bixin oo gaaraya (Ciidamada ammaanka; $885,305, Gunnada hoyga $949,123 iyo Siyaasiyiinta $894,226) ayaa waxaa sabab u ah dib-u-dhac ku yimid soo wareejinta maaliyadaha ka imaanayay DFS ee loogu talagalay amniga, hoyga iyo mushaaraadka siyaasiyiinta ee aan la soo wareejin ilaa iyo sannad maaliyadeedkii xigay. Hoos u dhaca kharash gareynta mashruuca RCRF II $445,294 ayaa sabab u ahayd dib u dhaca qorista shaqaalaha rayidka ah.

Qoraalka 23aad Isticmaalka Alaabada iyo Adeegyada

Awoodda kharashaad bixinta Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya waxay ku kooban tahay dakhli ururinta muddo waqti ah oo cayiman. Xaaladda alaabada iyo adeegyada, JSS waxay kharash-gareysay lacag guud ahaan dhan $3,035,360 oo u dhiganta boqolkiiba 34 ee miisaaniyadda kama dambeysta ah ee la qiyaasey. Kala duwanaanshaha loo qaybiyay hay'adaha oo dhan waxaa inta badan loo aaneynayaa caqabadaha ka jira dakhliga la heli karo ee rumooway.

Qoraalka 24aad Deeqaha La Siiyo Dowladaha Kale

Iyadoo loo marayo heshiis u dhaxeeya Wasaaradda Maaliyadda iyo Dowladda Hoose ee Kismaayo oo ku taariikheysan 2014, dowladda hoose waa in ay dhigtaa dakhligeeda canshuur ururinta Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda (TSA) ka-dibna waa in ay codsataa kharashaadkeeda hawlgallada iyadoo u mareysa habraacyada jaango'an ee u degsan Wasaaradda.

U siideynta maaliyadaha dowladda hoose ee Kismaayo ayaa waxay ku saleysan tahay hadba baahiyada loo qabo.

Qoraalka 25aad Dheefaha/Faa'iidooyinka Bulshada ee shaqada

Daaweynta caafimaad ee dalka gudahiisa iyo dibediisa waa dheefta bulshada ee aasaasiga ah ee hadda la siiyo shaqaalaha JSS. Hawlwadeennada Ciidanka Ammaanka ee Jubbaland waa dadka inta badan ka faa'iideysta dheeftan iyadoo inta badan sabab u ah khataraha amni ee soo wajaha. Kharashaadka rumooway wuxuu ahaa boqolkiiba 22 ee guud ahaan qiyaasta miisaaniyadda. Si kastaba, dheefaha daaweyntaasi caafimaad waxay dabci ahaan ku xiran tahay dalabka, helitaanka khayraadka iyo tirada dhacdooyinka inta lagu guda jirro sannadka.

Qoraalka 26aad Kharashaadka kale ee Xawilaadaha aan meel kale lagu soocin

Xawilaadaha aan meel kale lagu soocin waxaa ay ka kooban yihiin waajibaadka JSS iyo mashruuc horumarinta ee ay bulshadu hormuud ka tahay. Waxaa jirey lacago dhan $2,033 oo ka harsanaa mashruuc taas oo aan lala bixin sannadkii hore ee 2018. Mashruuca Horumarineed ee ay Bulshadu Hormuud ka tahay waxaa maalgeliyay SSF/DRC waxaanna lagu adeegsadey sannad maaliyadeedka 2019 waanna in laga hirgeliyo dhammaan degmooyinka la gaari karo ee Gobolka Gedo ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

Shaxda soo socota waa kala-dhigdhigista kala duwanaanshaha.

	2019 USD	2018 USD
Deymaha JSS	-	106,590
Mashaariicda Horumarineed ee ay Bulshado Wado	2,033	639,900
	2,033	**746,490**

Qoraalka 27aad Hantida Aan Maaliyadda Ahayn

Intii lagu guda jiray sannadka 25% ee miisaaniyadda hantida aan maaliyadda ahayn ayaa lagu bixiyay hantida miisaaniyadooda la dejiyay ee sannadka. Kala duwanaanshaha waxaa sabab u ahaa hay'adaha qaar oo dhowaan la aasaasay oo aan awoodin in ay ka faa'iideystaan qoondeynta miisaaniyadda oo sabab u ah in aannu jirin kheyraad kaash ah oo la heli karo. Faahfaahinnada waxaa lagu muujiyay qoraalka 18aad waxayna la xiriiraan iibka baabuur, Qalab iyo Mashiinno aan meel kale lagu soocin, Alaab-xafiiseed iyo rakibaadaha, qalabka macluumaadka, kombiyuutar iyo isgaarsiinta (ICT) iyo dhismayaal aan degaan ahayn ee loogu talagalay Wasaaradaha la dhisay.

Qoraalka 28aad Lacag-bixinnada Dhinacyada Saddexaad, Kaalmooyinka Dibedda, Kale iyo Tan Aan Lala Soo Bixin

28.1 Lacag-bixinnada Dhinacyada Saddexaad

JSS waxay sidoo kale ka faa'iiday alaabo iyo adeegyo loo soo iibiyay iyadoo sabab u ah lacag-bixinno kaash ah oo ay bixiyeen dhinacyo saddexaad inta muddadan lagu guda jiray. Lacag-bixinnadan laguma xisaabo qabashada kaashka ah ama lacag-bixinnada ay bixiso JSS balse waxay faa'iido u yihiin

dowladda. Waxaa ka mid ah lacag-bixinnada ay bixiyaan hay'adaha gargaarka geesaha badan iyo kuwa laba-geesoodka ah iyo ururrada aan dowliga ahayn. Waxaa ay qayb ka yihiin taageerada loogu talagalay barnaamijyada dowladda sida kaalmo dibeddeed ama kaalmo kale. Maclumaad dheeri ah oo ku saabsan kaalmada dibedda ama kaalmada kale ayaa hoos lagu bixiyay. Dowladda waxaa si rasmi ah loogu sheegay in lacag-bixinnadan soo socda ay bixiyeen dhinacyo saddexaad si loogu soo iibiyo alaabo iyo adeegyo intii lagu guda jiray 2019 iyo 2018 waxaanna ka faa'iiday JSS. Qaddarka lagu sheegay lacag-bixinnada dhinac saddexaad muhiim ma aha in uu tilmaamo kani in uu yahay liiska dhammeystiran ee wax-ku-biirrinta, waa keliya qaddarka JSS sida rasmiga ah loogu sheegay.

Lacag-bixinno dhinac saddexaad ah oo guud ahaan dhan $3,328,016 ayaa waxaa bixiyay PREMIS iyo SSF iyagga oo ka wakiil ah JSS. Kharashaadkan waxaa uu ka kooban yahay $ 609,605 oo ah taageero farsamo, taageero ICT oo ay bixisay PREMIS oo lagu daray kharashaad la xiriira dhismaha, horumar dhaqaale, mashruuc lagu taageerayo dhismaha guddiga dhulka ee Jubbaland iyo Mashruuc lagu taageerayo madallada wadatashiga Haweenka Soomaaliyeed oo laguu doodayo sidii haweenka iyo kooxaha la garbiyo loogu dari lahaa hoggaanka Kismaayo oo dhan $2,718,411 oo ay bixisay SSF.

Mashruuca PREMIS, oo ay maalgeliso Waaxda Horumarinta Caalamiga ah ee Ingiriiska (DFID) iyo taageerada ku meelgaarka ah Midowga Yurub (EU) oo laga helay Sanduuqa Xasillinta Soomaaliya (SSF), si loo oggolaado in taageero sii socota la siiyo Dowlad-goboleeda ee hannaanada PFM iyo PA.

Hoos waxaa ku xusan kala-dhigdhigista deeqaha oo kooban ee la helay sannadkii 2019 iyo hay'adahii ka faa'iidey.

	Wasaaradda Maaliyadda		**Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah**		**Xafiiska Hantidhowrka Guud**		**Wadarta**
	Soo-noqnoqda	Raasumaal	Soo-noqnoqda	Raasumaal	Soo-noqnoqda	Raasumaal	
Kaalmo Farsamo	236,608		50,488.62		9,485		296,582
Tababar	131,521		79946		7,587		219,054
Taageero ICT		93,969					93,969
	368,130	**93,969**	**130,435**	**-**	**17,072**		**609,605**

Intii lagu guda jiray 2019, SFF waxay bixisay taageero dhinac 3aad oo gaar ah oo la xiriirta dhisidda dhismayaal loogu talagalay wasaaradaha kala duwan waxayna si toos ah gacan uga geysatay yareynta saameynta xuquuqaha haweenka, ee loogu talagalay Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga iyo Wasaaradaha Xanaanadaha Xoolaha, Beeraha iyo Kalluumeysiga, SSF waxay Kismaayo ka dhistay xafiisyada wasaaradda iyo xarunta dhallinyarada. Waxaa intaa dheer, in gobolka Gedo (magaalooyinka Garbahaarey, Ceelwaaq iyo Baandheere) ay ka socdaa dhismaha saddex saldhigyo boolis. Mashaariic lagu horumarinayo dhaqaalaha oo kala duwan oo diiradda lagu saarayo, mashruuca Kor-u-qaadista shaqo abuurka dhallinyarada (EYE) ee ka socda degmooyinka Afmadow iyo Baardheere –Mashruuca xoojinta dhaqaalaha dhallinyarada iyo haweenka ee degmooyinka Kismaayo, Raaskambooni iyo Garbahaarey iyo Mashruuca Maciishada ee Xannaanada Shinnida ee loogu talagalay Bulshooyinka La Garbiyo ee ku dhaqan Degmada Luuq ee Gobolka Gedo.

Sidoo kale mashruuc lagu taageerayo dhisidda guddiga dhulka ee Jubbaland iyo Mashruuca lagu taageerayo xoojinta bar internet-ka ah oo loogu talagalay dhallinyaro la beegsado oo lagu qaadanayo waxbarashada madaniga ah ee ku saabsan xuquuqaha dimuqraadiga ah ee haweenka, Madallada wada-tashiga lala yeelanayo odayaasha qabiillada, madallada wadatashiga Haweenka Soomaaliyeed si loogaga doodo in haweenka iyo kooxaha la garbiyo laga qeybgaliyo hoggaanka Kismaayo.

	Wasaaradda Xaanaanada Xoolaha		Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboorstiska		Wasaaradda Kalluumeysiga		Wasaaradda Madaxtooyada		Wasaaradda Beeraha		Wasaaradda Ganacsiga		Wasaaradda Amniga		Wasaaradda Haweenka		Wadarta
	Soo-noqnoqda	Raasumaal	Soo-noqnoqda	Raasumaal	Soo-noqnoqda	Raasumaal	Soo-noqnoqda	Raasumaal	Soo-noqnoqda	Raasumaal	Soo-noqnoqda	Raasumaal	Soo-noqnoqda	Raasumaal	Soo-noqnoqda	Raasumaal	
Kharashka Dhismaha iyo Dhisidda		279,794		279,794		279,794				279,794	181,480			121,438			1,422,096
Horumar Dhaqaale				352,003	426,328												778,331
Dhisidda Guddiga Dhulka ee JSS							17,151										17,151
Awoodsiinta haweenka															500,833		500,833
	-	**279,794**	**-**	**631,798**	**426,328**	**279,794**	**17,151**			**279,794**	**181,480**	**-**	**-**	**121,438**	**500,833**	**-**	**2,718,411**

28.2 Kaalmada Dibedda iyo Kaalmo Kale

Kaalmada dibedda laga helo ayaa waxaa loo helay qaab ah deeqo ka yimid hay'ado deeq-bixiyeyaal laba-geesood ah iyo kuwo dhinacyo badan oo hoos imaanaya heshiisyo qeexaya ujeeddada kaalmada loo adeegsan doono. Kaalmada kale ayaa waxaa ujeeddooyin gaar ah u bixiyay NGO-yada iyo deeq-bixiyeyaasha kale. Qaddaradan lacagaha ee soo socda ayaa la helay sannad maaliyadeedka 2019.

	2019 USD	2018 USD
Kaalmo Dibedeed		
Wadarta guud ee kaashka la qabtey	7,285,796	6,468,949
Wadarta guud ee lacag-bixinnada dhinaca saddexaad	-	4,779,208
Wadarta Guud ee Kaalmada Dibedeed	**7,285,796**	**11,248,157**
Hay'adaha Gargaarka ee Geesaha Badan		
Wadarta guud ee kaashka la qabtey	-	
Wadarta guud ee lacag-bixinnada dhinaca saddexaad	-	
Wadarta guud ee hay'adaha gargaarka ee geesaha badan	**-**	**-**
Hay'adaha Gargaarka ee Laba-geesoodka ah		
Wadarta guud ee kaashka la qabtey	2,404,985	870,000
Wadarta guud ee lacag-bixinnada dhinaca saddexaad	-	
Wadarta guud ee hay'adaha gargaarka ee la ba-geesoodka ah	**2,404,985**	**870,000**
Ururrada Aan Dowliga Ahayn		
Wadarta guud ee kaashka la qabtey	4,880,811	5,598,949
Wadarta guud ee lacag-bixinnada dhinaca saddexaad	-	4,779,208
Wadarta guud ee NGO-yada	**4,880,811**	**10,378,157**

28.3 Kaalmada Dibedda ee Aan Lala Soo Bixin

Intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedkii 2015, mashruuc cusub oo loo yaqaano Kharashaadka Soo Noqnoqda iyo Maalgelinta Dib-u-habeynta (Recurrent Cost and Reform Financing (RCRF II) ayaa la bilaabey. Mashruucan wuxuu socon doonaa muddo shan sano ah, haseyeeshee iyada oo sabab u ah maaliyadsiin dheeraad ah (AF) ayaa muddada la kordhiyay (ilaa 30ka Juunyo 2022) waxaana dib loo eegi karaa si sannadle ah. Mashruuca RCRF II waa sanduuqa multi-partner fund oo uu maamulo Ururka Horumarinta Caalamiga ah ee loo yaqaano International Development Association (IDA) iyada oo maaliyadaha JSS loo soo marsiiyo Dowladda Federaalka ee Soomaaliya. Hadafka mashruuca waa in lagu taageero qaataha in uu bixiyo mushahaar joogto ah oo la isku haleyn karo, iyo in la dhiso aasaaska fulinta miisaaniyadda iyo nidaamyo lacag-bixin hufan oo loogu talogalay qaybaha/waaxaha aan amniga ahayn ee Dowladda Federaalka, Dowlad-goboleedyada xaqa u leh.

Sida ku xusan heshiiska waajibka ah ama isku haya ee *Lambarkiisu yahay TFOA0534 Ku Taariikheysan 29ka Juunyo 2015* ee u dhaxeeya Dowladda Federaalke ee Soomaaliya (DFS), iyadoo ka wakiil ah dhammaan dowlad-goboleedyada kale ee dhisan & kuwa hadda la dhisaya, iyo Ururka Horumarinta Caalamiga ah ee loo yaqaano International Development Association (IDA), Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya iyadoo sabab u ah heshiis-hoosaad ay la gashey Dowladda Federaalka ee Soomaaliya (DFS) waxay mashruuc socda la gashey IDA oo socon doonaa ilaa 30ka Juunyo 2022.

Kaalmada dibedda ee aan lala soo bixin ee la xiriirta mashruuca RCRF II waxay ku xiran tahay in JSS ay ka soo baxdo shuruudaha aasaasiga ah ee mashruuca; haseyeeshee, deeqda ayaa sida soo socota u tilmaameysa kala-dhigdhigista miisaaniyadda dejisan ee loogu talogalay JSS muddadan oo ah sidan soo socota. Qaddarka lacagta deeqda waxay ku xiran tahay dib-u-eegis sannadle ah iyo ansaxinta ururka IDA

Sannadka	2015	2016	2017	2018	2019	2020	2021	2022
Qaddarka Miisaaniyadda La Dejiyey	1,780,000	2,980,000	2,580,000	3,430,000	2,598,432	2,962,832	2,598,432	170,000

Qoondeynta kore waa qoondeyn tilmaan ah oo ku waajibta dib-u-eegista min sannadka 2020 ilaa 2022 (maalgelinta shaqooyinka dowladda ee muhiimka ah $1,880,769, maalgelinta bixinta adeegga waxbarasho $637,663, maalgelinta bixinta Adeegga Caafimaadka iyo isuduwidda iyo maareynta mashruuca $170,000).

Sannadkii dhammaaday 31ka Disembar 2019, JSS waxay heshay guud ahaan lacag dhan 1,988,054 ($1,832,807 sannadkii 2018) oo ah maaliyadaha mashruuca RCRF II. Mashruuca waxaa la filayaa in uu sii socdo ilaa uu ka dhammaado.

Marka ay taariikhdu ahayd 31ka Disembar, 2019, waxaa jiray haraaga aan lala soo bixin ee maaliyadda mashruuca ee loogu talagalay mashaariicda hadda socda. Waxaa la filayaa in shuruudaha la sii buuxin doono mashaariicdana waxaa la filayaa in ay u sii socdaan si waafaqsan shuruudaha heshiiska u dhaxeeya deeq-bixiyaha iyo JSS.

Ma jirin xaalado loo hoggaansami waayey shuruudaha kuwaas oo ka dhashey in la baajiyo deeqaha kaalmada dibedda ah.

Qoraalka 29aad Bayaamada Hawlgallada

Warbixinta Bayaanka Hawlgallada waa mid waafaqsan Buugga Istaatistika Maaliyadda Dowladda ee loo yaqaano Government Finance Statistics Manual 2014 (GFSM 2014). Istaatistika Maaliyadda Dowladda ee loo yaqaanno Government Finance Statistics (GFS) waa qaabka-guud ee xisaabaad oo ay diyaarisay Hay'adda Lacagaha Adduunka International Monetary Fund (IMF) si ay u bixiso dhabbe-tuseyaasha loogu talogalay isugeynta xisaabaadka maaliyadeed. Qaabka-guud ee GFS waxaa loo qaabeeyay in uu bixiyo istaatistik u saamaxaya kuwa siyaasadda dejiya iyo falanqeeyayaasha in ay daraasadeeyaan horumarada hawlgallada maaliyadeed iyo booska dhaqaale ee dowladda.
Waxaa sidoo kale loo adeegsadaa in lagu falanqeeyo hawlgallada heerka gaarka ah ee dowladda, macaamulaadka u dhaxeeya heerarka dowladda, iyo waaxaha dowladda

Bayaanka Hawlgallada waxaa uu soosaarayaa macluumaad kooban oo ku saabsan waxqabadka guud iyo booska dhaqaale ee guud ahaan dowladda. Bayaankan waxaa loo qaybiyaa saddex qaybood oo soo bandhiga: macaamulaadka dakhliga iyo kharashaadka; macaamulaadka hantida aan maaliyadda ahayn; iyo macaamulaadka hantida maaliyadda ah iyo deymaha. Bayaankan waa shaacin khiyaari ah oo ma ahan shuruud shaacin waafaqsan Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda, Warbixinta Maaliyadeed ee waafaqsan Jaangooyada Xisaabaadka ee Kaashka Ku Saleysan, oo ah jaangooyada la qaatey markii la diyaarinayay bayaamadan maaliyadeed.

Lifaaqa 2aad– Warqadda Maamulka ee Kama-Dambeysta ah. Warbixinta Hantidhowrka Madaxa-Bannaan Ee Ku Saabsan Baaritaanka Dowlad-Goboleedka Jubbaland Ee Soomaaliya (JSS) ee Sannadkii Dhammaadey 31ka Dismebar 2019.

riskbridge
Audit - Tax - Consulting

DOWLAD GOBOLEEDKA
JUBBALAND EE SOOMAALIYEED
Xafiiska Hanti-dhowrka Guud

JUBALAND STATE OF SOMALIA
Office of the Auditor General

دولة أقليم جوبالاند الصومالية
مكتب المراجع العام

Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya

Warbixin Ku Socota Wasaaradda Maaliyadda

Sannadkii Dhammaadey
31-ka Disembar, 2019

riskbridge
Audit · Tax · Consulting

DOWLAD GOBOLEEDKA
JUBBALAND EE SOOMAALIYEED
Xafiiska Hanti-dhowrka Guud

JUBALAND STATE OF SOMALIA
Office of the Auditor General

دولة أقليم جوبالاند الصومالية
مكتب المراجع العام

2 Juun 2021

Wasiirka,
Wasaaradda Maaliyadda,
Kismaayo, Jubbaland,
Soomaaliya.

Mudane,

Warbixin ku socota Wasiirka ee sannadkii dhammaadey 31-ka Disembar, 2019

Waxaannu dhowaan soo gebogabeynay baaritaankeenna Bayaannada Maaliyadeed ee Wasaaradaha iyo Tan Iskudhafan ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya sannadkii dhammaadey 31-ka Disembar 2019 taas oo aan u sameynay si waafaqsan Jaangooyntaa Caalamiga ah ee Hay'adaha Hanti-dhowrka Sare ee loo yaqaanno (International Standards of Supreme Audit Institutions ("ISSAI")). Jaangooyooyinkaasi waxay u baahan yihiin in aan qorsheyno oo aan sameyno baaritaanka si aan u helno hubaal caqligal ah oo ah in bayaannada maaliyadeed ee sannadlaha ah in aysan lahayn khalad la taaban karo laakiinse aan loogu talagalin ujeeddo lagu muujinayo ra'yi ku saabsan taabogalnimada kantaroolka gudaha ee hay'adda. Baaritaanka ayaa la sameeyaa si uu noogu suurageliyo in aan sameyo oo aan dhiibanno ra'yigeenna ku saabsan bayaamada maaliyadeed ee uu diyaariyay maamulka iyadoo uu kormeerayo Wasiirka Maaliyadda. Baarista bayaamada maaliyadeed kama xayuubinayso Wasaaradaha mas'uuliyadahooda. Si kastaba ha ahaate, iyadoo la raacayo hab-dhaqankeenna caadiga ah, waxaannu warbixintan u qornaa si aan kuu dareensiinno arrimo gaar ah oo aan aqoonsannay intii aan ku guda jirnay baaritaankeenna. Arrimahaasi waxay ku qoran yihiin warbixinta halkan ku lifaaqan.

Jawaabaha maamulka ayaa la bixiyay iyadoo loo marayo isuduwidda Wasaaradda Maaliyadda. Waxaannu jeclaan lahayn in aan maamulka iyo hawlwadeennadaba ugu mahadcelinno caawimaadooda iyo wada-shaqeyntii ay nala yeesheen intii ay baaristu socotay.

Waxaannu ku farxi doonnaa in aynu bixinno caddeymo kasta ee aad u baahan tahay ee ku saabsan arrimaha lagu soo hadalqaaday warbixintan.

Arrimaha lagu soo hadal qaaday warbixintan waa keliya kuwo ina soo jiitay intii lagu guda jira baaristeenna lagama maarmaanna ma ahan in ay yihiin bayaanka ballaaran ee dhammaan liidashooyinka jira ama dhammaan sii wanaajinta la sameyn karo. Soo-jeedimada sii wanaajinta waa in aad adigu qiimeysaa saamayntooda hawleed oo dhammeystiran ka hor inta aanan la hirgelin. Warbixintan waxaa keliya loo diyaariyay isticmaalkiinna sida Wasaaradaha Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya oo waa in aan la soo xigan dhammaanteeda ama qayb ka mid ah iyada oo aan ogolaansho qoran marka hore nalaga helin. Wax mas'uuliyad ahi nagama saarna dhinac saddexaad, maadaama aan warbixintan loo diyaarin, looguna talogelin ujeeddo kale.

Alla Mahad Leh,

Riskbridge (Xisaabiyeyaal Guud oo Shahaado Ka Haysta Kenya)
13th Floor, Landmark Plaza
Arwings Kodhek Road,
Upper Hill, Nairobi
CPA Bulle Ahmed, Lr. Aqoonsiga Xirfadeed 2055

Taariikhda: 2 Juun 2021

Tusmada

1 Qiimeynta kooban ee waxqabadka meelaha dib loo eegay 5

Waxyaabaha Sannadkan La Oggaaday: 5

Kantaroollada Guud ee Kombiyuutarka iyo Adeegsiga 7

2 Dakhliga 9

2.1 Liidashooyin ka jira hannaanka dakhli ururinta iyo diiwaangelinta 9

2.2 Daldaloollo ama nusqaamo waaweyn oo ka jira dakhliga la ururiyay intii lagu guda jiray muddada dib-u-eegista 12

2.3 Farqi u dhaxeeya dakhliga lagu diiwaangeliyay nidaamyada RMS iyo FMIS 15

2.4 Liidashooyinka ka jira Dekedda Kismaayo iyo Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ah ee Kismaayo 16

2.5 Kala-duwanaansho u dhaxeeya Deeqaha la diiwaangeliyay iyo Xaqiijinta laga helay deeq-bixiyeyaasha 20

3 Kharashaadka Aan Mushaaraadka Ahayn 22

3.1 La'aanta dokumentiyo ku habboon oo taageeraya 22

3.2 Liidashooyinka ka jira wax-soo-iibsiga 24

3.3 Dokumentiyada kharashaadka oo aan ku shaabadaysnayn "LA BIXIYAY" 25

3.4 Kharashaadka oo si khalad ah loo kala-saarey 26

4 Liiska Mushaaraadka 28

4.1 Liidashooyinka ka jira hannaanka shaqaalaha 28

5 Hantida ma guurtada ah 30

5.1 Liidashooyinka hoos tagaya Hantida Ma Guurtada ah 30

6 Bankiga iyo Kaashka 32

6.1 Liidashooyinka la aqoonsadey e ku jira bayaamada is-waafajinta bankiga 32

6.2 Xisaabo banki oo aan dhaqdhaqaaq lahayn 33

7 Fawjarrada Diiwaanka Weyn 34

7.1 Lambareynta iyo taageeridda Fawjarrada Diiwaanka Weyn 34

8 Miisaaniyad Dejinta iyo Warbixinnada Maaliyadeed 36

8.1 Liidashooyin ka jira dejinta miisaaniyadda iyo hannaanka ka-warbixinta maaliyadda 36

9 IT-ga Guud iyo Kantaroollada Adeegsiga 38

9.1 Kantaroollada Adeegsiga 38

9.1.1 Jeegagga FMIS oo Nuqullo Isku-eg ah 38

9.1.2 Nusqaamaha ka jira dakhli ururinta iyo ka-warbixinta ee dhinacyada saddexaad 39

9.1.3 Kala-duwanaanshaha ka jira barta ay ku kulmaan BPM iyo FMIS 40

9.2 Kantaroollada Guud ee Kombiyuutarka 42

9.2.1 Kantaroollada Gelidda 42

9.2.2 Hawlgallada IT-ga 49

9.2.3 Kantaroolka Isbeddelka Nidaamyada 53

9.2.4 Ka-soo-kabashada Musiibooyinka IT-ga iyo Sii Shaqeynta Hay'adda 55

1 Qiimeynta kooban ee waxqabadka meelaha dib loo eegay

Shaxda hoose ayaa waxay soo bandhigaysaa waxyaabihii baarista lagu oggaadey oo kooban. Shaxda, waxaan ku bixiney wax kasta oo la oggaadey oo la soo koobay iyo tilmaamaha muuqda ee muhiimadda uu mid kastaba leeyahay, sida ay qiimeyeen hantidhowrayaasha oo kaashanaya shirkadda Riskbridge Consulting.

Waxyaabaha Sannadkan La Oggaaday:

Dhinaca kantaroolka	Furaha halista	Liidashada kantaroolka ee la oggaadey	Qaddarka oo USD
2. Dakhliga	Sare	2.1 Liidashooyin ka jira hannaanka dakhli ururinta iyo diiwaangelinta	1,615,309
	Sare	2.2 Daldaloollo ama nusqaamo waaweyn oo ka jira dakhliga la ururiyay intii lagu guda jiray muddada dib-u-eegista	618,279
	Sare	2.3 Kala-duwanaanshaha u dhaxeeya dakhliga lagu diiwaangeliyay nidaamyada RMS iyo FMIS	
	Sare	2.4 Liidashooyinka iyo dakhliga aan la taageerin ee ka soo xarooda Dekedda Kismaayo iyo Garoonka Caalamiga ah ee Diyaaradaha ee Kismaayo	2,916,882
	Sare	2.5 Kala-duwanaansho u dhaxeeya Deeqaha la diiwaangeliyay iyo Xaqiijinta laga helay deeq-bixiyeyaasha	35,466
	Sare	**Wadarta guud ee qiimaha liidashooyinka lagu aqoonsaday dakhliga**	**5,185,936**
		Liidashooyinka lagu aqoonsaday dakhliga oo lagu muujiyay % ee wadarta guud ee dakhliga	**33%**
3. Kharashaadka marka laga reebo kharashka mushahaaraadka	Sare	3.1 La'aanta dokumentiyo habboon oo taageeraya	1,185,290
	Sare	3.2 Liidashooyinka ka jira wax-soo-iibsiga	131,220
	Dhexe	3.3 Dokumentiyada lacag-bixinta oo aan ku shaabadaysnayn "LA BIXIYAY"	
	Dhexe	3.4 Kharashaadka oo si khalad ah loo kala-saarey	45,820
	Sare	**Wadarta guud ee qiimaha liidashooyinka lagu aqoonsaday kharashaadka (Marka laga reebo kharashka mushahaaraadka)**	**1,362,330**
		Liidashooyin lagu aqoonsaday kharashaadka Marka laga reebo mushaaraadka oo lagu qeexay %	**38%**
4. Liiska Mushaaraadka	Dhexe	4.1 Liidashooyin ka jira hannaannada shaqaalaha iyo liiska mushaaraadka (Liidashooyinka la oggaadey ayaa guud ahaan dhan 7% ee wadarta guud ee kharashka mushaaraadka)	872,500

Dhinaca kantaroolka	Furaha halista	Liidashada kantaroolka ee la oggaadey	Qaddarka oo USD
5. Hantida ma guurtada ah	Dhexe	5.1 Joogteyn la'aanta diiwaanka hantida ma guurtada ah ee la cusbooneysiiyay	325,494
6. Bankiga iyo Kaashka	Dhexe	6.1 Liidashooyinka ka jira diyaarinta iswaafajinnada bankiga	
	Sare	6.2 Xisaabo banki oo aan dhaqdhaqaaq lahayn	
7. Fawjarrada diiwaanka weyn	Dhexe	7.1 Lambareynta iyo taageeridda Fawjarrada Diiwaanka Weyn	
8. Miisaaniyad Dejinta iyo Warbixinnada Maaliyadeed	Dhexe	8.1 Liidashooyinka ka jira hannaanka miisaaniyad dejinta iyo warbixinta maaliyadda	

Kantaroollada Guud ee Kombiyuutarka iyo Adeegsiga

Dhinaca Kantaroolka	Furaha Halista	Arrimaha La Oggaadey
Kantaroollada Adeegsiga		
Lacag-bixinnada	Sare	**Jeegagga FMIS oo Nuqullo Isku-eg ah:** Dib-u-eegistii aan ku sameynay hannaanka lacag-bixinta iyo dokumentiyada lacag-bixinta ee muunadda ah, ayaa waxaan ku oggaaney lacag-bixinno dhan USD **60,425.00** kuwaas oo lagu bixiyay jeegagga FMIS oo ka kooban laba nuqul oo isku eg, oo lid ku ah kantaroollada hannaanka ee isticmaalka jeeg gaar ah oo loogu talagalay lacag-bixin kasta.
Dakhliga	Dhexe	**RMS Gacan-ku-sameys ah - Ku-xirnaanta FMIS** Waxaan oggaaney in lacag-bixinnada lagu qaado Xarunta Dakhli Ururinta ka-dibna lagu diiwaangeliyo Nidaamka Maareynta Dakhliga (RMS), haseyeeshee, nidaamyada ma ahan mid ku xiran nidaamka FMIS, ee loo adeegsado warbixinnada maaliyadda.
	Dhexe	**Ururinta iyo Rasiid-bixinta** Waxaan oggaaney in lambarrada rasiidka ee loo adeegsado dakhli ururinta in aanan la gelin hannaanka RMS, taas oo abuuraysa daldalool ka jira hannaanka raadraaca ee dokumentiyada taageeraya.
	Dhexe	**Dakhli Ururin: Dekedda Kismaayo** Dekedda Kismaayo, ma lahan nidaam si otomaatik ah u shaqeeya oo loogu talagalay dakhliga laga qaado maraakiibta ku soo xiraneysa iyo canshuurta kastamka/furdadda.
	Sare	**Dakhli Ururin: Shirkadda Smart Technologies** • Ma jiraan waxyaabo muujinaya in JSS ay eegto ama raadraacdo dakhliga ay qaado Smart Technologies, oo ah shirkad adeegyo bixisa oo ay qandaraas kula gashey dowladda JSS in ay u daabacdo Aqoonsiyada Jubbaland, Shatiyada, baasaboorrada, lambarrada guryaha, shatiyada waddooyinka, iwm. • Kombiyuutarrada shirkadda Smart Technologies waxay ku shaqeeyaan barnaamijka Windows Server 8 oo aysan taageerin shirkaddii soo saartey, Microsoft, taas oo keenaysa khatar amni
Liiska Mushaaraadka	Dhexe	Muddada dib loo eegayo, nidaamka Maareynta Shaqaalaha ayaa waxaa loo soo iibiyay Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah, haseyeeshee, waxaannu oggaaney in ay jiraan daldaloolladan soo socda. • Ma ahan mid ku xiran nidaamka Liiska Mushaaraadka si loo yareeyo xog gelinta marka la qorayo shaqaale cusub, la maareynayo isbeddelada/beddelaadaha ama bixidda. • Dhammaan shaqaalaha laguma qorin ama diiwaangelin nidaamka sida, keliya 300 ayaa la marsiiyay nidaamka marka loo eego 700 shaqaale ayaa lagu diiwaangeliyay nidaamka.
Kantaroollada Guud ee Kombiyuutarka		
Kantaroollada Gelidda	Sare	Qaar ka mid ah adeegsadayaasha hannaanada FMIS, RMS, BPM iyo AMS laguma aqoonsan karin diiwaannada rasmiga ah ee Waaxda Shaqada iyo shaqaalaha (HR).

Dhinaca Kantaroolka	Furaha Halista	Arrimaha La Oggaadey
	Sare	Liidashada kala-soocidda Waajibaadyada Kantaroollada hannaanka macaamulaadka ee nidaamka FMIS
	Sare	Shaqaalaha ka tegaya shaqada lagalama noqon gelidda adeegsadaha ee nidaamka FMIS
	Dhexe	Kantaroollada Qaabeynta Eray-sireedka (Password) oo liita
	Sare	Waxqabadyada Maamulaha iyo Adeegsadaha mudnaanta leh ee hannaanka FMIS si madax-bannaan looma kormeero oo dib-u-eegis laguma sameeyo.
	Dhexe	Liidashada kantaroollada amniga dhismaha Wasaaradda Maaliyadda ee martigelinaya ama kaydinaya nidaamyada iyo xogta muhiimka ah.
Hawlgallada IT-ga	Dhexe	Siyaasadaha Amniga Macluumaadka
	Hoose	Tababarka Wacyigelinta Amniga IT-ga
Kantaroolka Isbeddelka Nidaamyada	Dhexe	La'aanta siyaasadda maareynta isbeddelka oo rasmi ah
	Hoose	La'aanta siyaasadda helidda ama horumarinta nidaamka oo rasmi ah
Ka-soo-kabashada Musiibooyinka IT-ga iyo Sii Shaqeynta Hay'adda	Sare	La'aanta Qorshaha Ka-soo-kabashada Masiibooyinka IT-ga iyo Sii Shaqeynta Hay'adda si loo fududeeyo dib u soo kabashada hawlagallada shaqo ee muhiimka ah iyo nidaamyada IT-ga haddii lagu guuldareysto ama ay dhacdo musiibo keeni karta in hawlgallada iyo nidaamyadaba ay noqdaan kuwo aan la heli karin muddo dheer.
	Dhexe	La'aanta istaraatiijiyad rasmi ah oo loogu talagalay kaydinta xogta iyo barnaamijyada habboon.

Si loo fududeeyo la-socodka iyo si loogu suurageliyo maamulka in ay si taabogal ah diiradda u saaraan wax-ka-qabashada arrimaha ku jira warbixinteenna, waxaannu u kala-soocnay arrimaha ka soo ifbaxaya hantidhowrkeenna si ay u kala muhiimsan yihiin. “Sare”, “Dhexe” iyo “Hoose”. Marka mudnaanta arrimaha loo kala soocayo “Sare”, “Dhexe” iyo “Hoose” ISSAIs waxay nooga baahan yihiin in aynu tixgelinno muhiimadda gaarka ah ee arrin laga hadlayo.

Furaha Soo-koobidda

Sare	Tallaabooyinka lagu taliyay waa in si degdeg ah loo hirgeliyaa sababta oo ah waxaa ay ku saabsan yihiin liidashooyin mug leh
Dhexe	Sii wanaajinta waa in la tixgeliyaa muddo-dhexe.
Hoose	Soo-jeedimada waxay la xiriirraan hababka xil-gudashada ugu wanaagsan waxaanna la hirgelin karaa muddo-dheer.

2 Dakhliga

2.1 Liidashooyin ka jira hannaanka dakhli ururinta iyo diiwaangelinta

U-fiirsashada

Xaaladda

Karraaniyada Dakhliga ayaa waxay subaxdii qaataan buugaagta rasiidka canshuuraha waxayna fiidkii ku soo celiyaan Xarunta Dakhli Ururinta (RCC) si ay ugu wareejiyaan canshuuraha maxalliga ah ee ay maalintii soo ururiyeen. Canshuuraha ay qaadaan Karraaniyada Dakhliga ee kala duwan ayaa loo ururiyaa qaabka kaashka fawjarka elektarooniga ah (EVC) ama kaash ahaan.

Markii aan dib-u-eegis ku sameynay hannaanka dakhliga iyo dokumentiyada taageerada, ayaa waxaan oggaaney in ay jiraan daldaloolladan soo socda ee saameynaya saxnaanta, dhammeystirnaanta iyo kala-soocidda dakhliga laga ururiyay noocyada kala duwan ee canshuuraha:

1. Fawjarrada Dakhliga ee kala duwan ee loo bixiyay in ay yihiin dokumentiga taageerada ee Canshuurta macaashka, Canshuurta Guryaha iyo Canshuurta dakhliga kama muuqan Lambarka Aqoonsiga Canshuur-bixiyaha (TIN) ee canshuuraha bixinaya taas oo ka dhigtay in aysan suuragal ahayn in la oggaado cidda canshuuraha bixisay iyo ujeeddada loo bixiyay. Waxaa sidoo kale la oggaadey in dokumentiyada taageerada aaney ku diiwaangashanayn saldhiga canshuurta lagu qaaday iyo sidoo kale dakhliga guud ee la canshuurayo si loola eego waxa la bixiyay oo ka dhigeysa mid aan suuragal ahayn in la xaqiijiyo dhammeystirnaanta iyo saxnaanta canshuuraha ay canshuur-bixiyayaasha siiyeen Wasaaradda Maaliyadda.

2. Warqadaha lagu dhejiyo jidadka ee ay bixiso shirkadda Smart Technology, oo ah shirkad gaar loo leeyahay oo lala xiriirinayo dakhli ururinta iyo bixinta warqadaha lagu dhejiyo gaadiidka iyagoo ka wakiil ah Wasaaradda Maaliyadda (MoF), ma muujinayaan muddada/ansaxnimada iyo lambarta taarikada baabuurta. Tani waxay horseedi kartaa in isla hal warqad oo baabuurta lagu dhejiyo loo adeegsado baabuur kala duwan ama muddooyin dhaadheer in ay u diideyso Wasaaradda Maaliyadda (MoF) canshuuraha habboon ee ka soo xarooda warqadaha lagu dhejiyo baabuurta.

3. Dakhliha ka yimid shirkadda Smart Technology ayaa lagu sheegay laba xisaabood oo kala duwan maadaama ay shirkaddu u fidiso adeegyo dakhli ururin kala duwan wasaaradda maaliyadda (MoF) oo ay ku jiraan canshuuraha ka soo xaroodo warqadaha baabuurta lagu dhejiyo, diiwaangelinta taarikada gaadiidka iyo diiwaangelinta buugga baabuurka (logbook).

   Dakhliga ayaa lagu diiwaangeliyay hoosta (i) Canshuuraha alaabada iyo adeegyada oo dhan US$111,530 iyo (ii) Iibka alaabada iyo adeegyada oo dhan US$ 114,305 marka la isku darana waxay noqonayaan US$225,835. Marka la isbarbardhigo dakhliga ka soo xarooda shirkadda Smart Technologies sida ku cad warbixinnada shirkadda, waxay muujinayaan dakhliga saafiga ah oo dhan US$375,379 in ay ku wareejisay Dowlad-goboleedka Jubbaland sannad maaliyadeedkii 2019. Tirada ayaa timid ka-dib markii dakhli ururin guud ee dhan US$ 834,755, laga jarey kharashaadka shirkadda Smart Technologies iyo qaddar lacageed oo ay shirkadda Smart Technologies ku lahayd Dowlad-goboleedka Jubbaland oo dhan US$118,051. Tani waxay muujinaysaa in dakhliga canshuurta ee ka soo xaroodey alaabooyinka iyo adeegyada in uu ku jiro khalad la taaban karo.

4. Waxaan oggaaney in canshuurta Guryaha si khalad ah loo soocey iyadoo si khalad ah loogu soocey xariiqa xisaabta Alaabada iyo Adeegyada iyo sidoo kale xariiqa xisaabta canshuuraha ka yimid Ganacsiga Caalamiga ah. Tani waxay keeneysaa awoodid la'aanta in la xaqiijiyo kaamilnaanta iyo saxnaanta canshuurta Guryaha ee la diiwaangeliyay inta lagu guda jirey muddada oo ah sida soo socota:

Sharraxaad	**Lagu diiwaangeliyay canshuuraha ka soo xarooda Alaabooyinka iyo Adeegyada (US$) <GL 115103>**	**Lagu diiwaangeliyay canshuuraka ka soo xarooda Ganacsiga Caalamiga ah(US$) <GL 114203>**	**Lagu diiwaangeliyay canshuuraha dakhliga, faa'iidooyinka iyo faa'iidooyinka raasumaalka (US$) <GL 111101>**	**Wadarta guud ee qaddarka (US$)**
Canshuurta guryaha	10,699	51,656	72	62,427

5. Dib-u-eegistii lagu sameeyay dakhliga dhulka, waxaa lagu oggaadey in Maamulka Dhulalka ee Jabbaland (JLA) in aysan qaadin dakhliyo iyaga u gaar ah oo sabab u ah in aysan jirin sharciyo maamulaya canshuuraha dhulka ee laga qaado Jubbaland. Si tani loo gaaro, shirkad gaar loo leeyahay oo lagu magacaabo Milestone Company ayaa keligeeda loo xushey in ay dakhliga ururiso iyadoo ka wakiil ah maamulka JLA. Shirkadda ayaa keligeeda la xushey oo ma jirin sahanka suuqa lagu tartamo oo la sameeyay intii lagu guda jiray wax-soo-iibsiga si loo xaqiijiyo Dowlad-goboleedka Jubbaland in ay hesho qiimaha lacagta ee soo-iibsiga.

   Intaa waxaa dheer, in aan oggaaney kala duwanaansho dhan US$ 295,204 in uu u dhaxeeya dakhliga dhulka in lagu qorey hoosta canshuuraha alaabooyinka iyo adeegyada iyo dakhliga dhulka ee hoos imaanaya warbixinta Maamulka Dhulka taas oo muujineysa khaladka ku jira dakhliga sida hoos lagu muujiyay:

Sharraxaad	**Lagu diiwaangeliyay canshuuraha ka soo xarooda Alaabooyinka iyo Adeegyada (US$) ee MoF**	**Lagu diiwaangeliyay warbixinnada JLA (US$)**	**Wadarta guud ee kala-duwanaanshaha (US$)**
Dakhliga dhulka	1,393,643	1,688,847	(295,204)

6. Booqasho ay kooxda baarista/hantidhowrka ku tagtey Xarunta Dakhli Ururin (RCC), ayaa waxaan ku oggaaney fayl-gareynta, keydka iyo keydinta dokumentiyada taageerada dakhliga in ay u baahan yihiin sii wanaagin maadaama hannaanka si habboon loo sameyn.

7. Waxaa intaa dheer, in aan oggaaney in qiimaha sarifka lacagaha qalaad ee loo adeegsaday in lacag shilin Soomaaliga loogu beddelo doolarka mareykanka (US$) ee ay adeegsatey Wasaaradda Maaliyadda (MoF) in aan si cad loo diiwaangelin mana waafaqsanna sida qaddaradan looga warbixiyey taas oo horseedi karta khaladaad ka tarjumaya dakhliga ka soo xarooda canshuuraha.

Shuruudaha

Sharciga Canshuurta ee 2017 ayaa si cad u qeexaya oggolaanshaha, canshuur ururinta, khidmadaha iyo canshuur ka-qaadidda iyo jaangooyada ay tahay in la raaco marka la qiimeynayo oo la qaadayo canshuuraha iyo dakhliga kale iyo sidoo kale doorarka, xuquuqaha iyo waajibaadyada canshuur-bixiyeyaasha iyo maamulka qaadaya. Qeybta 9aad ee Sharciga wuxuu dhigayaa in rasiid rasmi ah ay bixiyaan saraakiisha canshuurta oo ku qoran taariikhda lacag-bixinta, magaca iyo lambarka sarkaalka qaadaya lacagaha, goobta lacagta lagu bixiyay, magaca iyo lambarka aqoonsiga canshuur-bixiyaha, qaddarka lacagta la bixiyay iyo mas'uuliyadda marka loo eego lacag-bixinta la bixinayo. Diiwaannada

dhammaan canshuuraha la qaaday waa in loo hayaa qaabka ku cad habraacyada ay dhigayaan xeernidaamiyayaasha ay soosaartey Wasaaradda Maaliyadda. Rasiidka lacag-bixinta waa in ay baaritaan ku sameyso Wasaaradda Maaliyadda si loo hubiyo in aysan jirn wax-isdabamarin iyo khiyaanno iyo in la saxo haddii ay jirto lacag-bixin aan habboonayn.

Sababta

Hannaanka canshuur ururinta ee Karraaniyada Dakhliga iyo isla-xisaabtanka kama dambeysta ah ee Xarunta Dakhli Ururinta (RCC) waa mid gacan ku sameys ah wuxuunna u nugul yahay il-duuf. Waxaa intaa dheer, khaladka ku yimaada xisaabaha dakhliga waxay horseedi karaan awoodid la'aanta in la xaqiijiyo saxnaanta iyo dhammeystirnaanta dakhliga.

Saameynta

Daldaloollada ka jira hannaanka dakhli ururinta iyo diiwaangelinta ayaa waxay horseedi karaan in uu khalad ku yimaado dakhliga. Hannaanka gacan ku sameyska ah wuxuu horseedaa in dakhliga uu u nuglaado khayaamo ama il-duuf.

Soo-jeedimo

Waxaan soo-jeedinaynaa:

- Fawjarrada taageerada ee kala duwan in lagu daro TIN, saldhiga canshuurta iyo wadarta guud ee dakhliga la canshuurayo.
- Warqadaha lagu dhejiyo baabuurta waa in ay muujiyaan ansaxnimada iyo diiwaanka baabuurta.
- Kala-soocidda habboon ee xisaabaha dakhliga.
- Wasaaradda Dhulka waa in ay u doodaa sidii sharci loogu soosaari lahaa xeer-nidaamyada iyo canshuuraha dhulka
- Maamulka Dakhli Ururinta waa in uu si dhow ugala shaqeeyaa JLA raadraaca dakhliga dhulka ee bil kasta.
- Xilliga dib-u-cusbooneysiinta qandaraaska, JSS waa in ay sameynaa hawl qiimeyn lagu tartamo si loo hubiyo in Dowladda ay qiimaha lacagteeda ka hesho wax-soo-iibsigeeda.

Muhiimadda

Sare

Agaasinka Ka Mas'uulka ah

Maamulka Dakhli Ururinta (RCA)

Jawaabta uu maamulka ka bixiyay

1. Shakhsiyaadka canshuurta bixinaya ma lahan lambarka PIN/TIN, haseyeeshee nidaamka FMIS ee MoF ayaa waxaa uu leeyahay foomka mushaaraadka shaqaalaha oo muujinaya saldhiga canshuurta, qiimaha canshuurta iyo aqoonsiga shakhsiga. Canshuurta guryaha iyo canshuurta macaashka ganacsiga ee canshuur-bixiye kasta waxaa uu leeyahay lambarka TIN oo uu bixiyey nidaamka RMS sidaa daraadeed hantidhowrayaasha waxay ka ilduufeen rasiidka RMS.
2. Warqadda baabuurta lagu dhejiyo ee canshuurta marista waddooyinka magaalada waxay leedahay muddo iyo ansaxnimo gaar ah; iyo sidoo kale App internet-ka ku shaqeeya oo bixiya faahfaahinnada gawaarida canshuurta bixisay. Wasaaradda Maaliyadda oo kaashaneysa

Wasaaradda Gaadiidka iyo ciidanka taraafikada ayaa korjoogteeya canshuuraha waddo-marista magaalada sannadka oo dhan.

3. Wasaaradda Maaliyadda ma xaqiijin karto saxnaanta bayaanka maadaama hantidhowrayaasha ay u tageen shirkadda Smart Technologies maadaama aysan jirin rasiid la taaban karo oo laga helay shirkadda Smart Technologies si la isugu raaco qaddarka la sheegay, waxyaabihii la oggaadeyna lalama wadaagin Wasaaradda Maaliyadda si loo hubiyo in la sameeyay indha-indheyn sax ah.
4. Ma jiro Khalad la taaban karo sida ay sheegeen hantidhowrayaasha. Fadlan nala wadaag lifaaqa indha-indheynta.
5. Wasaaradda Maaliyadda ma xaqiijin karto waxa ay oggaadeen hantidhowrayaasha maadaama MoF aysan ku lug laheyn dib-u-eegista miiska baarista. Wax rasiidka muuqda oo ah caddeynta shaqada la qabtey la lama wadaagin WoF. Sidaa daraadeed kala duwanaanshaha uu oggaadey dhinaca saddexaad laga lama hadlin hawlwadeennada WoF iyo maamulkaba.
6. Tababar ayaa loo qaban doonnaa kooxda RCC si loo sii wanaajiyo nidaamka buuxinta iyo maareynta dokumentiga.
7. Qiimaha sarifka ee la adeegsadey waa qiimaha sarifka suuqa waana mid sannadka oo dhan isbedbedala, RCC waxay xaqiijin doontaa diiwaangelinta qiimaha loo adeegsadey tixraaca mustaqbalka. Sidaa daraadeed Jubbaland ma lahan banki ay dowladdu leedahay ama laan ka mid ah bankiga dhexe ee Soomaaliya kaas oo go'aamiya qiimaha sarifka lacagaha,

MoF ayaa xaqiijin doonna hirgelinta soo-jeedinta, haseyeeshee waxyaabaha ay oggaadeen hantidhowrayaasha iyo dib-u-eegista wakaaladda waa in si sax ah looga hadlaa inta lagu guda jiro shaqada gudaha lagu tago si loo hubiyo xogta saxda ah in la diiwaangeliyey. Kooxda maamulka kuma kalsoona nidaamka isla-xisaabtanka ee dhinaca saddexaad sidaas daraadeed xogta la bixiyey looguma tiirsanaan karo ujeeddadaasi.

Faallooyinka Dheeraadka ah ee Hantidhowrayaasha

Waxaannu ku adkeysaneynaa waxyaabihii la oggaadey in ay jiraan.

- Fawjarrada Dakhliga kala duwan ee loo bixiyay sida dokumentiga taageerada ee canshuurta Macaashka, canshuurta Guryaha iyo canshuurta Dakhliga kama muuqan Lambarka Aqoonsiga Canshuur-bixiyaha (TIN). Maamulka waa in uu bixiyaa dokumenti taageero oo lagu taageerayo caddeynta lambarka TIN ee ku hoos jira GL.
- Warqadaha waddooyinka ma muujin muddada/ansaxnimada iyo lambarka diiwaangelinta gawaarida. Maamulka waa in uu bixiyaa caddeyn taageeraysa tani oo ay ku jiraan shaqeynta App-ka.
- Maamulka waa in uu helaa diiwaanka shirkadda Smart Technologies waana in ay sameeyaan xaqiijintooda si loo xaqiijiyo kala duwanaanshaha iyo ilaa xadka khaladka.
- Khalad la taaban karo ayaa ku jira canshuurta Guryaha. Waxaan iminka ku darney sumadda GL shaxda si maamulka uu u xaqiijiyo khaladka ku jira iyo si uu u saxo.
- MoF waa in ay sameysaa is-waafajin iyada u gaar ah si ay u xaqiijios kala-duwanaanshaha u dhaxeeya warbixinnada JLA iyo warbixinnada gudaha ee iyagga u gaarka ah.

2.2 Daldaloollo ama nusqaamo waaweyn oo ka jira dakhliga la ururiyay intii lagu guda jiray muddada dib-u-eegista

U-fiirsashada

Xaaladda

Dib-u-eegis lafoguris ah oo dakhliga lagu sameeyay, ayaa waxaan oggaaney isbedbeddel iyo daldaloollo in uu ka jira xisaabaha dakhliga ee hoose:

a) Canshuuraha ka soo xarooda iibka alaabada iyo adeegyada, waxaan oggaaney in isbeddelo mug leh uu ka jira canshuuraha la ururiyey bilaha kala duwan halka bilaha qaarkood sida bisha Maajo (US$ 222,393), Juun (US$ 202,398), Sibtembar (US$ 131,298), Oktobar (US($ 196,046) iyo Nofember (US $ 114,605) la soo sheegay canshuur ururin hooseysa taas oo 50% ka hooseysay celceliska sannadka oo dhan. Bisha sida Sibtembar, dakhli ururinta hooseysa ayaa waxaa loo aaneynayey doorashooyinka, haseyeeshee, ma jirto sharraxaad macquul ah oo laga bixiyey hoos u dhaca iyo kor u kaca dhakhliga bilaha kale sida hoos ku xusan.



b) Waxaan oggaaney nusqaamo in uu ka jiro dakhliga loo diiwaangeliyay canshuuraha ka soo xarooda alaabada iyo adeegyada ee Wasaaradahan Jubbaland ee soo socda kuwaas oo qeyb k aha wakaaladaha canshuurta ee Dowlad-goboleedka Jubbaland halkaasi oo bilaha qaar aysan jirin wax canshuurro ah oo loo diiwaangeliyay. Daldaloollada mugga leh waxaa laga yaabaa in ay yihin metalaadda karti la'aanta Wasaaradaha ama baahida loo qabo karti dhisidda hawlwadeennada Wasaaradaha.

Magaca Wasaaradda	Jan	Feb	Mar	Abriil	Maajo	Juun	Luulyo	Agoosto	Sebt	Okt	Nof	Dis	Wadarta Guud
Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda	-	-	-	-	-	51,000	-	-	-	-	20,000	-	**71,000**
Wasaaradda Xannaanada Xoolaha	-	-	-	-	-	-	-	-	-	-	-	3,360	**3,360**
Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guryeynta	600	800	-	-	-	-	-	-	-	-	-	-	**1,400**
Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha	9,510	3,920	6,850	1,510	-	-	-	-	-	-	-	-	**21,790**
Wasaaradda Dhallinyarada & Isboortiga	-	-	200	400	-	-	-	-	-	-	-	-	**600**

Shuruudaha

Sharciga Canshuurta ee 2017 ayaa si cad u qeexaya oggolaanshaha, canshuur ururinta, khidmadaha iyo canshuur ka-qaadidda iyo jaangooyada ay tahay in la raaco marka la qiimeynayo oo la qaadayo canshuuraha iyo dakhliga kale iyo sidoo kale doorarka, xuquuqaha iyo waajibaadyada canshuur-bixiyeyaasha iyo maamulka qaadaya.

Sababta

Kor-u-kaca ama hoos-u-dhaca ku yimid dakhliga ee muddadii dib-u-eegista oo aan la sharxi karin.

Saameynta

Kor-u-kaca ama hoos-u-dhaca dakhliga ee muddada ayaa waxaa laga yaabaa in ay tilmaan u tahay dakhliga la ururiyay in aan si sax ah oo dhammeystiran loo xisaabin laguna diiwaangelin buugaagta JSS.

Soo-jeedimo

Maamulka waa in uu hubiyaa in ay xisaabaha dakhliga ku sameeyaan dib-u-eegis lafaguris ah muddo ka-dibba mar si ay u eegaan dhammeystirnaanta iyo saxnaanta dakhliga la ururiyey lana diiwaangeliyay. Halka la oggaado in isbeddello waaweyn ay jiraan, maamulka waa in uu sameeyaan hantidhowr iyo baaritaanno lagu oggaanayo sababta ay ku dhacday, hannaankanna waa in loo diiwaangeliyaa ujeeddada tixraac mustaqbalka ah.

Muhiimadda

Sare

Agaasinka Ka Mas'uulka ah

Maamulka Dakhli Ururinta (RCA)

Jawaabta uu maamulka ka bixiyay

a) Arrimaha isbeddellada keenay sida kuwan soo socda:
   I. Muddada ka hor iyo ka-dib Doorashada xubnaha baarlamaanka Jubbaland iyo doorashada madaxweynaha intii lagu guda jirey 2019 ayaa waxaa ka dhashey hoos-u-dhaca dakhliga;
   II. Xaaladda amniga intii lagu guda jirey weerarkii ay argagaxisadu ku soo qaadey Kismaayo ayaa waxaa ka dhashey hoos-u-dhac ku yimid ganacsiga iyo hawlaha wax-isdhaafsiga sidaa daraadeedna waxaa hoos u dhacey canshuur ururinta
   III. Daadad ku fatahey qeybo ka mid ah Jubbaland ayaa keenay yaraanshaha dhaqdhaqaaqa gaadiidka ka baxaya ama soo galaya dhulka Jubbaland.

b) Nusqaamaha ka jira dakhli ururinta ayaa waxaa sabab u ah canshuuraha iyo khidmada la ururiyo muddo ka-dibba mar intii lagu guda jirey sannadka, falanqeynta kor ku xusan waxay la xiriirtaa ururinta khidmada Dakhliga ee ay sameeyeen Wasaaradaha kor ku xusan. Khidmada shatiyada kalluumeysiga, ujuurrada xoolaha, ujuurrooyinka diiwaangelinta NGO-yada, ujuurrooyinka diiwaangelinta shirkadaha, ujuurrada diiwaangelinta nootaayaha, ujuurrada shatiga darawaalka iyo diiwaangelinta sannadlaha ah ee ganacsiyada.

Dhammaan dakhligan waxaa sannadkiiba ama muddo ka-dibba la ururiyaa mar sidaa daraadeed ma fileyno falanqeynta/isbeddelo ku yimaada ururinta bil kasta.

2.3 Farqi u dhaxeeya dakhliga lagu diiwaangeliyay nidaamyada RMS iyo FMIS

U-fiirsashada

Xaaladda

Waxaan oggaaney in uu jiro farqi u dhaxeeya dakhliga lagu diiwaangeliyay Nidaamka Maareynta Dakhliga (RMS) iyo Nidaamka Macluumaadka Maareynta Maaliyadda (FMIS) oo dhan US$7,386,051 taas oo muujinaysa in ay khaladaad iyo ilduuf ay ka jiraan diiwaangelinta iyo dhammeystirnaanka dakhliga la diiwaangeliyay. Tani ayaa loo aaneynayaa is-dhexgalin iyo isku-xirid la'aanta u dhaxeysa labada ahnnaan si loo suurageliyo bixinta warbixinno la is-waafajiyay marka loo baahdo sida hoos ku xusan:

Sharraxaad	Dakhliga lagu diiwaangeliyay FMIS (US$)	Dakhliga lagu diiwaangeliyay RMS (US$)	Wadarta guud ee kala-duwanaanshaha (US$)
Canshuurta Guryaha	311,886	62,427	249,459
Shatiga	25	-	25
Liiska Mushaaraadka/ Canshuurta Dakhliga Shakhsiga	185,145	187,921	(2,776)
Canshuurta Macaashka	600,358	751,224	(150,866)
Canshuur Kale	-	7,481,894	(7,481,894)
Wadarta Guud	**1,097,414**	**8,483,465**	**(7,386,051)**

Shuruudaha

Si loo gaaro joogteyn bilow ilaa dhammaad ah, midaynta nidaamyada RMS iyo FMIS ayaa loo baahan yahay si loo taageero hannaanka dakhli ururinta

Sababta

Mideyn la'aan iyo iswaafajin la'aan u dhaxeysa Nidaamyada FMIS iyo RMS.

Saameynta

Labada nidaam oo aan midaysnayn ayaa keenaysa awoodid la'aanta in la xaqiijiyo saxnaanta iyo dhammeystirnaanta dakhliga la ururiyay lana diiwaangeliyay.

Soo-jeedimo

Waxaan ku talinaynaa helidda meel ay isla-markiiba ku kulmaan nidaamyada RMS iyo FMIS si loogu suurageliyo Wasaaradda Maaliyadda in ay hubiso dhammeystirnaanta iyo saxnaanta dakhliga la ururiyay iyo in isla-markiiba la diiwaangeliyay.

Muhiimadda

Sare

Agaasinka Ka Mas'uulka ah
Maamulka Dakhli Ururinta (RCA)
Jawaabta uu maamulka ka bixiyay
Xogta lagu muujiyey xagga kore ee FMIS iyo RMS ma waafaqsanna xogta FMIS iyo RMS ee sannadka 2019. Tusaale; sannadkii 2019 Dakhliga kale ee ku jira FMIS ayaa muuqata in uu yahay $ 146,697 iyadoo tan ay hantidhowrayaasha sheegeenna ay tahay Eber $ 0. Sidaa daraadeed falanqeynta u dhaxeysa tirooyinka labada nidaam ayaa ka soo horjeeda waxa ay hantidhowrayaashu arkeen. Sidoo kale tirooyinka shaxda kore ku xusan eee guud ahaan dhammaan ujuurrooyinka iyo canshuurta ee FMIS iyo RMS ma ahan kuwa sax ah. Sidaa daraadeed hantidhowrayaasha waxay u baahan yihiin in ay caddeeyaan sida ay ku heleen tirooyinka kor ku xusan.
Faallooyinka Dheeraadka ah ee Hantidhowrayaasha
Waxaan aqoonsaney kala duwanaanshaha u dhaxeeya FMIS iyo RMS waxan ee aan oggaaneyna waxaa lagu saleeyay falanqeynta isbedbeddelaysa ee warbixinnada nidaamka ee la soosaarey. Waxyaabaha la oggaadey iyo soo-jeedintaba waa sidoodii/waa la joogteeyay. MoF waxaa loo baahan yahay in ay is-waafajiyaan kala-duwanaanshaha.

2.4 Liidashooyinka ka jira Dekedda Kismaayo iyo Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ah ee Kismaayo

U-fiirsashada

Xaaladda

Waxaan oggaaney nusqaamahan kantaroolka soo socda in ay ka jiraan:

a) Dekedda Kismaayo:

i. Dakhliga ay MoF diiwaangelisay ee ka yimid Kismaayo oo dhan US$2,788,600 laguma taageerin dokumentiyada taageeraya ee ku habboon oo ay ku jiraan warbixinta isu-socodka gaadiidka dekedda, tirada doomaha/maraakiibta ku soo xiratey dekedda, inta tan ee yimid ama ka baxay, tirada doomaha yaryar ee imaanaya taas oo sabab u ah liidashada kantaroollada gudaha ee Dekedda Kismaayo. Waxaan kaloo oggaaney kharashka ku baxa hawlgallada kastamka iyo hawlwadeennada Dekedda in laga jarey dakhliga la ururiyey. Haseyeeshee, Maamulka Dekedda Kismaayo ma ahaynin rasiidyada fawjarrada iyo buugga kaashka si loogu taageero kharashka laga jarey. Waxaa intaa dheer, in aan oggaaney in kharashka shaqaalaha ee laga jarey isha dakhliga ee uu ururiyey Maamulka in uu la xiriiro 11 shaqaale oo ka shaqeynaya Waaxda Furdada iyo kharashaadka maamulka xafiiska.

ii. Falanqeyn lagu sameeyay dakhliga ay ururisey Dekedda Kismaayo, waxaan oggaaney isbeddel mug leh in uu ku ymid dakhliga lagu diiwaangeliyay hoosta xariiqa GL ee Maamulka Degkadda, halkaasi oo bilaha Febraayo, Juun, **Sibtembar, Oktobar iyo Nofember 2019, aysan jirin dakhli loo diiwaangeliyay bilaha sida hoos ku xusan:



**Dakhliga eberka ah ee bisha Sibtembar ayaa waxaa loo aaneynayaa doorashooyinka. Haseyeeshee, ma jiro sharraxaad macquul ah oo ay ka bixisay Waaxda Kastamka Dekedda dakhliga eberka ah ee bilaha Febraayo, Juun, Oktobar iyo Nofembar.

iii. Booqashadii ay gudaha ku tageen Kooxda Baarista, ayaa waxaa lagu oggaadey in aaney kaamirooyin qarsoon ku xirneyn hareeraha Dekedda Kismaayo taas oo keeni karta haliso amni waaweyn in ay ka dhacaan Dekedda Kismaayo.

iv. Sidoo kale waxaa meesha ka maqan kala-saaridda waajibaadyada, doorarka iyo mas'uuliyadaha oo cad ee 11 hawlwadeenno ee ka shaqeeya Dekedda iyadoo ay yaallaan oo keliya 4 kombiyuutarro oo ay adeegsadaan hawlwadeennada oo dhan.

v. Diiwaan-haynta Maamulka Dekedda oo aan dad ku filneyn. Intii lagu guda jirey booqashada gudaha lagu tagey, Kooxda Baarista waxay codsatey in la xaqiijiyo istaatistikada isu-socodka gaadiidka Dekedda sida tirada maraakiibta dekedda ku soo xiratey sannadkii 2019, tirada doomaha yaryar, dhacdooyinka muddada dib loo eegaya, diiwaannada kharashaadka hawlgallada ee laga jarey dakhliga bilaha ah. Si kastaba ha ahaatee, tani looma bixin dib-u-eegis maadaama Dekedda aysan hayn diiwaannada la sheegay.

b) Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ah ee Kismaayo

Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ah ee Kismaayo ayaa adeegyada dakhli ururinta u wakiishey shirkadda Safari Aviation, oo ah shirkad gaar loo leeyahay. Nusqaamahan soo socda ayaa la oggaadey in ay ka jiraan kastamyada garoonka diyaaraha iyo hannaanka diiwaangelinta iyo ururinta dakhliga canshuuraha.

i. Waxaan oggaaney kala duwanaansho guud ahaan dhan US$ 128,282: oo u dhaxeeya dakhliga ay Wasaaradda Maaliyadda u diiwaangelisay Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ah ee Kismaayo iyo dakhliga ay Dowladda Jubbaland u soo wareejisay Safari Aviation sida ku cad diiwaannadooda gudaha ee muujinaya khaladaadka ka jira dakhliga:

Sharraxaad	Lagu diiwaangeliyay buugaagta MoF (US$)	Shirkadda Safari Aviation ayaa ku wareejisay JSS (US$)	Wadarta guud ee kala-duwanaanshaha (US$)
Maamulka Garoonka Diyaaradaha	1,104,663	976,381	128,282

ii. Waxaan kaloo oggaaney in shirkadda Safari Aviation aysan joogteyn buugga kaashka oo sheegaya qaddarka kharashaadka laga jarey dakhliga guud ee ay ka ururiyeen Garoonka Diyaaradaha.

iii. Waxaa intaa dheer, in aan oggaaney in shirkadda Safari Aviation oo keliya qandaraaska loo soo xuly iyo in uusan jirin sahanka suuqa lagu tartamo oo loo sameeyay shirkadda markii qandaraaska loo jadiidineyay shirkadda bishii Abriil 2018 si loo hubiyo in Dowlad-goboleedka Jubbaland ay hesho qiimaha lacagteeda iyadoo qandaraas mar kale la gashey shirkadda.

Shuruudaha

Qeybta 9aad ee Sharciga Canshuurta wuxuu dhigayaa in rasiid rasmi ah ay bixiyaan saraakiisha canshuurta oo ku qoran taariikhda lacag-bixinta, magaca iyo lambarka sarkaalka qaadaya lacagaha, goobta lacagta lagu bixiyay, magaca iyo lambarka aqoonsiga canshuur-bixiyaha, qaddarka lacagta la bixiyay iyo mas'uuliyadda marka loo eego lacag-bixinta la bixinayo. Diiwaannada dhammaan canshuuraha la qaaday waa in loo hayaa qaabka ku cad habraacyada ay dhigayaan xeernidaamiyayaasha ay soosaartey Wasaaradda Maaliyadda. Rasiidka lacag-bixinta waa in ay baaritaan ku sameyso Wasaaradda Maaliyadda si loo hubiyo in aysan jirn wax-isdabamarin iyo khiyaanno iyo in la saxo haddii ay jirto lacag-bixin aan habboonayn.

Sababta

La'aanta dokumentiyada u habboon ee Maamulada kala duwan, isbeddellada mugga leh in dakhliga la diiwaangeliyay muddada dib loo eegayo, la'aanta nidaam amni oo habboon oo ay ku jirto kaamirada qarsoon ee loo yaqaanno CCTV.

Saameynta

Dakhliga ka yimid Maamulka Garoonka Diyaaradaha iyo Dekedda waxaa laga yaabaa in uu ku jiro khalad la taaban karo, khayaamo ama ilduuf mid uu ku yimaadaba.

Soo-jeedimo

Waxaan soo-jeedinaynaa:

- Warbixinnada dhammeystiran ee bilaha ah oo ay ku jiraan inta tan iyo tirada maraakiibta ku soo xiratey dekedda waa in loo diraa MoF si ay u xaqiijiso.
- In la sameeyo hab lagula soconaya waxqabadka kaas oo u shaacinaya warbixinnada socodka gaadiidka iyo dakhliga kale si bile ah.
- Baarista dokumentiyada taageerada ee MoF si loo hubiyo in aysan jirin wax-isdabamarin iyo khiyaamo.
- Tababar ama karti dhisid loogu talagalay kooxda kastamka.
- Rakibaadda iyo maareynta kaamirada qarsoon (CCTV) oo laga hirgelinayo agagaarka dekedda.
- Keenista qalab dad ku filan, sida kombiyuutarro iyo qalab xafiiseed u dhigma tirada hawlwadeennada.
- Garoonka diyaaradaha iyo Dekedda in ay sameeyaan bayaanka qabashada iyo kharashaadka bilaha
- Waxqabadyada dekedda in laga dhigo kuwa si otomaatik ah u shaqeeysa sida mugga ganacsiga, socodka markaaiibkta marka la eego tirada maraakiibta, doomaha yaryar iyo tanka shixnadda si loo sii wanaajiyo dakhli ururin waafaqsan daabacidda canshuurta kastamka.

Muhiimadda
Sare
Agaasinka Ka Mas'uulka ah
Maamulka Dakhli Ururinta (RCA)
Jawaabta uu maamulka ka bixiyay

A. **Dekedda Kismaayo:**

I. Waaxda kastamka ma lahan nidaamka kastamka oo otomaatik ah oo suuragelinaya diiwaangelinta istaatistika ganacsiga caalamiga ah. Wasaaradda maaliyadda ayaa sidoo kale xustey u fiirsasho la mid ah waxaanna hadda canshuur-bixiyeyaashu bixinayaan canshuurta laga rabo iyadoo si toos ah ugu shubaya xisaabta TSA ee ka furan Bankiga Salaam ee ku yaalla dekedda.

II. Intii lagu guda jirey bisha Febraayo waxaa jiray dabeylaha mansuun oo xannibey ganacsiga caalamiga ah iyo dhaqdhaqaaqa maraakiibta; bilaha Sibtembar iyo Oktobar waxay ahaayeen xilli doorasho waxayna Dowladda Federaalka ee Soomaaliya ku soo rogtey xayiraad socdaal dowlad-goboleedka taas oo carqaladeysan shaqooyinkii socdey sidaa daraadeedna waxaa hoos u dhac ku yimid dakhli ururinta.

III. Waxaannu aqbaley waxyaabaha la oggaadey Wasaaradda Maaliyaddanna waxay kala shaqeyn doontaa maamulka dekedda sidii loo rakabi lahaa kaamirooyinka qarsoon (CCTV). Marka la eego amniga ciidamada AMISOM iyo ciidanka qaranka Soomaaliyeed(SNA) ayaa waxay dhex deggan yihiin dekedda gudaheeda.

IV. Waxaa si cad loo kala-saarey waajibaadyada dhammaan saraakiisha kastamka ee jooga dekedda, haseyeeshee waxyaabaha ay arkeen hantidhowrayaasha ayaa waxay ka soo horjeedaan diiwaanka la heli karo.

V. Waxyaabaha la oggaadey si wanaagsan ayaa loo qorey waxaanna hadda la hirgelintaa nidaamka otomaatiga ah ee kastamka iyadoo la joogteynayo diiwaan-hayn habboon.

B. **Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ah ee Kismaayo**

I. MoF waxay diiwaangelisay dhammaan dakhliga kastamka ee ka yimaada garoonka diyaaradaha; iyadoo xisaabta, buugaagta, diiwaannada shirkadda Safari Aviation ay keliya xusheen ilaha dakhliga (Ujuurrooyinka rakaabka, ujuurrada gacan ku qabashada, ujuurrooyinka khidmada adeegga). Dowladdu waxaa ay qaataa oo ay diiwaangelisaa (ujuurrada soo-degidda Diyaaradaha, ujuurrada duulista, ujuurrada meelaha baabuurta la dhigto, ujuurooyinka rakaabka caalamiga, ujuurrada dal-ku-galka).

II. Shirkadda Safari aviation ma lahan nidaamka xisaabaadka oo habboon, beddelkiisa waxay xisaabaadka u adeegsadaan excel spreedsheet.

III. U-fiirsashada ayaa si wanaagsan loo xusey laakiin iyadoo la tixgelinayo xaaladda amniga ayaa shirkadda Safari aviation waxay noqotey meesha keliya ee la heli karo.

Faallooyinka Dheeraadka ah ee Hantidhowraha
Sida ku cad su'aalo-weyddiinteenna, JSS ayaa xaqiijisay in $130,000 lagu qaadey Dekedda bishii Nofembar 2019, haseyeeshee diiwaanka guud ee warbixinnada FMIS ayaa sheegaya eber. Waxyaabaha la oggaadey iyo soo-jeedinta u-fiirsashadan ayaa sidoodii/waa la joogteeyay.

2.5 Kala-duwanaansho u dhaxeeya Deeqaha la diiwaangeliyay iyo Xaqiijinta laga helay deeq-bixiyeyaasha

U-fiirsashada

Xaaladda

Marka dib loo eego deeqaha ka yimid deeq-bixiyeyaasha, waxaan oggaanay kala duwanaansho u dhaxeeya qaddarka lagu diiwaangeliyay FMIS iyo xaqiijinta laga helay deeq-bixiyaasha oo ah sida hoos ku xusan:

Deeq-bixiye	Qaddarka La Diiwaangeliyay (US$)	Qaddarka La Xaqiijiyay (US$)	Kala-duwanaanshaha ($)
ADRA	25,190	46,690	**21,200**
**UNHCR	591,560	577,593	**13,967**
Wadarta guud ee farqiga			**35,466**

**Kala duwanaanshaha hoos imaanaya UNHCR ayaa la xiriira lacag-celin loo sameeay deeq-bixiyaha laakiinse aan lagu diiwaangelinta Diiwaanka Guud ee MoF.

Intaa waxaa dheer, in aan oggaaney liidashooyinkan soo socda in ay ka jiraan xisaabaha dakhliga ka yimid deeqaha Wasaaradda Maaliyadda:

i. Ma jirin is-waafajin joogto ah oo ay Wasaaradda Maaliyadda ku sameyso maaliyadaha deeq-bixiyeyaasha una dhaxeeya FMIS iyo rasiidyada dhabta ah sida ku cab bayaamada bankiga.

ii. Nidaamka galaynta oo aan dad ku filnayn iyo la'aanta cid qaabilsan maareynat heshiiska.

iii. Kooxda hantidhowrka ma helin dokumentiyada qandaraaska ee hoose si ay dib-u-eegis ugu sameeyaan:
- Norwegian Refugee Council (US$ 13,440)
- Save the Children (US$ 11,497)
- UNICEF (US$ 51,987)
- Lutheran World Federation (US$ 2,513)
- Mercy Corps (US$ 1,330)
- Somalia Stability Fund (US$ 74,110)

Shuruudaha

Deeqaha ka yimid deeq-bixiyeyaasha waa in ay u dhigmaan qaddarka ay Wasaaradda Maaliyadda ku diiwaangelisay FMIS.

Sababta

Is-waafajin la'aanta miisaaniyadaha oo u dhaxeeya qaddarka laga helay deeq-bixiyeyaasha sida ku cad bayaanka bankiga iyo qaddarka ku cad diiwaannada FMIS. Intaa waxaa dheer, la'aanta maareynta habboon ee qandaraaska iyo maareynta qandaraaska oo aan dad ku filnayn.

Saameynta

Waxaa jirta halista in dakhliga deeqda si khalad ah loo sheego iyo u hoggaansamid la'aanta shuruudaha qandaraaska ee ku cad heshiisyada deeq-bixiyeyaasha.

Soo-jeedimo

Waxaan soo-jeedinaynaa:

- Dhammaan deeqaha deeq-bixiyeyaasha in la isugu keenno gudaha qayb kamid ah xafiiska EAFS oo la socota qandaraasyada si ay u eegto dhammaanshaha muddada iyo u hoggaansamidda.
- Sii wanaajinta nidaamka galaynta si loo fududeeyo dib-u-helidda iyo kaydinta heshiisyada qandaraaska iyo dokumentiyada kale ee taageerada.
- Is-waafajinta muddo ka-dibba mar la sameeyo ee u dhaxeysa FMIS iyo rasiidyada dhabta ah ee waafaqsan bayaanka bankiga.

Muhiimadda

Sare

Agaasinka Ka Mas'uulka ah

Agaasinka Miisaaniyadda iyo EAFS

Jawaabta uu maamulka ka bixiyay

- Kala duwanaanshaha UNHCR ayaa ahayd lacag xisaab xir ah oo ka hartey sannadkii 2018 taas oo loo celiyay deeq-bixiyaha bilowgii 2019. Sidaa daraadeed kooxda dakhliga MoF waxay awoodi weysay in dakhliga ay laba jeer ku diiwaangeliso nidaamka.
- ADRA, Wasaaradda maaliyadda ayaa ku sheegtey bayaanka maaliyadeed dhammaan maaliyadaha ay deeq-bixiyeyaasha ka heshay nidaamka, haseyeeshee intii lagu guda jirey sannadkii dhammaadey 31-ka Disembar 2019, JSS ayaa dirtey xaqiijinta, haseyeeshee wax jawaab ah lagama helin. Sidaa daraadeed, MoF ayaa jeclaan lahayd in ay aragto warqadda xaqiijinta ay hantidhowrayaasha ka heleen ka-dibna waxaan ka bixin karnaa jawaab ku saleysan macluumaadka.
  I. Is-waafajinta maaliyadda deeq-bixiyeyaasha ayaa waxaa loo sameeyaa si bile ah sidoo kale warbixinta deeq-bixiyeyaasha oo saddexdii biloodba mar la soosaaro ayaa lagu daabacaa mareegtada Wasaaradda maaliyadda iyadoo ujeeddadu tahay isla-xisaabtan iyo daahfurnaan.
  II. Waaxda EAFS waxay mas'uul ka tahay diiwaan-haynta iyo nidaamka fayl-garenta ee dhammaan mashaariicda ay maalgeliyeen deeq-bixiyeyaasha.
  III. Dhammaan qandaraaska/heshiiska deeq-bixiyeyaasha ayaa la heli karaa, haseyeeshee hantidhowrayaasha uma suuragelin in ay helaan.

Faallooyinka Dheeraadka ah ee Hantidhowrayashaha

Kala duwanaanshaha xaqiijinta ARDA oo dhan $46,690 ayaa loo xaqiijiyey sida kharashka dhinaca 3aad, tani waxay ahayd in la isku waafajiyo FMIS. Waxaannu ku adkeysaneynaa waxyaabaha la oggaadey iyo soo-jeedinta la xiriirta.

JSS ayaa xaqiijisey in kala duwanaanshaha xaqiijinta UNHCR uu la xiriirey 2018, si kastaba ha ahaateen warqadeenna xaqiijinta ee loo direy UNHCR ayaa muujisey bixinta maaliyadaha laga bilaabo 1-da Jannaayo 2019 ilaa 31-ka Disembar 2019, waxaanna si la mid ah xaqiijiyey macmiilka. Waxaannu ku adkeysaneynaa waxyaabaha la oggaadey iyo soo-jeedinta la xiriirta.

3 Kharashaadka Aan Mushaaraadka Ahayn

3.1 La'aanta dokumentiyo ku habboon oo taageeraya

U-fiirsashada

Tijaabinta lafagurista ah ee kharashaadka:

	Qaddarka- $	
Wadarta guud ee kharashaadka aan mushaaraadka ahayn	3,588,984	
Wadarta guud ee kharashaadka aan la taageerin (Lifaaqa i ilaa Lifaaqa iv)	1,185,290	
% ee kharashka aan la taageerin	33%	

Xaaladda

Waxaannu tijaabiney 60% ee kharashaadka aan mushaaraadka ahayn anagga oo ku waajibiney xulashada nidaamka Muunad-qaadista Qeybta Maaliyadda (MUS). Natiijadu waxay ahayd in 39% kharashaadka aan si buuxda loo taageerin ama qayb ahaan la taageeray sida lagu faahfaahiyay shaxda hoose:

Qaybaha liidashooyinka	Qaddarka: $
Kharashaadka- qayb ahaan la taageeray- Lifaaqa 1	976,481
Kharashaadka aan la taageerin- Lifaaqa 2aad	43,050
Kharashaadka xallinta khilaafaadka ee aan la taageerin- Lifaaqa 3	104,00
Kharashaadka kutalagalka ah ee aan la taageerin- Lifaaqa 4	61,759
Wadarta Guud	**1,185,290**

i. Lifaaqa 1aad Kharashaadka wax-soo-iibsiga iyo kaashka: qayb ahaan la taageeray- waxaa jira xaalado aanba jirin dokumentiyo caddeymo ah oo lagu muujinayo alaabooyinka la keenay ama adeegyada la qabtey sida warqadda guddoonka alaabta, GRN, xaashida diiwaanka baabuurta, xaashiyada lagu qoro saacadaha la shaqeeyay iyo shahaaddada shaqo dhammeynta.

ii. Lifaaqa 2aad: Toddobo waxyaabood oo dhan $43,050 oo aan gebi ahaanta lagu taageerin qaansheegyo, fawjarro la ansaxiyey.

iii. Lifaaqa 3aad: Maaliyadaha xallinta khilaafaad ee ay Wasaaradda Maaliyadda siisay shakhsiyaadka ay khuseyso oo dhan $104,000 laguma taageerin codsiyo ka yimid hay'adaha ama waaxaha adeegsaday, laakiinse waxaa lagu taageeray warqad ka soo baxday gudaha Wasaaradda Maaliyadda oo ka timid Agaasimaha Guud ee wasaaradda. Marka ay jiraan maareynta maaliyadda maamulka/dadweynaha iyo kantaroollada maaliyadaha oo aad looga taxaddaro, Wasaaradda Maaliyadda iyada iskuma soo qori karto warqad si ay ugu fasaxdo maaliyad kaash ah shakhsiyaadka ku lugta leh xallinta khilaafaadka. Lacag-bixinnada kaashka ah ee xallinta khilaafaadka lama socdaan shuruudaha tixraaca miisaaniyadda iyo hawsha sida kharashaadka qodobeysan ee la ansaxiyay iyo ansaxinta saxiixaha waaxda adeegsanaysa

iv. Lifaaqa 4aad: Kharash ku-talagal ah oo dhan $61,759 oo ay wasaaradda maaliyadda siisay shakhsiyaadka ay khuseyso ayaan taageerin codsi ka yimid waaxda adeegsanaysa, taa beddelkeeda waxaa lagu taageeray warqad gudaha ah oo ka timid Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda. Waxaa jirta la'aanta dokumentiyada shuruudaha tixraaca

miisaaniyadda iyo hawsha sida kharashaadka qodobeysan ee la ansaxiyay iyo ansaxinta saxiixaha waaxda ama hay'adda adeegsanaysa.

Shuruudaha

Qaybta 30aad, qayb-hoosaadda 7 (30.7) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha ee 2017 wuxuu u baahan yahay ilaalinta iyo haynta dhammaan dokumentiyada la xiriira wax-is-dhaafsiyada maaliyadda maamulka/dadweynaha in loo hayo sida iyo waqtiga ay dhigayaan xeer-nidaamiyeyaasha xisaabaadka ee hoos imanaya Xeerkan. Qaybta 4.1.2.10 ee xeer-nidaamiyaha miisaaniyad fulinta ee la soosaarey 1da jannaayo 2018 waxay u baahan tahay in dhammaan dokumentiyada la xiriira wax-is-dhaafsiyada iibsiga alaabada iyo adeegyada in loo geeyo sarkaalka xaqiijinaya ka hor inta aan lacagaha la bixin.

Sababta

La'aanta xaqiijinta kharashka oo dad ku filan ka hor hannaanka lacag-bixinta. Sidoo kale, hay'adaha qaarkood ayaa codsiyadooda soo-jeediyaan iyagoo telefoon soo diraya ama waxay codsigooda u soo dhiibayaan fariin-sidayaal goobta imaanaya.

Saameynta

Liidashooyinka ka jira mid ka mid ah marxaladaha meertada kantaroolka kharashaadka ayaa wax u dhimi kara daacadnimada iyo ku kalsoonaanta guud ahaan nidaamka waxaanna la lumin karaa kheyraadyo qiimo leh. Kharadhaadka aan lahayn dokumentiyo taageeraya;

Baarlamaanka ama deeq-bixiyeyaasha waxay u arki karaan in aysan ku habbooneyn.

Soo-jeedimo

Si kor loogu qaado u hoggaansamidda xeerka PFM iyo xeer-nidaamiyeyaasha waaxda khasnadda, dokumentiyo taageeraya oo ku habboon waa in laga hayaa dhammaan lacag-bixinnada.

Waxaa intaa dheer, kharashaadka Xallinta Khilaafaadka waa in ay leeyihiin dokumentiyo taageerada oo ku filan sida Shuruudaha Tixraaca (TOR) hawsha, dokumentiyada raadraaca.

Muhiimadda

Sare

Agaasinka Ka Mas'uulka ah

Khasnadda - Agaasinka

Jawaabta uu maamulka ka bixiyay

Wadarta guud ee muunadda la siiyey Wasaaradda Maaliyadda waxay ahayd USD 947,410 oo loogu talagalay kharashaadka aan mushaaraadka ah oo ma ahan qaddarka USD 3,588,984 ee ay sheegeen hantidhowrayaasha. Sidaa daraadeed 39% ee kharashka aan la taageerin ee la sheegay run ma ahan.

I. U-fiirsashada waa la qaatey waxaanna dokumentiyada taageerada oo dhan loo heli doonnaa xaqiijinta dibedda.

II. Email-ka ay bixiyeen hantidhowraasha marka ay taariikhdu ahay 5ta Disembar ma jira fawjar wax ka dhiman oo ka mid ah muunadda la xushey oo loo sheegay Wasaaradda Maaliyadda iyo email-ka la is-dhaafsadeyna wuxuu sheegay.

III. Hantidhowrayashaha wuxa ay adeegsadeen diiwaanka la bixiyey beddelkaa ay adeegsan lahaayeen muunadda ay xusheen. Marka si kale loo dhigo wadarta guud ee diiwaanka waxay ahayd USD 300,720 qaddarka muunadda la xusheyna wuxuu ahaa USD 104,000. Tani waxay

keentay tirooyin iska soo horjeedo marka la eego muunadda la xushey iyo diiwaanka hore ee la bixiyey.

IV. Waa xaalad la mid ah midda kor ku xusan.

Faallooyinka Dheeraadka ah ee Hantidhowraha

Qaddarka guud ahaan dhan US$ 3,588,984 waa wadarta guud ee kharashaadka aan mushaaraadka ahayn (kharasha oo laga jarey qaddarka liiska mushaaraadka) ee ma ahan qaddarka muunadda ah, tani waxaa loogu talagalay ujeeddooyinka is-waafajinta si loo muujiyo sida kharashaadka loogu kala qeybiyay lafogurista.

Waddarta guud ee qaddarka muunadda la baarey waxay ahayd US$ 1,185,290 sida ku cad Lifaaqyada 1 – 4.

Kharashaadka xallinta khilafaadka, halkaasi oo laga soo qaadey muunadaha xariiqa GL ama dabaqadda macaamulaadka. Waxaa jira dokumentiyada taageero aan dad ku filneyn sida keliya warqad ka soo baxdey Wasiirka iyadoo wasaaradaha adeegsanaya aysan soo gudbin miisaaniyadda iyo tan ku xigta ee Mof, marka qaddarka oo dhan waa mid su'aal laga keenay maadaama qaddarka muunadda uu metelayo qadarrada oo dhan. Waafaqsan waxyaabaha aad soo gudbisey ee kor ku xusan iyo qaddarka su'aasha laga keenayna waxaa loo aqoonsadey in uu yahay $104,000.

3.2 Liidashooyinka ka jira wax-soo-iibsiga

U-fiirsashada

Xaaladda

a. La'aanta qandaraas lagu tartamo.

Waxaan oggaaney in uusan ka jirin hannaanka wax-soo-iibsiga lagu tartamo ee shuruudaha hore ee laga rabo iyo ka-qaybgalka kuwa wax laga iibsado/adeeg bixiyeyaasha.

b. Ku takrifalka xeer-nidaamiyaha ka helidda hal meel oo keliya 4.25.4 ee buugga wax-soo-iibsiga.

Waxaan oggaaney xaalado aan jirin sababo loogu baahanayo wax-soo-iibisga halka meel laga helo sida ku cad qeybta 4.25.4 ee Buugga Wax-soo-iibsiga waxaanna ku baxay kharashaad dhan US$ 131,220.

Shuruudaha

Qeybta 4.8.1 ee buugga habraacyada wax-soo-iibsiga ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ayaa lagu tilmaamay in la siiyo dhammaan tartamayaasha la filayo ee xaqa u leh wargelin ku filan waqti ku habboon shuruudaha JSS iyo fursad loo siman yahay tartanka qandaraaska alaabta, shaqooyinka, iyo adeegyada aan la talinta ahayn ee loo baahan yahay. Qaybta 4.2.3 ayaa sheegaysa tartanka furan waa aasaaska wax-soo-iibsiga dowladda ee hufan. Xaaladaha badankooda sidaas darteed, JSS waxay u baahan tahay halka ay suurtagal tahay alaabada, shaqooyinka iyo adeegyada aan la-talinta ahayn in la helo iyada oo loo marayo hannaan qiime sheegid lagu tartamo (“Qandaraas Lagu Tartamo”) oo u furan qandaraaslayaasha iyo sharikadaha xaqa u leh.

Qaybta 4.25.4 ayaa sheegaysa ka-helidda hal meel oo keliya waa qandaraas-bixin aan lahayn tartan waxayna noqon kartaa hab habboon iyada oo la eegayo xaalado gaar ah. Sidaa daraadeed, ka-heldda hal meel waa in ay noqotaa xaalado gaar ah intii caadi laga dhigi lahaa.

Sababta

U hoggaansamid la'aanta sharciga ama isticmaalka aan ula-kaca ahayn ee halka shuruud ee ku jirta xeer-nidaamiyaha wax-soo-iibsiga.

Saameynta

luminta qiimaha lacagta iyo qiimaha lagu tartamo ee alaabada iyo adeegyada.

Soo-jeedimo

1. In la yareeyo isticmaalka sabab u yeelidda ka helidda hal meel oo ku saleysan Qeybta 4.25.4 ee xeer-nidaamiyaha wax-soo-iibsiga.

2. Sababta keenta in hal meel laga helo waa in ay ahaataa mid yar oo keliya loo adeegsado iibsiga xaaladaha degdegga ah ee halka mar la sameeyo.

Muhiimadda

Sare

Agaasinka Ka Mas'uulka ah

Waaxaha Wax-soo-iibsiga iyo Khasnadda

Jawaabta uu maamulka ka bixiyay

a) Habraacyada wax-soo-iibsiga ayaa waxaa loo raaci doonnaa sida ku cad shuruucda iyo tilmaamaha si loo gaaro caddaalad, qiimaha lacagta iyo habka lagu tartamo marka la soo iibsanayo alaabooyin iyo adeegyo. Waaxda wax-soo-iibsiga ee MoF ayaa ansaxisey liiska shirkadaha ka soo baxey shuruudaha hore.

b) Qodobka 4.24.17 ee siyaasadda wax-soo-iibsiga ayaa dhigaya in "Tartan la'aanta waa in aan keliya la go'aamin iyada oo lagu saleynayo tirada tartamayaasha. Xataa marka keliya hal arji tartan qandaraas la soo gudbiyo, hannaanka tartanka qandaraaska waxaa loo tixgelin karaa in uu ansax yahay haddii tartanka qandaraaska si lagu qanco loo xayaysiiyo oo sicirada/qiimayaasha ay yihiin kuwo macquul ah marka loo barbardhigo qiimayaasha suuqa." Sidaa daraadeed IFQ ayaa waxaa soo gudbiyey hal tartame marka looma baahneyn in sabab loo yeelo in hal meel oo keliya laga helo.

3.3 Dokumentiyada kharashaadka oo aan ku shaabadaysnayn "LA BIXIYAY"

U-fiirsashada

Xaaladda

Ka-gaabinta in la buriyo dokumentiyada taageerada iyadoo lagu shaabbadaynayo 'LA BIXIYAY' si looga hortaggo dib ugu gudbinta dokumentiyadan deeq-bixiye kale

Shuruudaha

Tilmaanta D-ee Xeernidaamiyeyaasha Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha (2017), qeybta 4.1.2.1.3, dokumentiyada wax-is-dhaafsiga waxaa loo geynayaa Sarkaalka Xaqiijinta si uu u xaqiijiyo. Saxiixa Sarkaalka Xaqiijinta ee Amarrada Ballanqaadka Lacag-bixinta (CPO) waxaa uu ka dhigan yahay ansaxintiisa/ansaxinteeda ka-dib xaqiijinta in dokumentiyada aanan horey loo bixin. Si loo xaqiijiyo dokumentiyada lacagtooda in aanan la bixin, dhammaan taageerada laga helo qaansheegyada ilaa rasiidyada waa in lagu shaabbadeeyaa "LA BIXIYEY" si looga hortago dib u soo gudbinta ama dib-u-isticmaalka qaansheegyada. .

Sababta

Looguma tixgeliyo in ay tahay qeyb kantarool maaliyadeed muhiim ah gudaha hannaanka. Halista dokumentiyada lacag-bixinta in dib loo adeegsado looma arko in ay tahay halis suuragal ah sababta oo ah waxaa jira kantaroollo kale oo dheeraad ah.

Saameynta

Halista dib-u-gudbinta/dib-u-adeegsiga qaansheegyada iyo biilasha iyadoo lagu adeegsanayo laymanka deeq-bixiyaha ama miisaaniyadda ee kala duwan. Ka-gaabinta in lagu muujiyo dokumentiyada sida "LA BIXIYAY" ayaa kordhinaysa suuragalnimada lacag-bixinno badan oo ku saleysan isla dokumentiyada.

Soo-jeedimo

1. Dokumentiyada lacagtooda la bixiyay ka dhig kuwo baadil ah iyadoo la nasakhayo sumadda LA BIXIYAY, oo ay ku jiraan sumadda miisaaniyadda, tixraacyada mashruuca iyo deeq-bixiyaha

2. Isticmaalka isha gaarka ah ee maaliyadaha khasnadda, dhammaan qaan-sheegyada, rasiidyada, xaashiyada imaatinka, warqadaha codsiga, tikidyada iyo warqadaha diyaaradaha lagu raaco waa in ay leeyihiin shaabadda dowladda-MoF LA BIXIYAY.

Muhiimadda

Dhexe

Agaasinka Ka Mas'uulka ah

Waaxda Khasnadda

Jawaabta uu maamulka ka bixiyay

U-fiirsashada waa la qaatey Waaxa khasnaddana waxay xaqiijin doontaa in dhammaan dokumentiyada taageeraya lacag-bixinta lagu shaabbadeeyo LA BIXIYEY iyo in loo soo gudbiyo baaritaan.

3.4 Kharashaadka oo si khalad ah loo kala-saarey

U-fiirsashada

Xaaladda

Dib-u-eegistii aan ku sameyney diiwaanka guud, ayaa waxaan ku oggaaney xaalado kharashaad dhan US$ 45,820 oo si khalad ah loo kala-soocey oo ay ku jiraan xaalado kharashaadka safarka lagu hoos daabacay ujuurooyinka adeeg-bixiyeyaasha/la-talinta, qaan-sheega war-isgaarta oo lagu hoos daabacey telefishanka iyo wargeysyada, alaabooyinka xafiiska oo lagu hoos daabacey macluumaadka iyo kombiyuutarada, lacag-bixinno kaash ah oo lagu hoos qorey shirarka maxalliga ah.

Shuruudaha

Marka la hagayo qoondeynta kheyraadka iyo xisaabaha, qeybta 8aad ee xeernimaaiyeyaasha maareynta maaliyadda maamulka/dadweynaha, dhammaan wax-is-dhaafsiyada maaliyadeed, dakhli iyo kharashaadba, waa in la qaabeeyaa lana kala soocaa iyada oo la adeegsanayo isla kala-sooca (baadi-sooca) loo adeegsado miisaaniyadda iyo xisaabaadkaba. Diiwaangelinta kharashaadka waa in uu hagaa diiwaanka guud ee u dhigma oo gudahiisa qoondeynta miisaniyadda iyo adeegsigeedaba lagu qorsheeyay.

Sababta

Isku mid ahaanshaha iyo u dhowaanshaha noocyada qaar ee kharashaadka.

Saameynta

Khaladka ku jira kharashaadka ayaa horseedi kara in uu khaladaad ku imaado qiyaasaha miisaaniyadda iyo isbarbardhiga miisaaniyadda ee qaddarka rumooway, xisaabaha maamulka ee aan saxda aheyn iyo khaladka ku jira laymanka kharashaadka gaarka ah.

Soo-jeedimo

Waxaan soo-jeedinaynaa in qoondeynta iyo diiwaangelintaba ay raacaan shaxda xisaabaha iyo ujeeddada iyo sharaxaadda kharashaadyada baxaya. Kharashaadyada aan la xiriirin waa in aanan lagu qorin hal diiwaan oo weyn.

Muhiimadda

Dhexe

Agaasinka Ka Mas'uulka ah

Waaxda Khasnadda

Jawaabta uu maamulka ka bixiyay

U-fiirsashada waa la qaatey Waaxda khasnaddana waxaa ay macaamuaaldka ku diiwaangelin doontaa sumadda kharashaadka saxda ah ee la xiriira, Wasaaradda waxay hubin dooontaa in dhammaan lacag-bixinnada si sax ah loo diiwaangeliyo ka hor inta lacag-bixinta aan la ansaxin.

4 Liiska Mushaaraadka

4.1 Liidashooyinka ka jira hannaanka shaqaalaha

U-fiirsashada

Xaaladda

Laga soo bilaabo dib-u-eegistii lagu sameeyay galalka hawlwadeennada ee laga helay Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah iyo kharashaadka liiska mushaaraadka, waxaan oggaaney in liidashooyinkan soo socda ay ka jiraan hannaanka shaqaalaha iyo liiska mushaaraadka:

i. Xaaladaha kharashaadka mushaar-bixin aan la taageerin ee la xiriira Ciidamada Ammaanka, Booliska, Nabadsugidda iyo Ciidamada Asluubta iyo sidoo kale kharashaadka raashiinka joogtada ah ee dhan US$ 872,500. Jadwalka lacag-bixinta lama gunaanadin. Faahfaahinnada ka eeg Lifaaqa V.

ii. Midkooda Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah (CSC) ama waaxaha shaqaalaha Wasaaradda ay khuseyso ma hayaan oo ma korjoogteeyaan diiwaanka maalmaha fasaxa ee shaqaalaha.

iii. Marka la eego dib-u-eegistii lagu sameeyay galalka hawlwadeennada; ma jirin wax caddeymo ah oo muujinaya in baaritaanno lagu sameeyay asalka shaqaalaha qaarkood ka hor inta aanan laga shaqaaleyn Wasaaradaha kala duwan.

iv. Waxaan kaloo oggaaney in aysan jirin dokumentiyada la xiriira Maareynta Waxqabadka iyo Qiimeynta Waxqabadka ee waafaqsan galalka hawlwadeennada shaqaalaha.

Shuruudaha

a) Diyaarinta liiska mushaaraadka- qaybta 5.1.3.2 ee Tilmaanta D- xeer-nidaamiyeyaasha Miisaaniyad Fulinta, lacagta mushaarka iyo liiska mushaarka waa in lagu taageero dokumentiyo faahfaahsan

b) Xeer-nidaamiyeyaasha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah, sharciga lambarkiisu yahay 11 ayaa shaqaalaha ugu baahan in ay sameeyaan dib-u-eegista waxqabadka iyo qiimeynta sannadlaha ah. Wuxuu kaloo u baahan yahay in dhammaan shaqaalaha rayidka ah ay qaataan 2 maalmood oo fasax ah bil kasta oo ay dhammeystaan adeegga shaqada

c) Xeer-nidaamiyeyaasha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah oo adeegsanaya sharciga lambarkiisu yahay 11, ayaa u baahan in baaritaannada raadraaca lagu sameeyo dhammaan shaqaalaha cusub ee dowladda ku soo biirraya.

Sababta

Lama bixin wax sabab ah oo loo yeelay arrintan.

Saameynta

Liidashooyinka ka jira hannaanka shaqaalaha ayaa horseedi kara in khalad uu ku yimaado liiska mushaaraadka Dowladda.

Soo-jeedimo

Waxaan Dowladda kula talineynaa:

- In qaab otomaatik ah oo iskiisa u shaqeeya ka dhigo kuna saleyso kharashaadka liiska mushaaraadka aqoonsiga biyometrik ee qaatayaasha
- In Wasaaradda Maaliyadda ay bil kasta hesho xaaladda iyo tirada hawlwadeennada ka hor inta aysan fasaxin qaddarka lacagta xaddidan ee loo baahan yahay in mar qura la bixiyo.
- In nidaamka la socoshada fasaxa la sameeyaa iyadoo la adeegsanayo nidaamka HRMIS ee dhowaan la helay ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah.
- In baaritaannada raadraaca ama asalka in la sameeyo ka hor inta aan la bixin warqadda shaqo soo-jeedinta.
- In qiimeynta iyo maareynta waxqabadka lagu daro nidaamka HRMIS ee dhowaan la helay.’

- Canshuur ka-jarista dhammaan shaqaalaha waa in si joogto ah loo sameeyaa.

Muhiimadda

Sare

Agaasinka Ka Mas'uulka ah

Waaxda Khasnadda iyo CSC

Jawaabta uu maamulka ka bixiyay

I. Mushaaraadka Ciidamada Ammaanka – macluumaadka hawlwadeennada ammaanka waa mid xasaasi ah oo laguma aamini karo bankiyada gaarka loo leeyahay. Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ma lahan banki ay dowladdu leedahay.
II. Maalmaha fasaxa ee shaqaalaha waxaa kormeera waaxaha shaqaalaha ee kala duwan.
III. Sida uu qabo xeerka CSC, baaritaanka raadraaca shaqaalaha waa waajiba waxaanna la qaadaan shuruudo iyo tallaabooyin 12 ka kooban marka shaqo-qorista la sameeyo si qofku uu xaq ugu yeesho mushaaraadka RCRFII.
IV. Foomka waxqabadka waa mid ku waajiba dhammaan shaqaalaha waxaanna kormeera oo xaqiijiya maamulka sare ee wasaaradaha/waaxaha kala duwan.
V. Foomaka shaqaalaha waxaa saxiixa maareeyaha waaxda shaqaalaha ee MoF ka hor inta lacag-bixinta uusan bankiga fasaxin iyadoo loo marsiinayo xisaabta bankiga shaqaalaha gaarka ah.

Faallooyinka Dheeraadka ah ee Hantidhowrayaasha

Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ma bixin dokumentiyada taageerada lagama maarmaanka ah si loo xaqiijiyo in ay sameeyaan dib-u-eegista maalmaha fasaxa iyo is-waafajinta, baaritaannada raadraaca shaqaalaha, qiimeynta sannadlaha iyo qiimeynta waxqabadka. Waxaannu ku adkeysaneynaa waxyaabihii la oggaadey iyo soo-jeedinta.

5 Hantida ma guurtada ah

5.1 Liidashooyinka hoos tagaya Hantida Ma Guurtada ah

U-fiirsashada

Xaaladda

1. Diiwaanka hantida ma guurtada ah laguma sheegin liiska waxyaabaha ama hantida lagu soo darey sannadka. Waxaa jira kala duwaansho dhan $325,494 oo u dhaxeysa diiwaanka hantida ma guurtada ah diiwaanka (FAR) iyo kharashaadka raasumaalka dheeraadka ah ee lagu sheegay bayaamada maaliyadeed.

			Qaddarka- USD
Wadarta guud ee kharashka hantida ma guurtada ah ee 2019			327,414
Waxyaabaha lagu sarey 2019 sida ku cad FAR			
Wasaaradda	Waaxda	Xafiiska	Kharashka Asalka
Wasaaradda Maaliyadda	Waaxda Dakhliga	Xafiiska Dakhliga	350
Garsoorka Dowladda	Garsoorka Dowladda	Guddiga Garsoorka	450
Wasaaradda Maaliyadda	Waaxda ICT	Xafiiska ICT	300
Wasaaradda Maaliyadda	Waaxda Shaqaalaha ee MoF	Xafiiska HRM	410
Wasaaradda Maaliyadda	Waaxda Shaqaalaha ee MoF	Xafiiska HRM	410
Qiimaha guud ee waxyaabaha lagu darey ee FAR			1,920
Kala-duwanaanshaha u dhaxeeya FAR iyo liiska waxyaabaha lagu darey			**325,494**

2. Diiwaanka Hantida Ma-guurtada ah ma shaacin qaar ka mid ah hantida ay Dowladdu iska leedahay sida dhulka, dhismeyaasha iyo gaadiidka; t.a Dowladda Hoose, Dhismeyaasha Garoonka Diyaaradaha iyo Dekedda, Waddooyinka, Kaabayaasha Dhaqaalaha.

3. Waxaa intaa dheer, in aan oggaaney in hantida qaar ee taalla Xafiiska Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Maaliyadda, Wasaaradda Waxbarashada iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah in aanan la calaamadin.

Shuruudaha

Hantida ma guurtada ah waa hanti dowladda muhiim u ah. Hantida ma guurtada ah waa in la kantaroolo iyadoo lagu sameynayo raadraac iyo dayactir hantida la taaban karo iyo qalabka hay'adda. Noocyada hantida waxaa ka mid ah gaadiid, kombiyuutarro, alaabo iyo makiinnado.

Sababta

Sida ku cad xog-wareysigeenna, Sarkaalka Hantida ayaa ku cusbaa doorka waxaa uu ku guda jirey sidii uu ugu xasilli lahaa Wasaaradda oo ula wareegi lahaa gacan ku haynta diiwaanka hantida ma guurtada ah iyo sidoo kale qorshaha xaqiijinta sannadlaha ah.

Saameynta

La'aanta diiwaanka hantida ma guurtada ah oo la cusbooneysiiyay ayaa horseedi karta in ay adkaato xisaabinta hantida iyo sidoo kale in ay hantida u nuglaato xatooyo ama in meel khaldan la dhigo oo ay lunto.

Soo-jeedimo
Diiwaanka hantida waa in la cusboonaysiiyaa si loogu daro dhammaan hantida dowladda labadana hantida ma guurtada ah iyo tan aan ma guurtada ahayn. JSS waa in ay xaqiijiso in la calaamadiyo dhammaan hantida iyadoo loo yeelayo summad lagu aqoonsanayo oo gaar ah. Jadwalka dayactirka hantida waa in la joogteeyaa lana raacaa waanna in dhamaman qaybaha hantida waxtarka leh ee cilladaysan waa in si joogta ah loo dayactiraa oo si wanaagsan loo isticmaalaa.
Muhiimadda
Sare
Agaasinka Ka Mas'uulka ah
Sarkaalka Hantida Ma Guurtada ah/Waaxda Khasnadda iyo Waaxda Wax-soo-iibsiga
Jawaabta uu maamulka ka bixiyay
Nidaamka maareynta hantida waa la xoojin doonnaa si loo diiwaangeliyo hantida saxda ah, dib-u-eegista nidaamka iyo ansixinta hantida ayaa la sameyn doonnaa waqti habboon oo joogto ah; Geeddi-socodyada u dhaxeeya waaxda Khasnadda iyo waaxda Wax-soo-iibsiga ayaa la xoojin doontaa si ay u fududaato in dib-u-eegista la sameeyo bil kasta iyo in la cusboonaysiiyo nidaamka maareynta hantida iyadoo la adeegsanayo xogta FMIS. Nidaamka maareynta hantida waa in la korjoogteeyaa oo la cusbooneysiiyaa.

6 Bankiga iyo Kaashka

6.1 Liidashooyinka la aqoonsadey e ku jira bayaamada is-waafajinta bankiga

U-fiirsashada
Xaaladda Waxaan oggaaney in faahfaahinnada diyaariyaha, dib-u-eegaha iyo ansaxiyabaha in ay ka maqan yihiin bayaamada is-waafajinta bankiga ee loogu talagalay dhammaan xisaabaha bankiga laga bilaabo bisha Jannaayo 2019 ilaa Oktobar 2019. Waxaa la oggaadey in Wasaaradda Maaliyadda ay bilowdey fulinta soo-jeedimadii hore hantidhowraha ee ku saabsan diyaarinta habboon ee is-waafajinnada bankiga laga soo bilaabo Nofembar 2019. **Shuruudaha** Qeybta 5aad ee Xeerka PFM, ayaa wuxuu dhigayaa in Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda iyo xisaabaha kale ee bankiga ee Dowladda waa in la is-waafajiyaa sida wanaagsanna waa in is-waafajintaa la sameeyaa maalin kasta ama ugu yaraan toddobaadkiiba mar 2 maalmood gudahooda marka uu dhammaado toddobaadka ayna is-waafajintaasi sameeyso Waaxda Khasnadda, Wasaaradda Maaliyadda iyadoo la adeegsanayo nidaamka maareynta maaliyadda maamulka (FMIS). Is-waafajin kasta waa in uu eegaa oo ansaxiyaa mid ka mid ah saxiixayaasha loo igmadey xisaabta bankiga ama sarkaal sare oo loo magacaabey. Is-waafajinta bankiga iyo dokumentiyada taageeraya waa in la hayaa si loogu adeegsado kantarool dhinaca maareynta ah iyo ahdaaf la xiriira hantidhowrka, waana in la fayl-gareeyaa iyaga oo fayl kombuyutar ah iyo iyaga oo daabacanba. **Sababta** In goor dambe la hirgeliyay soo-jeedimadii baaristii tan ka horreysay **Saameynta** Khaladaadka ku jira iyo waxyaabaha ka maqan diiwaanka guud ee buug-xisaabeedka lacagta kaashka ah iyo bayaamada bankiga ayaa laga yaabaa in aanan la oggaan muddo dheer taas oo keenaysa khaladka isku-dheellitirka kaashka.
Soo-jeedimo
Caddeymaha diyaarinta, dib-u-eegista iyo ansaxinta bayaanka bankiga waa in uu gacanta ku hayaa maamulka.
Muhiimadda
Sare
Agaasinka Ka Mas'uulka ah
Waaxda Khasnadda
Jawaabta uu maamulka ka bixiyay
Dhammaan is-waafinnada Bankiga ayaa la diyaariyey waxaanna la siiyay hantidhowrayaasha oo ay ku jiraan nuqul kombiyuutar lagu adeegsan karo, haseyeeshee Wasaaradda waxay hubin doontaa Caddeynta diyaariyaha, dib-u-eegaha iyo ansixiyaha in ay ahayd in lagu muujiyo wejiga hore ee foomka is-waafajinta bankinga. Tani waxaa ka mid ah sheegidda taariikhda iyo jagooyinka diyaariyaha, dib-u-eegayaasha iyo ansixiyeyaasha.

6.2 Xisaabo banki oo aan dhaqdhaqaaq lahayn

U-fiirsashada
Xaaladda Waxaan oggaanay in ay jiraan 46 xisaabo banki oo aan dhaqdhaqaaq lahayn oo ka furan Dahabshil iyo Bankiga Salaam oo aan wax lacag ah ku harsaneyn kuwaas oo aan shaqeyn muddo dheer kana socon wax hawlgal ah. Faahfaahinnada dhammaan 47 xisaab ee banki ayaa waxaa lagu darey Lifaaqa VI ee warbixintan. **Shuruudaha** Qaybta 29aad ee Xeerka PFM ee 2017 ayaa waxay dhigaysaa habraacyada furitaanka, xiritaanka, hawlgalka iyo qabanqaabooyinka saxiixyada xisaabaha bankiga ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya. **Sababta** Xirid la'aanta xisaabaha bankiga ee aan shaqeyn ee Wasaaradaha kala duwan ee JSS. **Saameynta** La'aanta dhaqdhaqaaqyada macaamulaadka ayaa ka dhigaya xisaabaha aan shaqeyn kuwo u nugul khiyaanno iyo wax-isdabamarin.
Soo-jeedimo
Dhammaan xisaabaha bankiga ee aan dhaqdhaqaaqa lahayn waa in dib loo eego Wasaaradda Maaliyaddana waa in ay ansaxiso in la xiro.
Muhiimadda
Sare
Agaasinka Ka Mas'uulka ah
Waaxda Khasnadda
Jawaabta uu maamulka ka bixiyay
Inta badan xisaabaha Bankiga waa kuwo mashaariic ku sleysan oo si degdeg ah looma xiri karo, Haseyeeshee Wasaaradda Maaliyadda waxay xaqiijin doontaa in ay dib-u-eegto dhammaan xisaabaha bankiga iyo in ay xirto xisaabo kasta oo aan wax dhaqdhaqaaq ah ka socon. Xisaabaha Bankiga ee Sannad Maaliyadeedka 2019 ee lagu faahfaahiyey hoosta lifaaqa VI ayaa ahaa kuwo dhaqdhaqaaq macaamulaad ka socda sannadka oo dhan.
Faallooyinka Dheeraadka ah ee Hantidhowraha
Si loo helo hufnaanta iyo taabogalnimada adeegsiga xisaabaha bankiga, maamulka waa in uu hubiyaa in ay xaddidaan tirada xisaabaha bankiga ee hawlgalaya. Marka mashruuc uu dhammaado, oo la sameeyo gunaanadkii ugu dambeeyay, xisaabta mashruuca waa in isla-markiiba la xiraa. Xaaladaha qaar, maamulka wuxuu go'aamin karaa in uu xisaab hore u wareejiyo mashruuc cusub beddelkii mid kale la furi lahaa. Tani ayaa waqti hore waxaa laga la hadli karaa deeq-bixiyeyaasha si loo xaddido xaaladaha lagu furayo xisaabo cusub.

7 Fawjarrada Diiwaanka Weyn

7.1 Lambareynta iyo taageeridda Fawjarrada Diiwaanka Weyn

U-fiirsashada

Xaaladda

Waxaan oggaaney in diiwaananda waaweyn aanan si ku filan loogu taageerin dokumentiyada taageerada ee ku habboon. Waxaa intaa dheer, in aan oggaaney in lambarrada/summadaha fawjarrada diiwaanka weyn in aysan u dhigmin diiwaanka la saxayo, sidoo kale sharaxaadda fawjarrada diiwaanka weyn ma bixinayaan sharraxaadda cad ee waxa la saxayo. Fawjarrada diiwaanka weyn (JVs) waxay leeyihiin lambarreyn iyaga u gaar ah tanina waxay adkeynaysaa in la oggaado macaamulaadka saxda ah ee laga noqdey ama la saxey sida tusaalooyinka hoose:

Lr. Diiwaanka	Magaca Macmiilka Maalgeliyaha ah	Qaddarka (US$)	Taariikhda	Fawjarka	Hay'adda Wasaaradda	Xaaladda
115101	Maamulka Garoonka Diyaaradaha	(459)	22/Okt/19	19/00000348 DIIWAANKA WEYN	40400	La Daabacey
115101	Maamulka Garoonka Diyaaradaha	459	22/Okt/19	19/00002392 RV	130000	La Daabacey
115101	Maamulka Garoonka Diyaaradaha	459	22/Okt/19	19/00002299 RV	40400	La Daabacey
115101	Maamulka Garoonka Diyaaradaha	(758)	01/Okt/19	19/00000347 DIIWAANKA WEYN	40400	La Daabacey
115101	Maamulka Garoonka Diyaaradaha	758	01/Okt/19	19/00002394 RV	130000	La Daabacey
115101	Maamulka Garoonka Diyaaradaha	758	01/Okt/19	19/00002300 RV	40400	La Daabacey
115101	Maamulka Dekadaha	(387,800)	27/Agoosto/19	19/00000272 DIIWAANKA WEYN	40400	La Daabacey
115101	Maamulka Dekadaha	387,800	27/Agoosto/19	19/00001828 RV	140000	La Daabacey
115101	Maamulka Dekadaha	387,800	27/Agoosto/19	19/00001789 RV	40400	La Daabacey

Shuruudaha

Fawjarrada diiwaanka weyn waa in si habboon loo taageeraa si loogu muujiyo diyaariyaha iyo ansixiyaha diiwaannada waaweyn. Waa in sidoo kale si wanaagsan loo lambareeyaa oo loo summadaa si ay u muujiyaan macaamulaadka la diiwaangelinayo oo sax ah.

Sababta

Joogteyn la'aanta dokumentiyada taageerada ee fawjarrada diiwaanka weyn.

Saameynta

Halista wax-ka-beddelka aan sax ahayn ee diiwaanka weyn ee ku jira nidaamka iyadoo aan jirin oggolaansho ku habboon iyo dokumentiyada taageerada ee habboon.

Soo-jeedimo

Dhammaan diiwaannada waaweyn ee la gudbiyey waa in ay la socdaan dokumentiyada taageerada ee ku habboon. Summadeynta ama lambareynta diiwaannada waaweyn waa in loo sameeyaa hab fududeynaysa macaamulkaadka in la saxo.
Muhiimadda
Sare
Agaasinka Ka Mas'uulka ah
Waaxda Khasnadda
Jawaabta uu maamulka ka bixiyay
Wasaaradda Maaliyadda waxay sii wanaajin doontaa kantaroollada ku saabsan fawjarrada diiwaanka weyn iyadoo bixinaysa sharraxaada iyo faallada sababaha diiwaanka weyn loogu baahdey.

8 Miisaaniyad Dejinta iyo Warbixinnada Maaliyadeed

8.1 Liidashooyin ka jira dejinta miisaaniyadda iyo hannaanka ka-warbixinta maaliyadda

U-fiirsashada

Xaaladda

Waxaan oggaaney kala duwanaansho dhan US$ 14,421,435 (48%) in uu u dhaxeeyo dakhliga miisaaniyadda ee muddada iyo waxqabadka maaliyadeed ee rumoowey oo muujinaya u hoggaansamid la'aanta Qeybta 10aad iyo Qeybta 12aad ee Xeerka PFM.

Faahfaahinta	Qaddarka Miisaaniyadda (US$)	Qaddarta Rumooway	Kala-duwanaanshaha (US$)	Kala-duwanaanshaha %
Dakhliga	30,188,697	15,767,262	14,421,435	48%
Kharashaadka	30,188,697	15,983,494	14,205,202	47%

Waxaa intaa dheer, in aan oggaaney in xeer-nidaamiyaha maaliyad loogu talogaley waxyaabaha soo kordha (qoondeyn ku-talogalka ah) ee 5% ah sida lagu qeexay Qaybta 14aad ee xeer PFM in aanan laga dhabbeyn oo aan lagu darin saadaasha miisaaniyadda. Qaybta 14aad ee xeerka PFM wuxuu dhigayaa Miisaaniyadda Mideysan dhexdeeda, Baarlamaanku waa in uu ansaxiyaa qiyaas lacag maaliyadda maamulka/dadweynaha ah oo aan ka badneyn 5 boqolkiiba wadarta dakhli-sanadeedka Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya, ee qiyaasaha Miisaaniyadda La Soo Jeediyey ah si ay u noqoto Maaliyad Loogu Talogaley Waxyaabaha Soo Kordha (Qoondeyn Ku-talogal ah).

Shuruudaha

Qaybta 10aad ee xeerka PFM ee JSS wuxuu dhigayaa Miisaaniyadda Mideysan waa in ay muujisaa wixii miisaaniyadda saa'id ama naaqis ka ah, taas oo ah farqiqa u dhexeeya wadarta dakhliga oo aaney ku jirin amaahaha cusub iyo wadarta kharashaadka. Miisaaniyadda Mideysan waa in ay sheegtaa hadafka lacagta saa'idka ah ee miisaaniyadda loo isticmaalayo, iyo, haddii ay miisaaniyaddu naaqis leedahay sida maaliyad loogu helayo, waxayna u baahaneysaa in uu Baarlamaanku ansixiyo.

Sababta

U hoggaansamid la'aanta Qaybta 10aad, 12aad iyo 14aad ee Xeerka PFM ee 2017.

Saameynta

Halista u hoggaansamid la'aanta xeer-nidaamiyeyaasha PFM

Soo-jeedimo

Miisaaniyad sannadeedda waa in lagu sameeyo dib-u-eegis iyo in wax kasta ee ka badan ama ka hooseeya saadaasha waxqabadka maaliyadeed in wax looga beddelo dib-u-eegista dheeraadka ah ee bisha Luulyo.

5% ee miisaaniyadda waa in ku-talagal ahaan loo dejiyaa, hawlo kasta oo ku-talagal ahna waa in laga maalgeliyaa keydkan. Maaliyadaha ku-talagalka waa in aanan laga bixin miisaaniyadda kharashaadka soo noqnoda.

Muhiimadda

Sare

Agaasinka Ka Mas'uulka ah

Agaasinka Waaxda Miisaaniyadda
Jawaabta uu maamulka ka bixiyay
Wasaaradda Maaliyadda waxay sameyn doontaa dib-u-eegista bartamaha sannadka si loo go'aamiyo hadidi miisaaniyad Dheeri ah loo baahan yahay si loo hubiyo in qiyaasaha miisaaniyadda ay yihiin kuwo la gaari karo. Waaxda dakhliga ayaa dib-u-eegi doonta kala duwanaanshaha ka jira dakhli ururinta marka loo eego miisaaniyadda la qiyaasey.

9 IT-ga Guud iyo Kantaroollada Adeegsiga

9.1 Kantaroollada Adeegsiga

9.1.1 Jeegagga FMIS oo Nuqullo Isku-eg ah

U-fiirsashada
Xaaladda Lacag-bixin kasta, waa in ay leedahay jeeg FMIS gaar u ah oo la ansaxiyey kuna lifaaqan jeegga dhabta ah. Haseyeeshee, marka dib loo eego habka lacag-bixinta iyo dokumentiyada muunadda ee lacag-bixinta, waxaan oggaaney lacag-bixin dhan US$60,425 oo lagu bixiyay nuqullada jaagagga FMIS oo isku-eg ah, waxayna lid ku tahay habka kantaroollada hannaanka ee adeegsiga jeegga gaarka ah ee loo adeegsado lacag-bixin kasta sida lagu faahfaahiyey Lifaaqa V ee warbixintan. **Shuruudaha** Si loo aqoonsado lacag-bixinnada gaarka ah ee la bixiyay, dhammaan lambarrada jeegga ee FMIS waa in si gaar ah loo lambareeyo si loo helo dabagal/raadraac wanaagsan. **Sababta** Nidaamka ayaa oggol in wax laga beddelo lambarrada jeegga FMIS marka la ansaxiyo. **Saameynta** Waxaa jirta halis ah in isku dheelitirka kharashka lagu sheegay buugaagta in uu khalad ku jiro soo sabab u ah kharashaad suuragal ah in aanan la taageerin.
Soo-jeedimo
Dib-u-qaabee FMIS si aad hawsha uga joojiso doorka ansaxiyaha ee ah in uu awoodo in uu wax ka beddelo qaddarada ka-dib marka la qaato go'aanka in la daabaco.
Muhiimadda
Sare
Agaasinka Ka Mas'uulka ah
Shaqada ICT
Jawaabta uu maamulka ka bixiyay
Ma waafaqsanin waxyaabaha uu hantidhowraha arkey, nidaamna BISAN nuqul isku eg kama sameeyo lambarka tixraaca jeegga lambarka xisaabta bankiga ee isku midka ah. Haseyeeshee, nidaamka wuxuu u aqoonsanayaa xisaabaha mashruuca cusub lambarka tixraaca jeegga oo cusub.
Faallooyinka Dheeraadka ah ee Hantidhowraha
Waxaannu ku adkeysaneynaa waxyaabihii la oggaadey in ay jiraan. Inkastoo xisaabaha bankiga ay kala duwan yihiin, maamulka waa in uu raadiyaa hab lambareyn gaar ah oo loogu talagalay jeegagga si loo hubiyo in aysan isku-ekaansho ka jirin tixraaca jeegga.

9.1.2 Nusqaamaha ka jira dakhli ururinta iyo ka-warbixinta ee dhinacyada saddexaad

U-fiirsashada

Xaaladda

Waxaan oggaaney nusqaamahan soo socda in ay ka jiraan ururinta iyo ka-warbixinta dakhliga:

1. Dekedda Kismaayo, ma lahan nidaam si otomaatik ah u shaqeeya oo loogu talagalay dakhliga laga qaado maraakiibta ku soo xiraneysa iyo canshuurta kastamka/furdadda.
2. Ma jiraan waxyaabo muujinaya in JSS ay eegto ama raadraacdo dakhliga ay qaado Smart Technologies, oo ah shirkad adeegyo bixisa oo ay qandaraas kula gashey dowladda JSS in ay u daabacdo Aqoonsiyada Jubbaland, Shatiyada, baasaboorrada, lambarrada guryaha, shatiyada waddooyinka iyo kuwo kale.
3. Kombiyuutarrada shirkadda Smart Technologies waxay ku shaqeeyaan barnaamijka Windows Server 8 oo aysan taageerin shirkaddii soo saartey, Microsoft, taas oo keenaysa khatar amni.

Shuruudaha
Si loo helo diiwaangelin iyo raadraac hufan, Wasaaradda Maaliyadda waa in ay eegtaa oo la socotaa dakhliga ay soo ururiyeen dhinacyada saddexaad.

Sababta
Dakhli ururintu waa mid gacanta lagu sameeyo.

Saameynta

Waxaa jirta halis ah in dakhliga la soo daabacey in uu khalad ku jiri karo maadaama aaney jirin muuqaal iyo is-waafajin madax-bannaan ama xaqiijinta dakhliga ay ururisey shirkadda Smart Technologies, oo ah dhinac saddexaad.

Waxaa kaloo jirta halis ah in macaamulaadka dakhliga in uu noqon karo mid aanan dib loo heli karin iyadoo sabab u ah in wax loo dhimi karo barnaamijyada kombiyuutarka. Tani ayaa sabab u ah in nuqulka Barnaamijka uu Ku Shaqeeyo (Operating System) kombiyuutarka hadda ee taageeraya barnaamijyada in aysan shirkadda taageerin. Waxaa intaa dheer, in ay jirto halis ah in weerarka lagu guuleysto uu horseedi karo in barnaamijyada iyo xogtaba ay noqdaan kuwo aanan la heli karin, xatooyada xogta iyo arrimaha ku kalsoonaanta marka la eego nuglaanta amniga ee hadda ka jirta Barnaamijka uu Ku Shaqeeyo (Operating System) ee taageera nidaamka dakhli ururinta.

Soo-jeedimo

1. In mid si otomaatik ah u shaqeeya laga dhigo habka dakhli ururinta ee Dekedda Kismaayo si loo kordhiyo hufnaanta ka-warbixinta iyo fudeydka helidda hubinta dakhliga.
2. Codsashada bar ay iska-galaan barnaamijyada si loola socdo hawlaha shaqo ee ka socda shirkadda smart technologies si loo helo raadraaca wanaagsan ee dakhli ururinta adeegyada la bixiyey.
3. Shirkadda waa in loo sheegaa in ay cusbooneysiiso barnaamijka ay ku shaqeeyaan (Operating System) si loo helo amni wanaagsan ee barnaamijka muhiimka ah ee loo adeegsado hawlgallada maalinlaha ah.
4. Xaqiijinta madax-bannaan iyo is-waafajinta dhammaan macaamulaadka dakhli ururinta ee dhinaca saddexaad.
5. Cusboonaysii barnaamijyada iyadoo laga dhigayo nuqul ay taageerto shirkadda soosaartey.

Muhiimadda

Sare

Agaasinka Ka Mas'uulka ah

Shaqada ICT

Jawaabta uu maamulka ka bixiyay

I. Hadda nidaamka otomaatiga ah ee kastamka (CAS) ayaa soo iibintiisa socota, haseyeeshee hab ganacsatadda wax dhoofisa ama la soo dagta ku cadaynayso badeecadooda ayaa la sameeyaa iyadoo loo marayo nidaam elektaroonig ah oo loo yaqaanno (Somali single administrative document-SOMSAD).
II. Ma jiro muuqaalka loo baahan yahay maadaama shirkadda Smart Technologies ay bixiso adeegga kor lagu xusey iyadoo kaashka/dakhliga uu qabto maamulka RCA ee ku sugan xarunta dakhli ururinta.
III. Wasaaraddu waxay ku dirqin doontaa adeeg-bixiyeyaasha in ay cusbooneysiiyaan barnaamijyadooda (windows and software).

9.1.3 Kala-duwanaanshaha ka jira barta ay ku kulmaan BPM iyo FMIS

U-fiirsashada

Xaaladda

Waxaannu dib-u-eegnay qaddarada kharashaadka iyo dakhliga ee muddada waafaqsan Cutub Diyaarinta Miisaaniyad (BPM) iyo FMIS waxaanna oggaaney in uu jiro kala-duwanaansho dhan 4,479,988 sida hoos ku xusan.

Nooca	BPM (US$)	FMIS (US$)	Kala-duwanaanshaha (US$)
Kharashaadka	26,187,509	30,667,497	(4,479,988)
Dakhliga	26,187,509	30,667,497	(4,479,988)

Shuruudaha

Qaddarada u dhaxeeya BPM iyo FMIS waa in loo yeelaa bar ay ku kulmaan si loo soo bandhigo milicsi cad oo u dhaxeeya labada nidaam.

Sababta

Nidaamka looma qaabeyn ama habeyn in uu si otomaatik ah u cusboonaysiiyo qiimayaasha miisaaniyadda ee u dhaxeeya nidaamyada BPM iyo IFMIS. Isbeddelo kasta oo lagu sameeyo miisaaniyadda oo ka dhan ah dakhliga rumoowday iyo kharashaadka sidaa daraadeed laguma cusboonaysiin IFMIS.

Saameynta

Waxaa jira halis ah in Qiimayaasha miisaaniyadda kharashaadka iyo dakhliga ee la daabacay in si khalad ah loo sheego oo sabab u ah kala-duwanaanshaha u dhaxeeya nidaamyada BPM iyo IFMIS.

Soo-jeedimo

Hirgeli isku-xirnaansho otomaatig ah si loo hubiyo isbeddellada lagu sameeyay miisaaniyadda in si sax ah oo dhammeystiran loogu muujiyo nidaamka FMIS. Isbeddelo kasta oo rasmi ah oo lagu sameeyo miisaaniyadda waa in sidoo kale cusboonaysiiyo iyadoo oggolaanshaha la diiwaangelinayo si wax looga qabto kala-duwanaanshaha la oggaaday.

Muhiimadda

Sare

Agaasinka Ka Mas'uulka ah

ICT, Maamulka Dakhli Ururinta (RCA), Waaxaha EAFS iyo Khasnadda

Jawaabta uu maamulka ka bixiyay

Hantidhowraha waxaa loo sameeyay dulmar guud oo lagu tusinayo sida nidaamka BPM uu u shaqeeyo – BPM ayaa keliya la adeegsadaa inta lagu guda jiro marxaladda miisaaniyad diyaarinta sannadlaha ah ilaa uu

baarlamaanka ka ansaxiyo miisaaniyadda sannadlaha ah. Haseyeeshee, FMIS ayaa la adeegsadaa marka la fulinayo miisaaniyadda deeq kasta oo la filayana waxay imaanaysaa ka-dib marka miisaaniyadda uu ansaxiyo baarlamaaka sidaa daraadeedna labada nidaam ayaa keliya la isku dheelitiri karaa ka hor inta aanan la helin deeqda la filayey.

Faallooyinka Dheeraadka ah ee Hantidhowraha

Waxaannu ku adkeysaneynaa waxyaabihii la oggaadey in ay jiraan.
Waa in ay jirataa bar ay ku kulmaan oo cad oo u dhaxeysa labada nidaam si loo muujiyo booska saxda ah ee miisaaniyadda.

9.2 Kantaroollada Guud ee Kombiyuutarka

9.2.1 Kantaroollada Gelidda

9.2.1.1 Liidashooyin ka jira aqoonsiga adeegsadayaasha nidaamyada FMIS, RMS, BPM iyo AMS

U-fiirsashada

Xaaladda

Waxaannu baarney liiska adeegsadayaasha Nidaamka Macluumaadka Maareynta Maaliyadda (FMIS), Nidaamka Maareynta Dakhliga (RMS), Cutubka Miisaaniyad Diyaarinta (BPM) iyo Nidaamka Maareynta Hantida (AMS) waxaanna oggaaney kuwan soo socda:

1. Adeegsadeyaasha qaarkood ee lagu abuurey nidaamka ayaa laga raadraaci waayey diiwaannada shaqaalaha rasmiga ah oo ay bixisay waaxda shaqada iyo shaqaalaha (HR).
2. Magacyada shaqaalaha qaarkood ee lagu abuurey nidaamka si sax ah uma waafaqsanna magacyada ugu jira diiwaannada rasmiga ah ee HR.
3. Waxaa jira Aqoonsiga Adeegsadaha oo ka kooban laba nuqul oo isku eg oo ku jira Nidaamka Maareynta Hantida.

Shaxda hoose ka eeg faahfaahinno dheeraad ah:

Sharraxaad	FMIS	RMS	BPM	AMS
Aqoonsiyada Adeegsadaha oo aan lahayn faahfaahin shaqaale u dhigma oo ku jira diiwaannada waaxda shaqada iyo shaqaalaha	14	8	7	11
Magacyada_Aqoonsiga Adeegsadaha oo aan si sax ah u waafaqsaneyn diiwaannada rasmiga ah ee waaxda shaqada iyo shaqaalaha	13	5	2	2
Aqoonsiyada Adeegsadaha oo Laba ah	0	0	0	1

Shuruudaha

Dhammaan adeegsadayaasha lagu abuurey nidaamka waa in leeyihiin shaqaalaha idman si loo helo isla-xisaabtanka dhammaan macaamulaadka la marsiiyey nidaamka.

Sababta

Hannaanka aan ku filnayn in adeegsadayaal lagu abuuro nidaamyada maaliyadda ee kala duwan.

Saameynta

- Waxaa jirta halis ah in dheelitirka mushaaraadka uu ku jiri karo khalad loo aaneynayo diiwaannada shaqaalaha oo aan sax ahayn ama khalad ah.
- Sidoo kale way adag tahay in la go'aamiyo haddii xuquuqaha gelidda adeegsadaha ay isku dhigmaan mas'uuliyadaha shaqada ee loo igmadey halka diiwaannada shaqaalaha ee ku jira nidaamyada kala duwan iyo diiwaannada waaxda shaqada iyo shaqaalaha aysan isu dhigmin.
- Waxaa jirta halista macaamulaad khiyaano oo aan la oggaan ama daabacad khalad ah oo saameynaya nidaamyada FMIS, RMS, BPM iyoAMS marka la eego adeegsadayaasha aan loo oggoleyn ee suuragalka ah in ay ku jiraan nidaamyada.

Soo-jeedimo

- Dhammaan adeegsadayaasha nidaamyada FMIS, RMS, BPM iyo AMS waa in ay waafaqsan yihiin diiwaannada rasmiga ah ee waaxda shaqada iyo shaqaalaha. Adeegsadayaasha aan diiwaannadooda ku jirin diiwaananda rasmiga ah ee waaxda shaqada iyo shaqaalaha waa in laga saaraa.
- Waa in dib-loo-eegaa habka abuurista adeegsadaha ee nidaamka jira oo la hubiyaa ansaxinta milkiilayaasha nidaamka iyo waaxda shaqada iyo shaqaalaha.

- Waa in la tixgeliyaa dib-u-eegis saddexdii biloodba mar lagu sameeyo ee hawlaha adeegsadaha. Tani waa in la qoraa ka-dibna loo gudbiyaa madaxda waaxaha iyadoo ay la socoto qodobbada waxqabadka si loo hirgeliyo oo loo saxo nusqaamo kasta oo la oggaado.

Muhiimadda

Sare

Agaasinka Ka Mas'uulka ah

Waaxda ICT

Jawaabta uu maamulka ka bixiyay

I. Dhammaan faahfaahinta shaqaalaha ayaa waxaa la bixiyaa ka hor inta xuquuqda gelida adeegsadaha (foomka joogteynta soo-gelidda adeegsadaha).
II. Ereyo la soo gaabiyey ayaa la adeegsadey si loo abuuro gelidda adeegsadaha
III. U-fiirsashada si wanaagsan ayaa loo qaadey waxaanna nidaamka laga saari doonnaa magacyada isku-eg ka-dib dib-u-eegista waaxda ICT.

9.2.1.2 Kantaroollada Kala-saaridda Waajibaadka (SOD) ee FMIS oo liita

U-fiirsashada

Xaaladda

Intii dib-u-eegisteenna lagu guda jirey; waxaan aragney adeegsadaha xog-gelinta oo maareeyay in uu meelmariyo macaamulaad iyo in uu ansaxiyo isaga oo adeegsanaya magaca adeegsadahayasha ansaxiyayaha maadaama uu hayey xogaha lagu galayo akoonnada labada adeegsadeyaal.

Waxaa intaa dheer, siyaasadda Kantaroollada Gelidda Adeegsadaha ee diiwaangashan ee bixinaysa hagidda ku saabsan gelidda nidaamka FMIS ma dhigeyso kooxaha nidaamka oo faahfaahsan ee adeegsadayaasha loo qoondeeyay

Shuruudaha

Shaxda kala-saaridda waajibaadka ayaa la hirgeliyay lana dhaqangeliyay si looga hortaggo macaamulaadka aan la oggolayn/ baadilka ah in la daabaco ama waxqabadyo baadil ah in laga hirgeliyo nidaamyada maaliyadeed.

Sababta

Kantaroollada kala-saaridda waajibaadka ee la hirgeliyay lana diiwaangeliyay oo aan dad ku filnayn.

Saameynta

Waxaa jirta halista in macaamulaad khiyaanno ah la oggaan waayo. Waxaa kaloo jirta halista in haraaga la soo sheegay in uu ku jiri karo khaladaad sabab u ah kala-soocidda liidata ee kantaroollada waajibaadyada ee nidaamka IFMIS.

Soo-jeedimo

In dib-loo-eego dhammaan doorarka adeegsadaha IFMIS iyo in la hirgeliyo kantaroollada adag ee Kala-soocidda Waajibaadyada (SoD) oo la diiwaangeliyo si loo hubiyo ka hortagga dhammaan meelaha ka dhallan kara khilaafaadka keeni kara macaamulaadka aan saxa ahay, khiyaannada ah ama aan la oggolayn..

Muhiimadda

Sare

Agaasinka Ka Mas'uulka ah

Waaxaha Wax-soo-iibsiga iyo ICT
Jawaabta uu maamulka ka bixiyay
Waxaa nidaamka ka jira kala-soocidda waajibaadyada oo cad sida ay dhigayaan siyaasadda PFM iyo tilmaamaha la heli karo.

9.2.1.3 Nusqaamo ka jira kala noqoshada gelidda FMIS ee shaqaalaha ka tagaya Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

U-fiirsashada
Xaaladda Waxaan oggaaney in uu jiro adeegsade gaar ah, ARAGE, kaas oo maalintii ugu dambeysay ay ahayd 14 Febraayo 2019 sidaas oo ay tahay haddana weli ka hawlgalayey nidaamka FMIS muddo 10 maalmood ah ilaa 24-ka Febraayo 2019. Adeegsadaha wuxuu awoodey in uu meel-mariyo 307 macaamilo oo lagu qiimeeyay USD 911,266. **Shuruudaha** Hab-dhaqannada ugu wanaagsan ayaa dhigaya in adeegsadayaasha oo dhan ee isaga tagey hay'adda in hawlgalkooda laga joojiyo nidaamka si looga hortago macaamulaadka aan la oggolaan ee la meelmarin karo iyadoo la adeegsanayo xisaabahooda **Sababta** Hannaanka hawl ka joojinta shaqaalaha ka tagey JSS oo aan dad ku filneyn **Saameynta** Macaamulaadyo khiyaanno ah/aan la oggolaan ayaa la meelmarin karaa iyadoo la adeegsanayo magaca gelidda qofka shaqada ka tagey. Waxaa kaloo jirta halista in dhammaan macaamulaadka uu soo daabacey aqoonsiga Adeegsadaha la saameeyay in aysan sax ahayn taas oo keeni karta in uu khalad ku jiro haraaga la soo sheegay
Soo-jeedimo
Hirgeli hannaan lagu xaqiijinayo in dhammaan adeegsadayaasha shaqada ka tageya in si degdeg ah looga joojiyo hawlaha dhammaan nidaamyada maaliyadda iyo in waxyaabo kasta o ka reeban in lala diiwaangeliyo sabab ansax ah iyadoo oggolaansho laga haysto Agaasimaha Guud.
Muhiimadda
Sare
Agaasinka Ka Mas'uulka ah
Shaqada/waaxda ICT
Jawaabta uu maamulka ka bixiyay
Wasaaradda waxay hubin doontaa dhammaan xisaabaha adeegsadaha in si degdeg ah looga noqdo isla-marka uu shaqaalaha shaqada isaga tago.

9.2.1.4 kantaroollada qaabeynta eray-sireedka(password-ka) FMIS, RMS, AMS iyo BPM oo liita

U-fiirsashada
Xaaladda 1. Siyaasada nidaamyada macluumaadka la diiwaangeliyay ayaa dhigaya jaangooyooyin/tilmaamo loogu talagalay abuurista , maareynta iyo israaca erayada eray-sireedka(passwords) marka loo eego Beddelka eray-sireedka marka ugu horreysa ee lagu biirro, Dhererka eray-sireedka ugu yar, Waqtiga u kala dhaxeeya beddelka eray-sireedka iyo Adkaanshaha eray-sireedka. Tilmaanta ku saabsan Tirada

ugu badan ee isku-dayada aan guulaysan ee la oggolaan karo; iyo Muddada uu eray-sireedka ku xirmayana lama qeexin.

2. Waxaannu sii qeexnay qaabaynta eray-sireedka ee nidaamyada FMIS, RMS, BPM AMS iyo Nidaamka Hawlgalka waxaanna oggaaney waxyaabahan soo socda:
    - Beddelka eray-sireedka ee marka ugu horreysa ee lagu biirro looma sameyn nidaamyada AMS iyo RMS;
    - Dhereka erey-sireedka ugu yar looma sameyn barnaamijyada windows ee taageera nidaamyada AMS iyo RMS;
    - Waqtiyada u kala dhaxeya beddelka eray-sireedka looma sameyn windows-ka oo tan nidaamka AMS lama ogga
    - Adkaanshaha eray-sireedka (tusaale ahaan, ereyo iyo lambarro isku jir ah); kuma filna dhammaan nidaamyada maadaama aan awooday in eray-sireedyadan u adeegsado xisaabata tijaabada ah: Bisan(FMIS), dadi12345(RMS),dadimasesa12(BPM), dadimasesa123(AMS)
3. Adeegsadayasha waxay wadaagaan erey-sireedka(password) - intii lagu guda jirey dib-u-eegisteenna waxaan aragney xog geliyo meelmarinaya macaamulaad ka-dibna ansaxinaya isaga oo adeegsanaya magaca adeegsadaha (username) ansaxiyaha maadaama uu hayay erey-sireedyada labada xisaaboodba.

Shuruudaha

Siyaasadaha eray-sireedka ayaa u baahan in tirada ugu badan ee isku-dayada aan guulaysan ee la oggolaan karo iyo muddada uu eray-sireedka xirmayo in la xaddido oo la hirgeliyo. Adeegsadayaasha waxaa sidoo kale looga baahan yahay in aysan erey-sireedyada la wadaagin adeegsadayaasha kale taas oo ay tahay in si adag loo ilaaliyo.

Sababta

Kantaroollada iyo siyaasadaha ammaanka eray-sireedka oo si aan dad ku filnayn loo diiwaangeliyay loona hirgeliyay

Saameynta

Wax u dhimidda nidaamyada shaqo ee muhiimka ah iyada oo ay ugu wacan tahay weerarrara ammaanka eray-sireedka oo lagu guulaystay sida weerarka qaamuuska iyo xoog sheegadka ah.

Soo-jeedimo

- Habraacyada iyo siyaasadaha eray-sireedka(password) waa in la sii wanaajiyo si loogu daro: Tirada ugu badan ee isku-dayada aan guulaysan ee la oggolaan karo; iyo muddada uu Eray-sireedka xirmayo
- Siyaasadaha eray-sireedka iyo habaynta qaabeynta (configuration settings) ee loogu talagalay nidaamka windows iyo dhammaan nidaamyada lagu shaqeeyo ee muhiimka ah.
- Siyaasad adag waa in la dejiyaa lana dhaqangeliyaa si loo joojiyo wadaagista erey-sireedyada.
- Hannaan dib-u-eegis waa in la sameeyaa iyadoo waaxaha EAFS iyo IT laga qaybgelin doonno in ay aqoonsadaan oo ay u soo sheegaan adeegsadayaasha wadaagaya erey-sireedkooda Agaasimaha Guud si loogu qaado tallaabo anshax-marin la isku raacey oo la ansaxiyay.

Muhiimadda

Sare

Agaasinka Ka Mas'uulka ah

Waaxaha ICT, Khasnadda iyo EAFS

Jawaabta uu maamulka ka bixiyay

Siyaasadda erey-sireedka oo la sii wanaajiyay ayaa la sameyn doonnaa, la ansaxin doonnaa ka-dibna la soo gudbin doonnaa si loo hirgeliyo oo loo fuliyo.

9.2.1.5 Dib-u-eegista hawlaha maamulaha ee nidaamka FMIS oo aan dad ku filnayn

U-fiirsashada

Xaaladda

Waxaan oggaaney in akoonka maamulaha nidaamka uu leeyahay gelid mudnaan leh ee dhammaan macaamulaadka iyo cutubyada gadaasha dambe ee FMIS. Waxaan dib-u-eegis dheeraad ah ku sameynay adeegsadaha Maamulaha waxaanna oggaaney in isaga/iyada ay meelmariyeen xoogaa macaamulaad ah oo loogu talagalay muddada dib loo eegayo. Tani waxay lid ku tahay kantaroollada kala-sooca waajibaadka ee u baahan in la kala-saaro waajibaadyada u dhaxeeya maamulka nidaamka iyo hawsha macaamulka.

Shuruudaha

Madaxda/milkiilayaasha ganacsiga waa in ay si joogto ah dib-u-eegis ugu sameyaan hawlaha ka socda nidaamyada ganacsiga ee muhiimka ah si loo xaqiijiyo haddii maamulayaasha ay ku hawlgalayaan gudaha waajibaadkooda la xiriira hawlgallada shaqo.

Sababta

Hawlaha adeegsadaha maamulka ah ee nidaamka si madax-bannaan looma raadraaco, looma kormeero ama looguma sameeyo dib-u-eegis.

Saameynta

Waxaa jirta halista in la daabaco macaamulaad aan la oggolayn ama baadil ah.

Soo-jeedimo

Tixgeli ka noqoshada xuquuqaha fulinta hawlaha macaamulaad ee maamulaha IT-ga. Halka ay lagama maarmaan tahay, tixgeli dib-u-eegis madax-bannaan oo joogtda ah in lagu sameeyo waxqabadyada maamulaha iyo in la diiwaangeliyo si loo xaqiijiyo in aan la soo marsiin diiwaanno aan la oggolayn.

Muhiimadda

Sare

Agaasinka Ka Mas'uulka ah

ICT

Jawaabta uu maamulka ka bixiyay

Tani waxay ahayd sixitaan lagu sameeyay khaladka nidaamka. Waxaa gelinta sameeyay waaxda khasnadda ka-dibna waxaa la daabaci waayey lacag-bixinta, sidaa daraadeed, maamullada IT-ga ayaa waaxda khasnadda ka caawiyey diiwaangelinta iyo saxidda khaladka.

9.2.1.6 Liidashooyin ka jira amniga dhismaha Wasaaradda Maaliyadda

U-fiirsashada

Xaaladda

Waxaan oggaaney in aysan dad ku filnayn kantaroollada xannibaad la taaban karo si looga ilaaliyo nidaamyada IT-ga xatooyo iyadoo la tixgelinayo in Wasaaradda Maaliyadda ee JSS in ay tahay xafiis dowladeed kaas oo ay dad badani soo booqdaan, kuwaas oo si fudud ula soo geli karo ulana bixi karo qalabyada elektarooniga ah ee qaadmi kara sida kombiyuutarada laabtoobka ah.

Shuruudaha

Amniga la taaban karo waa muhiim si loo ilaaliyo hantida ICT ee hay'adda. **Sababta** Liidashooyin ka jira amniga gudaha dhismaha Wasaaradda Maaliyadda. **Saameynta** Waxaa jirta halista gelidda aan la oggolayn ee kaabayaasha IT ee muhiimka ah ee taageera socodsiinta macaamulaadka iyo baaqiga maaliyadeed ee la soo sheegay ee JSS.
Soo-jeedimo
Diiwaan waa in loo adeegsadaa in lagu diiwaangeliyo lambarrada taxanaha ee combiyuutarrada laabtoobka oo loogu talagalay dhammaan laabtoobyada la keeno ama laga qaado xafiisyada JSS. In la sameeyo nidaamka ka gudubka albaabka si loo diiwaangeliyo loonna oggolaado qalab elektaroonig kasta ee dibadda loogu qaadayo adeeg ama laga wareejinayo goobahooda asalka..
Muhiimadda
Sare
Agaasinka Ka Mas'uulka ah
Agaasimaha, Maamulka iyo Maaliyadda
Jawaabta uu maamulka ka bixiyay
Kooxda Amniga Wasaaradda Maaliyadda ayaa waxaa ay baaraan qof kasta oo soo galaya dhismayaasha waxayna hubiyaan dhammaan shakhsiyaadka ka baxaya dhismeyaasha. Sidoo kale dhammaan xafiisyada waaxaha ayaa la eegaa marka saacadaha shaqadu ay dhammaadaan.
Faallooyinka Dheeraadka ah ee Hantidhowraha
Waxaannu ku adkeysaneynaa waxyaabihii la oggaadey in ay jiraan.

9.2.1.7 Xisaabaha adeegsadaha guud

U-fiirsashada
Xaaladda Waxaan oggaaney isticmaalka Aqoonsiga adeegsadaha guud in lagu isticmaalka Nidaamka Maareynta Dakhliga (RMS), Cutubka Diyaarinta Miisaaniyadda (BPM), Nidaamka Maareynta Hantida (AMS) iyo Nidaamka Macluumaadka Maareynta Maaliyadda (FMIS). Kuwan hoose waa Aqoonsiyada adeegsadaha guud ee aan oggaaney in loo isticmaalka socodsiinta hawlaha macaamulaadka: • Admin (RMS, BPM, FMIS iyo AMS) • Premis, Crystal, mamba iyo root (AMS) Adeegsadayaashan guud laguma tilmaami karo shaqaalaha Wasaaradda Maaliyadda iyadoo laga leeyahay ujeeddo isla-xisaabtan. **Shuruudaha** Ujeeddo isla-xisaabtan awgeed, dhammaan adeegsadayaasha lagu abuuray hannaanka ayaa waxaa loo baahan yahay in lagu tilmaamo ama loo aaneeyo adeegsadayaal gaar ah. **Sababta** Hannaano aan ku filnayn abuurista adeegsadaha hannaanka iyo kantaroollada gelidda.

Saameynta Isticmaalka Aqoonsiyo guud si loo meelmariyo macaamulaadka khiyaannada ah maadaama ay adag tahay in la xaqiijiyo isla-xisaabtanka.
Soo-jeedimo
Dhammaan aqoonsiyada (IDs) isku-midka ah hawlgalka laga joojiyo haddii aanan la adeegsanayn ama in la diiwaangeliyo oo loo qoondeeyo shaqaale gaar ah ka-dib marka uu ansaxiyo maamulka ay khuseyso si loo helo isla-xisaabtan.
Muhiimadda
Sare
Agaasinka Ka Mas'uulka ah
ICT
Jawaabta uu maamulka ka bixiyay
Aqoonsiyada adeegsadaha guud waa in hawsha laga joojiyaa ama loo qoondeeyaa shakhsiyaad la garanayo. Waa in la sameeyaa dedaallo lagu hubinayo aqoonsiyada adeegsadaha in lagu magacaabo adeegsadayaal iyo ama in loo aaneyn karo shakhsiyaad la garanayo.

9.2.2 Hawlgallada IT-ga

9.2.2.1 Siyaasadaha Amniga Macluumaadka oo loo diiwaangeliyay si aan dad ku filnayn

U-fiirsashada
Xaaladda Siyaasadaha Macluumaadka Ammaanka lama diiwaangelin si loogu daro qaybahan soo socda: • bayaanka ahmiyadda uu ammaanka u leeyahay hay'adda; • war-isgaarsiinta iyo qirashada siyaasadda; • gelidda dhabta ah ee kheyraadyada kombiyuutarka; • la imaaw siyaasadda aaladda oo adiga kuu gaar ah; • mas'uuliyadaha shaqaalaha iyo qandaraaslaha • maamulka gelidda, dib-u-caddeyn, iyo joojin; • gelidda barnaamiyada, kayd-xogeedka, iyo nidaamyada uu kombiyuutarka ku shaqeeyo (operating system); • xaddidaadaha eray-sireedka/ ammaanka eray-sireedka; • korjoogteynta shabakada; • gelidda meel fog laga soo galo; • ilaalinta fayraska; iyo • dib-u-eegista dhacdooyinka ammaanka la xiriira. **Shuruudaha** Si ay wax-ku-ool u noqoto maareynta sirnimada, kaamilnimada iyo helitaanka barnaamijyada nidaamka iyo xogta, waxaa loo baahan yahay in la diiwaangeliyo habraacyada iyo siyaasadaha amniga macluumaadka. **Sababta**

Habraacyada iyo siyaasadaha macluumaadka ee aan al diiwaangelin. **Saameynta** Baylahaynta hantida IT-ga oo wax u dhimaysa Sir ahaanta, Kaamilnimada iyo Helitaanka xogta iyo barnaamijyada muhiimka ah.
Soo-jeedimo
Dokumentiga habraacyada iyo siyaasadda la diiwaangeliyay, la ansaxiyay oo la hirgeliyay waa in la diyaariyaa iyadoo lagu darayo siyaasadaha la xusay ka-dibna waa in lagu wareejiyaa adeegsadayaasha iyo maamulkaasha IT-ga si ay ugu hoggaansamaan.
Muhiimadda
Sare
Agaasinka Ka Mas'uulka ah
ICT
Jawaabta uu maamulka ka bixiyay
Sameynta dokumentiyada siyaasadda ICT oo ballaaran ayaa socota. Diyaarinta siyaasadda ICT-ga waa in la soo gebbogabeeyaa, la ansaxiyaa ka-dibna la gudbiyaa si loo hirgeliyo oo loo fuliyo. Dib-u-eegisyada muddo ka-dibba mar la sameeyo waa in la sameeyaa si loo hubiyo in bayaamada siyaasadda ICT ay noqdaan kuwo ku habboon baahiyaa iyo deegaanka hawlgalka ee Wasaaradda Maaliyadda Jubbaland.

9.2.2.2 Tababarka wacyiga Amniga IT-ga

U-fiirsashada
Xaaladda Waxaan oggaaney sannadka dib-u-eegista lagu sameynayo, in aaney jirin tababarka wacyigelinta amniga IT-ga oo loogu talagalay adeegsadayaasha ugu dambeeya iyo maamulayaasha nidaamyada shaqada muhiimka ah. **Shuruudaha** Si ay taabogal u noqoto ilaalinta hantida Tiknoolajiyadda Macluumaadka, tababarka wacyigelinta amniga ayaa muhiim u ah maamulayaasha iyo adeegsadayaasha ugu dambeeyaan. **Sababta** Hannaanka tababarka adeegsadayaasha ugu dambeeya iyo maamulayaasha maamulka oo aan dad ku filnayn. **Saameynta** Khasaaraha maaliyadeed ama jebinta shuruucda sir ilaalinta iyo helitaanka nidaamka ee cadowga oo sabab u ah weerarro lagu guulaystay.
Soo-jeedimo
Kulamo tababar Sannadle/Joogto ah waa in la abuubulo si adeegsadayaasha loogu fidiyo tababar ku saabsan weerarradii ugu dambeeyay iyo tallaabooyinka looga ilaalin karo hantida IT-ga burbur iyo dhibaatayn.
Muhiimadda
Sare

Agaasinka Ka Mas'uulka ah
ICT
Jawaabta uu maamulka ka bixiyay
Wasaaradda Maaliyadda waxay tixgelin doontaa Tababar IT-ga oo ku saabsan amniga internet-ka (cyber security) oo ah qayb muhiim ah iyo dib-u-eegisyo iyo barnaamijyo tababar gaar u ah nidaamtada macluumaadka iyo IT-ga waa in sidoo kale la nakh-shadeeyaa oo la hirgeliyaa

9.2.2.3 Diiwaangelinta taageerada IT-ga iyo dhacdooyinka kaalinta gargaarka

U-fiirsashada
Xaaladda Waxaan oggaaney Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya in dhacdooyinka marka hore lagu wargeliyo Adeegsadayaasha sare oo ah taageerada safka hore iyadoo la adeegsanayo email, telefoon ama si toos ah afka loogu sheegayo, taageerada safka labaad waa la-taliyeyaasha Premis taageerada safka saddexaadna waa shirkadda laga soo iibiyay nidaamka. Dhacdooyinka la soo sheegay lama diiwaangelin si loogu daro kuwan soo socda: • magaca diiwaangeliyaha; • qaabka la adeegsado si loo diiwaangeliyo dhacdooyinka, tusaale, nidaamka raadraaca dhacdada, xallinta, iwm; iyo • magaca/jagada qofka baaraya ka-dibna xallinaya ciladda. **Shuruudaha** Dhammaan arrimaha ay sheegeen adeegsadayaasha si loo xalliyo waxaa loo baahan yahay in la diiwaangeliyo iyo in si taabogalka ah loo raadraaco si loo oggaado sababta aasaasiga ah iyo sameynta xal joogto ah ama xal soo noqnoqda si loo abuuro hufnaan. **Sababta** Hannaanada iyo tiknoolajiyadda oo aan dad ku filnayn si loo diiwaangeliyo oo loo raadraaco arrimaha la soo sheegay. **Saameynta** Ka-gaabinta adeeg bixinta oo sabab u ah dhacdooyin aan waxba laga qaban taas oo horseedi karta in la waayo helintaanka nidaamka ama in ay daciifaan kaamilnimada hannaanka iyo/ama sir ilaalinta.
Soo-jeedimo
Nidaamka diiwaangelinta iyo ka warbixinta dhacdooyinka oo dhammeystiran waa in la qaabeeyaa si loogu daro kuwan soo socda: • magaca diiwaangeliyaha; • qaabka la adeegsado si loo diiwaangeliyo dhacdooyinka, tusaale, nidaamka raadraaca dhacdada, xallinta, iwm; iyo • magaca/jagada qofka baaraya ka-dibna xallinaya ciladda.
Muhiimadda
Sare
Agaasinka Ka Mas'uulka ah

ICT
Jawaabta uu maamulka ka bixiyay
E-mail-ka miiska caawimaadda ayaa dhowaan la sameeyay, dhammaan shaqaalaha waxay codsigooda si rasmi ah ugu soo hagaajin karaan email-ka.

9.2.2.4 Barnaamijka ka hortagga fayraska (antivirus)

U-fiirsashada

Xaaladda

Waxaan baarney 9 makiinnado waxaanna oggaaney in 3-dex kamid ah barnaamijkooda ka hortagga fayraska (antivirus) in uu dansan yahay ama in shatiyadoodu ay dhaceen.

Magaca Makiinadaha	Antivirus	Xaaladda Antivirus-ka
WINDOWS-T82HFJT	Kaspersky	Shatiga Dhacey
DESKTOP-6TL6L4C	Kaspersky	Shatiga Dhacey
DESKTOP-DHUM7J1	Windows Defender	La Damiyey

Shuruudaha

Si xogta iyo barnaamijyada looga ilaaliyo fayrasyada, barnaamijka ka hortagga fayraska (antivirus) oo shaqeynaya ayaa loo baahan yahay in kombiyuutarada lagu shubo oo si ku filanna loo cusbooneysiiyo.

Sababta

Tiknoolajiyad iyo hannaan aan ku filneyn in si dhexe loo maareeyo barnaamijka ka hortagga fayraska (antivirus).

Saameynta

Helid la'aanta barnaamijka, wax u dhimidda kaamilnimada iyo/sir ahaanta oo sabab u ah weerrarada fayraska ee guuleysta.

Soo-jeedimo

Dhammaan makiinadaha waa in lagu shubaa barnaamijka ka hortagga fayraska cusbooneysiinta otomaatiga ahna waa in la diyaariyaa si loo taabogeliyo.

Muhiimadda

Sare

Agaasinka Ka Mas'uulka ah

ICT

Jawaabta uu maamulka ka bixiyay

Barnaamijka ka hortagga fayraska (anti-virus) oo loogu talagalay goobaha shaqada iyo meelaha faylasha lagu keydiyo waa in la helaa. Kani waa in uu leeyahay shati sannado badan shaqeynaya oo leh meel dhexe oo laga maamulo lagana hawlgeliyo.

9.2.3 Kantaroolka Isbeddelka Nidaamyada

9.2.3.1 La'aanta siyaasadda maareynta isbeddelka oo rasmi ah

U-fiirsashada
Xaaladda Waxaan oggaaney in Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya in aysan qaadan siyaasadda maareynta isbeddelka taas oo ay ku jiraan habraacyadan/ tilmaamahan soo socda: • bilaabidda isbeddelka; • Geeddi-soocdka isbeddelka • oggolaanshaha isbeddelka; • tijaabinta nidaamka iyo unugga ee deegaanka tijaabada ah; • tijaabinta adeegsadaha ganacsiga ah iyo oggolaanshaha; iyo • u wareegidda wax-soo-saarka. Muddada dib loo eegayo, ma jirin wax isbeddelo ah oo laga bilaabay JSS. **Shuruudaha** Si loo dardargeliyo sameynta isbeddalada barnaamijka, hannaanka diiwaangelinta iyo oggolaanshaha oo rasmi ah ayaa lagama maarmaan ah. **Sababta** Hannaanka isbeddelka barnaamijka oo aan dad ku filnayn. **Saameynta** Halis gelinta helitaanka barnaamijka iyo xogta iyo kaamilnimada oo sabab u ah in badeecada laga hirgeliyo isbeddellada aan la oggolaan iyo kuwa aan la tijaabin.
Soo-jeedimo
Siyaasadda maareynta isbeddelka waa in la diyaariyaa, diiwaangeliyaa oo la ansixiyaa iyadoo lagu darayo: • bilaabidda isbeddelka; • Geeddi-sooca isbeddelka; • oggolaanshaha isbeddelka; • tijaabinta nidaamka iyo unugga ee deegaanka tijaabada ah; • tijaabinta adeegsadaha ganacsiga ah iyo oggolaanshaha; iyo • u wareegidda wax-soo-saarka.
Muhiimadda
Sare
Agaasinka Ka Mas'uulka ah
ICT
Jawaabta uu maamulka ka bixiyay
U-fiirsashada waa la oggaadey MoF-na waxay sameyn doontaa siyaasadda maareynta isbeddelka nidaamka oo ay dhanqangelin doonto.

9.2.3.2 Qaadasho la'aanta siyaasadda helidda iyo horumarinta nidaamka

U-fiirsashada

Xaaladda

Waxaan oggaaney Dowlad-goboleedka Jubbbaland ee Soomaaliya in aysan qaadan siyaasadda horumarinta iyo hantiyadda taas oo la gaarsiiyo dhammaan shaqaalaha ay khuseyso (iyo qandaraaslayaasha) waxaanna ku jira kuwan soo socda:

- Bilaabidda iyo oggolaanshaha mashaariicda nidaamka;
- Qoondeynta mudnaanaha mashaariicda;
- Diyaarinta shuruudaha iyo tilmaamaha;
- Tijaabinta barnaamijyada;
- tijaabinta adeegsadaha ganacsiga iyo oggolaanshaha rasmiga ah;
- Ka soo wareegidda min deegaanka tijaabada ilaa deegaanka soo-saaridda; iyo
- Is-waafajinta xogta loo wareejiyay barnaamijyo cusub ama si weyn wax looga beddelay.

Muddada dib loo eegayo, nidaamka Maareynta Shaqaalaha ayaa waxaa loo soo iibiyay Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah, haseyeeshee, waxaannu oggaaney in ay jiraan daldaloolladan soo socda.

- Ma ahan mid ku xiran nidaamka Liiska Mushaaraadka si loo yareeyo xog gelinta marka la qorayo shaqaale cusub, la maareynayo isbeddelada/beddelaadaha ama bixidda.
- Dhammaan shaqaalaha laguma qorin ama diiwaangelin nidaamka sida, keliya 300 marka loo eego 700 shaqaale ayaa lagu diiwaangeliyay nidaamka.

Shuruudaha

Si ay taabogal u noqoto wax ka qabashada caqabado ganacsi kasta, waxaa jira baahi loo qabo siyaasadda hantiyidda iyo horumarinta nidaamka oo rasmi ah.

Sababta

Hannaanka rasmiga ah ee hantiyidda iyo horumarinta nidaamka oo aan dad ku filnayn.

Saameynta

Tashiil-xumada kheyraadka ama wada-shaqeyn la'aan iyadoo la hawlgelinayo nidaamyo isbarbar socda ama aan la faragelin.

Soo-jeedimo

Habraacyada iyo siyaasad wadareedda/la isku daray ee la diiwaangelinayo lana hirgelinayo waa in ay ku jiraan:

- Bilaabidda iyo oggolaanshaha mashaariicda nidaamka;
- Qoondeynta mudnaanaha mashaariicda;
- Diyaarinta shuruudaha iyo tilmaamaha;
- Tijaabinta barnaamijyada;
- tijaabinta adeegsadaha ganacsiga iyo oggolaanshaha rasmiga ah;
- Ka soo wareegidda min deegaanka tijaabada ilaa deegaanka soo-saaridda; iyo
- Is-waafajinta xogta loo wareejiyay barnaamijyo cusub ama si weyn wax looga beddelay.

Muhiimadda

Sare

Agaasinka Ka Mas'uulka ah

ICT

Jawaabta uu maamulka ka bixiyay

Sameynta dokumentiyada siyaasadda ICT oo ballaaran ayaa socota. Diyaarinta siyaasadda ICT-ga waa in la soo gebbogabeeyaa, la ansaxiyaa ka-dibna la gudbiyaa si loo hirgeliyo oo loo fuliyo. Dib-u-eegisyada muddo ka-dibba mar la sameeyo waa in la sameeyaa si loo hubiyo in bayaamada siyaasadda ICT ay noqdaan kuwo ku habboon baahiyaa iyo deegaanka hawlgalka ee Wasaaradda Maaliyadda Jubbaland.
WoF waxay tixgelin doontaa qaabeynta waxayna wax ka beddeli doontaa daldaloollada ka jira nidaamka.

9.2.4 Ka-soo-kabashada Musiibooyinka IT-ga iyo Sii Shaqeynta Hay'adda

9.2.4.1 La'aanta Qorshaha Ka-soo-kabashada Masiibooyinka IT-ga iyo Sii Shaqeynta Hay'adda

U-fiirsashada

Xaaladda

La'aanta Qorshaha Ka-soo-kabashada Masiibooyinka IT-ga iyo Sii Shaqeynta Hay'adda si loo fududeeyo hawlgallo shaqo kasta ee muhiim ah oo ay ku jiraan waxyaabahan soo socda:

- hordhac, leh liiska qaybinta, nuxurka warbixinta oo kooban, ujeeddooyin iyo eray-bixin;
- qorshaha maareynta halista oo leh falanqeynta saameynta shaqada;
- qorshaha wax-ka-qabashada dhacdada, oo leh hawlgelinta qorshaha, kooxda wax-ka-qabashada dhacdada, war-isgaarsiinta iyo liiska xiriirka;
- qorshaha ka-soo-kabashada;
- tijaabi, qiimee oo cusuboonaysii jadwalka.

Shuruudaha

Deegaan shaqo kasta wuxuu u baahan yahay qorshe uu kaga hortagayo dhacdooyin kasta oo aan la oggayn ama aan la saadaalin karin ee carqaladayn karta adeeg bixinta.

Sababta

Liidasho ka jirta rasmiyeynta Qorshaha Ka-soo-kabashada Masiibooyinka IT-ga iyo Sii Shaqeynta Hay'adda.

Saameynta

La'aanta Qorshaha Ka-soo-kabashada Masiibooyinka IT-ga ayaa horseedi kara Dowladda in aysan awoodin in ay si hufan u bilowdo hawlgallada haddii masiibo ay tahay in ay dhacdo.

Soo-jeedimo

Qorshaha sii shaqeynta hay'adda waa in la diiwaangeliyo, la ansaxiyo, la hirgeliyo, la tijaabiyo oo sannad walba la cusbooneysiiyaa si loogu daro khataraha cusub.

Muhiimadda

Sare

Agaasinka Ka Mas'uulka ah

ICT

Jawaabta uu maamulka ka bixiyay

Wasaaradda Maaliyadda oo kaashaneysa La-taliyaha PREMIS ee xagga IT ayaa waxay diyaarin doonnaan siyaasadda iyo tilmaamaha ICT ee gacan ka geysta hirgelinta habraacyada ICT iyo qorshaha sii wadidda shaqada.

9.2.4.2 Hirgelin la'aanta istiraatiijiyadda gurmadka rasmga ah

U-fiirsashada

Xaaladda

Waxaan oggaaney in Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ay hirgelisay istiraatiijiyad rasmi ah oo loogu talagalay in ay taakule gadaale ama gurmad u noqoto xogta iyo barnaamijyada ay khuseyso waxaanna ka mid ah:

- mas'uuliyadda sameynta taakule gadaale ama gurmad;
- qaabka qalabka taakulaha gadaale ama gurmadka ah, t.a Veritas, Galaxy, iwm;
- hannaanka hawlgallada ee la raacayo si loogu guulaysto sameynta taakulada gadaale ee xogta maaliyadda iyo barnaamijyada la tilmaamay;
- tallaabo lagu saxayo waa in la qaado haddii ay dhacdo in la muujiyo kaydin guuldareysatay; iyo
- jadwalka taakulada gadaale waa in uu u dhigmaa halista xog luminta ku saleysan muhiimadda nidaamka (Maalinleh, toddobaadle, bille iwm).

Shuruudaha

In la taageero helidda xogta iyo barnaamijyada, istiraatiijiadda taakulada gadaale oo rasmi ah ayaa loo baahan yahay.

Sababta

Ku tiirsanaanta shirkadaha laga soo iibsaday nidaamka.

Saameynta

Ka-gaabinta in dib loo bilaabo adeeg bixinta waqtigii loogu talagalay.

Soo-jeedimo

Istaraatiijiyad ballaaran oo loogu talagalay kaydinta xogta iyo barnaamijyada ku habboon si loogu daro:

- mas'uuliyadda sameynta taakule gadaale ama gurmad;
- qaabka qalabka taakulaha gadaale ama gurmadka ah, t.a Veritas, Galaxy, iwm;
- hannaanka hawlgallada ee la raacayo si loogu guulaysto sameynta taakulada gadaale ee xogta maaliyadda iyo barnaamijyada la tilmaamay;
- tallaabo lagu saxayo waa in la qaado haddii ay dhacdo in la muujiyo kaydin guuldareysatay; iyo
- jadwalka taakulada gadaale waa in uu u dhigmaa halista xog luminta ku saleysan muhiimadda nidaamka (Maalinle, toddobaadle, bille iwm).

Muhiimadda

Sare

Agaasinka Ka Mas'uulka ah

ICT

Jawaabta uu maamulka ka bixiyay